Ministry of JUSTICE

PRISON REFORM TRUST

Warbixinta Loogu talagalay maxaabiista

2008 Somalian

© Prison Reform Trust and HM Prison Service/NOMS

This publication can be shared, copied, distributed and transmitted but not sold. It can not be altered in any way without the permission of the copyright owners.

Ministry of JUSTICE

The National Offender Management Service: part of the Ministry of Justice protecting the public and reducing re-offending by delivering probation and prison services.

PRISON REFORM TRUST

The Prison Reform Trust works to create a fair and decent prison system. We do this by looking at how prisons are working, giving information to prisoners, staff and people outside and by asking the government and officials to make changes.

First published in 2008 by Prison Reform Trust

ISBN: 0946209 86 3

For further information, contact:

Prison Reform Trust
15 Northburgh Street
London EC1V 0JR
020 7251 5070
www.prisonreformtrust.org.uk

Both HMPS and the Prison Reform Trust would like to thank prisoners and staff at HMP Wandsworth for helping with this book and Mencap for its work to make the book easier to read.

The Prison Reform Trust would like to thank the Big Lottery Fund and the Diana, Princess of Wales Memorial Fund for supporting our charity to improve information for prisoners.

Warbixinta loogu talagalay maxaabiista

Yaa xabsiga ka shaqeeya?

Guddoomiyaha ama **agaasimaha** ayaa xabsiga masuul ka ah. Waxaannu buuggan ku isticmaalaynaa ereyga guddoomiye.

Saraakiisha xabsiga - waxay xabsiga ka qabtaan shaqooyin badan waana shaqaalaha aad ugu badnaanta arki doonto.

Kormeeraha dembiilaha - kormeerahaaga dembiiluhu waxuu la shaqayn doonaa maamulahaaga dembiilaha si lagaaga caawiyo in aad gaarto himilooyinka ku jira qorshahaaga xukunka.

Saraakiisha shakhsi ahaaneed - kani waa sarkaal xabsi oo waqti u qaata in uu ku caawiyo warbixinno ayuuna ka qori doonaa horumarkaaga. Waxuu weliba kaala shaqayn karaa qorshahaaga xukunka.

Sarkaalka carbinta - qof kula shaqeeya si uu kaaga caawiyo in aadan dembi dib u gelin ka dib marka aad xabsiga ka baxdo.

Takhaatiirta cilminafsiyeedka - baaritaanno ayay kaa qaadaan waxayna shaqaalaha kale la maamulaan koorsooyinka akhlaaqda dembiga lagu galo.

Wadaaddada - waxay kaa caawin doonaan gudashada diintaada. Waxay u kala baxaan caqiidooyin kaladuwan. Waxaad weliba kala hadli kartaa waxa aad dareensan tahay.

Shaqaalaha tacliinta iyo hoosada - waxay dhigaan casharro iyo hoosooyin.

Shaqaalaha daryeelka caafimaadka - kuwani waa kalkaaliyeyaal caafimaad, takhaatiir, takhaatiir ilko iyo wixii la mid ah.

Shaqaalaha CARAT - waxay maxaabiista ka caawiyaan dhibaatooyinka mukhaadaraadka.

Xubnaha IMB - waa dad fiiriya in xabsiyada xaq lagu maamulo. Waa mutaddawiciin xaafadda ka yimid.

Booqdeyaasha rasmiga ah ee xabsiga - kuwani waa dad xaafadda deggan oo booqan kara maxaabiista aanan lahayn dad badan oo soo booqda.

Tusmada – waxa buuggan ku jira

Tusmada	Bogga
Wixii buuggan ku saabsan	4
Marka ugu horraysa ee aad timaaddo	5
Maxaabiista aanan dembi lagu xukumin	7
Maxaabiista rayidka ah	16
Muhaajiriinta la hayo	18
Ka rafcaan qaadashada dembi lagugu xukumo ama xukun lagugu soo rogo	22
Xisaabinta muddada aad xabsiga ku jiri doonto	25
Waxyaabaha u baahan in aad xalliso – xabsiga dibaddiisa	29
Dadka ku caawin kara xabsiga dhexdiisa	37
La xiriiridda qoyska iyo saaxiibbada	39
Xiriirka aad la yeelato looyarkaaga ama dadka kalee rasmiga ah	47
Nolosha xabsiga	49
Caafimaadkaaga	65
Caqiidadaada	78
Xeerasha Xabsiga	83
Sida cabasho ama codsi loo sameeyo	110
Maamulka dembiilaha, qorshaynta xukunka iyo isku diyaarinta sii-daynta	118
Ku sii-daynta shati ku meelgaar ah	134
Sii-daynta iyo kormeeridda	138
Maxaabiista ajnabiga ah	151
Dembiilaha dhallinyarada ah iyo xerooyinka dembiileyaasha dhallinyarada ah	155

Wixii buuggan ku saabsan

Waxuu buuggani kuu sheegi doonaa waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad u baahan tahay in aad ka ogaato ku jiridda xabsiga sida

✓ Xeerasha xabsiga iyo siyaabaha wax loo sameeyo.
✓ Xuquuqdaada.

Sarkaal xabsi weydii haddii aadan hubin wax kastoo buuggan ku jira

Yaa buuggan loogu talagalay?

Waxaa buuggan loogu talagalay maxaabiista lab ah oo ay soo raacaan dembiileyaasha dhallinyarada ah ee 18 jir ah ama ka weyn.

Maxuu buuggani ku saabsan yahay?

- Waxuu kuu sheegayaa waxaad u baahan tahay inaad ka ogaato nolosha xabsiga.
- Waxaa xabsi kaste u kaladuwanaan kara xeerasha iyo sida wax loo sameeyo. Mararka qaar xeerasha xabsigu si dhakhso ah ayay isku beddelaan. Waa laguu sheegi doonaa isbeddellada ku yimaadda xeerasha adiga ku saameeya.
- Maktabadda xabsiga ayay nuqullada xeerashu yaallaan.
- Waxaad codsan kartaa in aad xeerashaas aragto xataa haddii aadan maktabadda tegi karin.

Halka laga helo nuqullada buuggan

- Maktabadda xabsiga.
- Shaqaalaha xabsiga ayaa kuu soo daabici kara nuqulka buuggan, ama qaybo ka mid ah, haddii aadan ka heli karin maktabadda.
- Haddii aad hesho nuqul daabacan, waxaa laguu oggolaan karaa in aad haysato ama la wadaagto dadka kale ee ku jira waaxdaada.
- Haddii aad nuqul haysato fadlan daryeel maadaama ay adkaan karto in aad mid kale hesho.

Marka ugu horraysa ee aad timaaddo

- ✓ Waxaa lagu geyn doonaa qaybta soo-dhawaynta ee xabsiga.
- ✓ Shaqaalaha u sheeg wixii mukhaadaraad ama khamri ah ee lagaa caawin karo.
- ✓ Shaqaalaha xabsiga ayaa kula habayn doona dharkaad xiranayso. Waxaa waajibi karta inaad xirato dharka xabsiga haddaad tahay maxbuus dembi lagu xukumay.
- ✓ Shaqaalaha xabsiga midkood ayaa liis gelin doona wixii kastee aad sidato. Qaar ayaad haysan kartaa. Waxa kaloo dhan meel adag ayaa laguugu hayn doonaa. Marka aad baxayso ayaa waxoo dhan laguu soo celin doonaa, marka laga reebo wixii khatar ama sharci-darro ah. Matalan, mindiyaha ama mukhaadaraadka.
- ✓ Shaqaalaha xabsiga midkood ayaa ku baari doona. Takhtar ayaad codsan kartaa takhtar haddii dhibaato caafimaad kugu adkaynayso in jirkaaga gebi la baaro.
- ✓ Takhtar ama kalkaaliye u codso dhibaatadaada caafimaad. U sheeg takhtarka ama kalkaaliyaha haddaad daawo qaadato, ama qabto dhibaato mukhaadaraad ama khamri. Weliba u sheeg haddaad murugo badan tahay ama walwal qabto.
- ✓ Waxaa laguu oggolaan doonaa in aad qoyskaaga wacdo. Waxaa weliba laguu sheegi doonaa sida aad u qabanqaabin karto in ay kuu yimaaddaan.
- ✓ Waxaa lagu siin doonaa lambar xabsi.
- ✓ Waxaa lagu geyn doonaa qolka aad seexan doonto.
- ✓ Qubaysiga jiifka ama sarajoogga ayaad qaadan kartaa haddii aad rabto.
- ✓ Shaqaalaha kale ayaa lagu bari doonaa. Qof la yiraahdo sarkaalka shakhsi ahaaneed ayaa waraysi kaa qaadi kara.
- ✓ Shaqaalaha ayaa sawir kaa qaadi kara farahaagana sawiri kara.
- ✓ Shaqaalaha ayaa war dheeraad ah kaa siin doona nolosha xabsiga iyo waxaad u baahan tahay in aad samayso. Waxaa taas loo yaqaannaa tilmaansiinta.

Warbixin dheeraad ah

Halka aad seexan doonto (qolkaaga)

- Waxaa waajibi karta inaad qol la wadaagto qof kale. Hadday sidaas tahay, shaqaalaha xabsiga ayaa fiirin doona qofka ugu fiican inaad la wadaagto. Waad u sheegi kartaa haddii taasi ku dhibayso. Laguuma keeni doono qof sigaar cabba haddaadan adigu cabbin. U sheeg shaqaalaha haddaad walaac ama halis dareento.

- Xabsiyada qaar ayaa leh meel gaar ah oo ay maxaabiistu seexdaan habeenka ugu horreeya si ay ula qabsan karaan joogitaanka xabsiga.

Waxaad samaynayso haddii…

Aad murugo badan ama walwal dareento markaad tagto xabsiga

Waa muhiim in aad dareenkaas qof kala hadasho.

Waxaad u sheegi kartaa

- ✓ shaqaalaha xabsiga. Waxaad yeelan kartaa qof la yiraahdo sarkaalka shakhsi ahaaneed. Ama waxaad la hadli kartaa sarkaalka masuul ka ah qaybtaada xabsiga (waxaa taas loo yaqaannaa waaxda ama dhulka)
- ✓ takhtarka ama kalkaaliyaha caafimaadkaaga baaray
- ✓ wadaadka
- ✓ maxbuus loo yaqaan dhegeyste ama saaxiib
- ✓ hay’adda Samaritans (Samafaleyaasha).

Aad ka walwal qabto carruur ama dad kaloo aad daryeesho

- La hadal mid kastoo ka mid ah dadka kor ku taxan.

Aad u baahato looyar – haddaadan fursad u helin intaad maxkamadda joogtay

- Weydii sarkaalka xabsiga ee soo-dhawaynta inuu kuu diyaariyo looyar ku yimaadda.

Maxaabiista Aanan dembi lagu xukumin

Waa kuwama maxaabiista aanan dembi lagu xukumin?

- ✓ Maxaabiista **aanan dembi lagu xukumin** waa kuwa sugaya in maxkamad la geeyo.
- ✓ Maxaabiista aanan dembi lagu xukumin waxaa loo arkaa in **aanay dembiile ahayn**. Maxaa yeelay weli maxkamadda looma geyn dembigooda.
- ✓ Maxaabiista aanan dembi lagu xukumin waxay samayn karaan waxyaabo aanay samayn karayn maxaabiista dembi lagu xukumay. Matalan weli way codbixin karaan dharkooda ayaanay xiran karaan.
- ✓ Maxaabiista aanan dembi lagu xukumin waa in ay weli raacaa inta ugu badan isla xeerasha maxaabiista kale u yaalla.

Adoo ah maxbuus aanan dembi lagu xukumin, waa in lagaa caawiyo lagaana taageero

- codsiga damiinasho
- haysashada gurigaaga iyo shaqadaada
- isku diyaarinta maxkamadda
- la xiriiridda qoyska iyo saaxiibbada
- sii wadidda ama ku sii jiridda ganacsi, kaasoo sharci ah
- gargaar ka helidda dhibaatooyin aad qabto.

Codsiga damiinasho ee maxbuus aanan dembi lagu xukumin

Codsiga damiinasho waa codsashada in lagaa sii daayo xabsiga inta aad maxkamadda sugayso.

Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarrada Adeegga Xabsiga ee 6100 iyo 6101**.

Maktabadda ayuu nuqul labadaba ka yaallaa.

Sida damiinasho loo codsado

Qodobbada ugu muhiimsan

- ✓ Dhowr jeer ayaad maxkamad keliya, ama qof la yiraahdo Xaakinka Qolka, ka codsan kartaa damiinasho, hadday marka koowaad diidaan. Laakiin waa sidaas uun haddaad sabab cusub u keeni karto in ay habboon tahay in damiinasho laguu oggolaado.

- ✓ Markaad damiinasho codsato, bixi gebi sababaha aad karto ee ay ku habboon tahay in maxkamaddu damiinasho kuu oggolaato.

- ✓ Haddii maxkamaddu damiinasho kuu diiddo, eeg sababaha ka hor inta aadan dib u codsan. Weydii sarkaalka warbixinta damiinashada ama sarkaalka adeegyada sharci ama looyarkaaga haddaadan hubin sababta aadan damiinasho u helin.

- ✓ Sarkaalka warbixinta damiinashada weliba ka warayso gargaarka aad uga baahato codsiga damiinasho. Waxaa jira qorshaha Clearsprings oo guryeynta kaa caawinaya.

- ✓ Haddaad gargaar uga baahato dalbashada kaalmada sharci (lacag kaa caawisa kharashka talada ama wakiilka sharci), la hadal sarkaalka adeegyada sharci.

- ✓ Waxaad u baahanaysaa cinwaan meel aad degto si ay maxkamaddu damiinasho kuugu oggolaato.

Meel aad degto

- Haddaad damiinasho codsato, waxaad u baahan in aad maxkamadda siiso cinwaan aad degto haddii damiinasho lagugu sii daayo. Waxuu kaasi noqon karaa gurigaaga ama ka saaxiibbadaa ama qaraabadaa. (Saaxiibbadaa ama qaraabadaa waa in ay maxkamadda horta u sheegaan in aad la degi karto.)

- Haddaadan meel haysan, sarkaalka warbixinta damiinashada ama sarkaalka adeegyada sharci gargaar u doono. Meel ayay kuu heli karaan sida hostal.

Haddaad tagayso Maxkamadda Dembiyada fudud

Damiinasho ayaad codsan kartaa mar kastoo aad Maxkamadda Dembiyada fudud u tagto dacwaddaada. Ama looyarkaaga weydiiso in uu taas kuu sameeyo.

1. Waa in aad damiinashada foomam u buuxiso. Waa in looyarkaaga ama sarkaalka adeegyada sharci taas kaa caawiyaan.

2. Haddii maxkamaddu kuu diiddo damiinasho, warqad ayaad sababta taas ku heli doontaa. Warqadda hayso maadaama ay wax kuu tari karto haddaad damiinasho dib u codsanayso.

3. Haddii Maxkamadda Dembiyada fudud go’aansato inay marna ku siin damiinasho, waxay kuu soo diri warqad shahaado loo yaqaan oo taas ku ogaysiisa.

4. Haddaad Maxkamadda Dembiyada fudud ka hesho shahaado oranaysa in ay xaqiiqada wada maqashay, waxaad shahaadada u diri karta markaa Maxkamadda Dembiyada culus si aad damiinasho uga codsato.

5. Haddii Maxkamadda Dembiyada culus maya tiraahdo, waxaad warqad u diri kartaa qof la yiraahdo Xaakinka Qolka (Judge in Chambers) ee Maxkamadda Sare si aad damiinasho uga codsato.

Haddaad tagayso Maxkamadda Dembiyada culus

1. Warqad u dir garraaniga Maxkamadda Dembiyada fudud ee kuu diray Maxkamadda Dembiyada culus. Ama looyarkaaga weydiiso inuu taas kuu sameeyo.

2. Waxaad looyarkaaga weydiisan kartaa inuu toos Maxkamadda Dembiyada culus uga codsado.

3. Haddaadan haysan lacag aad siiso looyar iyo kaalmo sharci qof la yiraahdo Looyarka Rasmiga ah ayaad gargaar weydiisan kartaa. Weydii sarkaalka adeegyada sharci sida taas loo sameeyo. **Amarka Adeegga Xabsiga ee 2600** waxaa ku jira war dheeraad ah oo ku saabsan Looyarka Rasmiga ah iyo waxyaabo kaloo sharci. Waxaad nuqul ka heli kartaa maktabadda xabsiga.

Haddii Maxkamadda Dembiyada fudud iyo Maxkamadda Dembiyada culus ay kuu diideen damiinasho

Waxaad damiinasho weydiisan kartaa **Xaakinka Qolka** ee Maxkamadda Sare.

Sidan ayaad damiinasho u weydiisan kartaa Xaakinka Qolka

1. Weydiiso looyarkaaga inuu taas kuu sameeyo. Haddaad lacag siinayso looyar, waa in aad taas lacag u siiso.

2. Haddaadan haysan lacag aad siiso looyar ama aadan kaalmo sharci heli karin Looyarka Rasmiga ah ayaad weydiisan kartaa in uu damiinasho kuu codsado. Waxaad u baahan in aad foom ku dhigto caddadka lacagta aad haysato. Waxay taasi Looyarka Rasmiga ah tusaysaa in aadan lacag u haynin looyar.

Haddaad tagayso Maxkamadda Dembiyada culus si laguu xukumo

Waxaad Maxkamadda Dembiyada culus ka codsan kartaa damiinasho. Haddii Maxkamadda Dembiyada culus damiinasho kuu diiddo waxaad weydiisan kartaa Xaakinka Qolka ee Maxkamadda Sare.

Maxaa dhacaya haddii damiinasho la ii oggolaado?

Waxaa jira xeerar aad raacayso haddii damiinasho laguu oggolaado.

Matalan

- Waa inaad ku soo noqoto maxkamadda marka lagaa rabo, haddaadan sabab fiican haysan.

- Waxaa kugu waajibi karta matalan in aad degto cinwaan gaar ah, tagto saldhig booliis maalinwalba ama xirato silig (tag).

- Waxaa kugu waajibi karta in aad hesho saaxiibbo ama qaraabo lacag bixiya haddaad maxkamadda iman weydo. Dadkaas waxaa lo yaqaannaa **hubeyaasha**.

Haddaad jebiso xeerasha markaa waa lagu soo qaban karaa ama dembi lagugu eedayn karaa. Haddaad iman weydo maxkamadda, qaraabada ama saaxiibbada hubeyaal kuu ah ayaa laga qaadi karaa gebi lacagta ay ku heshiiyeen, ama xabsiga geli kara.

Hubeyaasha

- Hubeyaashu waa saaxiibbada ama qaraabada ku heshiiya in ay lacag bixiyaan haddii damiinasho lagugu sii daayo oo aad maxkamadda iman weydo marka lagaa rabo.

Sida qaraabadaa ama saaxiibbadaa hubeyaal u noqon karaan

Haddaad u aragto in damiinasho aad heli karto intaad joogto Maxkamadda Dembiyada fudud

Hubi in qaraabada ama saaxiibbada oggol in ay hubeyaal noqdaan ay kula joogaan maxkamadda. Haddaad damiinasho hesho oo maxkamaddu ay dadka u oggolaato in ay hubeyaal noqdaan, islamarkaa ayaa halkaa lagaa sii dayn doonaa.

Haddaad damiinasho hesho marka aadan maxkamadda joogin

1. Waa in saaxiibbadaa ama qaraabadaa ay tagaan maxkamadda ama saldhigga booliiska si loo fiiriyo in ay hubeyaal noqon karaan. Waa in ay keenaan dukumeentiyo muujinaya in ay bixin karaan lacagta looga baahdo.

2. Waxaa waajibi doonta in saaxiibbadaa ama qaraabadaa ay saxiixaan dukumeenti ay ku oggolaanayaan in ay hubeyaal noqdaan.

3. Maxkamadda ama saldhigga booliiska ayaa markaa saaxiibbadaa ama qaraabadaa siin doona dukumeenti shahaado loo yaqaan hadday la tahay in ay hubeyaal noqon karaan.

4. Waa in saaxiibbadaa ama qaraabadaa ay shahaadada geeyaan xabsiga si laguu sii daayo. Waxay taasi xabsiga tusaysaa in maxkamadaha ama booliisku ay oggolaadeen in ay hubeyaal noqon karaan.

Gaadiidka aad xabsiga kaga tagayso haddaad damiinasho hesho

- Haddaad damiinasho hesho oo aadan haysan lacag aad maxkamadda kaga hooyato, shaqaalaha ku keenay maxkamadda ayaa kuu habayn kara inaad hesho wax loo yaqaan rukhsadda safarka (travel warrant). Kani waa tigidh aad bilaash ugu safri karto cinwaanka aad ku joogi doonto damiinashadaada.
- Waxaad weliba rukhsad safar ka heli kartaa shaqaalaha xabsiga ku geeyey. Ama shaqaalaha xabsiga haddaad xabsiga joogto oo aad maxkamadda kula hadashay xiriir fiidiyow.

Isku diyaarinta tegidda maxkamadda

Sarkaalka adeegyada sharci ee xabsiga waa inaad kala hadasho gargaarka laga heli karo isku diyaarinta maxkamadda iyo helidda looyar.

1. Helidda markhaati kuu timaadda maxkamadda

- Looyarkaaga gargaar ka weydii helidda markhaati maxkamadda kaaga hadasha.
- Haddaadan looyar lahayn sarkaalka adeegyada sharci gargaar weydiiso.
- Sarkaalka adeegyada sharci markhaati kuuma keeni karo. Laakiin wuxuu kaa caawin karaa warqad aad ku weydiisato saaxiibbadaa ama qaraabadaa inay markhaati kuu keenaan.
- Warqad ayaad booliiska ku weydiisan kartaa inay markhaati kuu keenaan. Laakiin booliisku ma ballanqaadi karaan in ay dadkaasi maxkamadda iman doonaan.

2. Isticmaalka kumbiyuutar kaa caawiya hawshaada sharci

- Taas uma isticmaali kartid kumbiyuutarkaaga gaarka ah.
- Guddoomiyaha weydiiso haddaad rabto in aad hawshaada sharci u isticmaasho kumbiyuutar xabsiga yaalla.
- Guddoomiyuhu waxuu kuu diyaarin doonaa kumbiyuutar dhab oo xabsigu leeyahay hadduu u arko inaad mid u baahan tahay si maxkamaddu xaq kuugu noqoto.
- Waa inaad xeerar raacdo haddii guddoomiyuhu ku siiyo kumbiyuutar dhab oo xabsi.
- Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarsiinta Adeegga Xabsiga ee 2/2001**. Maktabadda ayuu nuqul ka yaallaa.

3. Alaabtaada

- Alaabtaada gebi u qaado maxkamadda bal haddii lagu sii daayo. Haddaad wax kaga tagto xabsiga ka dib marka lagu sii daayo waa inaad la xiriirto xabsiga si aad u soo doonato.

Wixii kalee khuseeya maxbuuska aanan dembi lagu xukumin

Caafimaadkaaga

- Waajib **ma aha** in aad shaqaalaha caafimaadka ee xabsiga ka hesho daryeelka caafimaadka ee NHS haddaadan rabin.
- Waxaad daryeel caafimaad ka heli kartaa takhtar ama takhtar ilko oo khaas ah laakiin waxaa kugu waajibi karta in aad lacag ka bixiso.
- Shaqaalaha caafimaadka weydii haddaad taas rabto. Iyaga iyo guddoomiyuhu taas way kuu oggolaan doonaan caadi ahaan.

Codbixinta

Weli waad codbixin kartaa intaad xabsiga joogto haddii

- aanan dembi lagugu xukumin
- dembi lagugu xukumay laakiin aanan weli xukun lagugu soo rogin
- aad tahay maxbuus rayid ah oo xabsiga loo dhigay ganaaxyo uusan bixin ama wax maxkamaddu ku amartay oo uu samayn waayey (taas waxaa loo yaqaannaa xaqiraadda maxkamadda)

Waa in magacaagu ku jiro liis la yiraahdo **diiwaanka doorashada** si aad u codbixiso.

Haddii magacaagu uusan hore ugu jirin diiwaanka doorashada

1. Waa inaad buuxiso foom una dir qof ka baxsan xabsiga oo la yiraahdo Sarkaalka Diiwaangelinta Doorashada. Cinwaannada foomamka loo diro waxay ku jiraan **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4650**. Maktabadda xabsiga ayuu nuqul ka yaallaa.

2. Sarkaalkaaga shakhsi ahaaneed ama sarkaal kaloo xabsiga weydiiso foomka ama warbixin dheeraad ah oo ku saabsan codbixinta.

3. Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4650**. Waxuu weliba kaaga warramayaa matalan ku codbixinta boostada (boostada oo aad ku codbixiso) ama wakiilka codbixinta (qof kale oo kuu codbixiya).

Shaqada iyo lacag qaadashada

- Waajib **ma aha** in aad xabsiga ka shaqayso haddaadan rabin.
- Haddaad shaqo rabto laakiin aad weydo, waxaa asbuuc kaste lagu siin doonaa lacag yar oo aad ku iibsato waxaad u baahato.
- Haddaad diiddo shaqo lagu siiyo xabsigu lacag waa kuu diidi karaa. Waxaana dhici karta in aanan shaqo kale lagu siinin.

Maxaabiista rayidka ah

Maxaabiista rayidka ah waa dadka xabsiga la dhigo matalan marka ay

- bixin waayaan masruufka lagu daryeelo carruurtooda
- bixin waayaan lacagaha loo yaqaan ganaaxyo ama deymo
- bixin waayaan lacag ay oggolaadeenn inay bixiyaan haddii qof ay garanayaan damiinasho ku jiray kana maqnaaday maxkamadda
- samayn waayaan wax maxkamaddu ku amartay.

Maxaabiista rayidka ah badi sida maxaabiista dembi lagu xukumay ayaa loola dhaqmaa. Farqi ayaase u dhexeeya. Matalan, haddaad maxbuus rayid ah tahay

- Waxaad xaq ugu leedahay martida, waraaqaha iyo wicista sida maxaabiista aanan dembi lagu xukumin. **Eeg bogga 40aad.**
- Waajib ma aha in aad dhexgasho maxaabiista kale haddaadan rabin.
- Dharkaagaad xiran kartaa. Haddaadan haysan dhar kugu filan shaqaalaha xabsiga ayaad qaar weydiisan kartaa.
- Codbixinta waa laguu oggolaan karaa haddii xabsiga laguu keenay xaqiraadda maxkamadda ama ganaax aad bixin weyday. Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4650**. Maktabadda ayuu nuqul ka yaallaa.

Wixii kalee khuseeya maxbuuska rayidka ah

Hore kaaga sii daynta xabsiga

- Waxaan suurogali karin hore kaaga sii daynta xabsiga oo ku xiran sababta maxkamaddu kuu dhigtay. Wayba waajibi kartaa inaad xukunka dhammaysato. Shaqaalaha xabsiga ayaa taas eegi doona markay dejinayaan taariikhda lagu sii daynayo.

- Sarkaalkaaga shakhsi ahaaneed, sarkaal kaloo xabsi ama shaqaalaha carbinta gargaar weydiiso haddii

    - aadan hubin in hore laguu sii dayn karo iyo in kale

    - aad u aragto inay habboon tahay in hore laguu sii daayo laakiin shaqaalaha xabsigu aanay taas tixgelin markay dejinayeen taariikhda lagu sii daynayo.

Ka rafcaan qaadashada in xabsi laguu dhigo xaqiraad maxkamad

- Xaqiraadda maxkamad waa marka la samayn waayo wax maxkamadi kaa rabto. Waad rafcaan qaadan kartaa haddii xabsiga laguu dhigay xaqiraad maxkamad. Rafcaan qaadashadu waa isku dayidda in la beddelo go'aanka maxkamadda.

- Horta sarkaalka adeegyada sharci ee xabsiga u doono talo taas ku saabsan.

Haddii Maxkamad Dembiyo fudud xabsiga ku dhigtay

- Rafcaan u diro Maxkamadda Dembiyada culus ama looyarkaaga weydiiso inuu taas kuu sameeyo 21 cisho gudahood ka dib marka xukun laguu soo saaro.

Haddii Maxkamad Dembiyo culus ama Maxkamad Degaan xabsiga ku dhigtay

- Rafcaan u diro Maxkamadda Rafcaanka Rayidka ama looyarkaaga weydiiso inuu taas kuu sameeyo 14 cisho gudahood ka dib marka xukun laguu soo saaro. Cinwaanka rafcaankaaga aad u dirayso waa

    Civil Appeal Court
    Royal Courts of Justice
    Strand
    London
    WC2N 2LL

Muhaajiriinta la hayo

Muhaajiriinta la hayo. Muhaajiriinta la hayo waa dad aanan u dhalan Ingiriiska (Ingland, Skotland, Wales iyo Waqooyiga Ayrland).

Kuwani caadi ahaan waa dad xabsi loogu hayo jebinta xeerasha haajiraadda ama falidda dembi oo iminka sugaya haddii dib loogu celin doono (masaafurin) dalkay ka yimaaddeen.

Hay'adda Xuduudda iyo Haajiraadda ayaa go'aamisa waxa lagu samaynayo muhaajiriinta la hayo.

Hay'adda Xuduudda iyo Haajiraadda. Tani waa koox dad u shaqeeya dawladda. Waxay masuul ka yihiin maamulidda ciddii shaqo, booqasho ama degid u timaadda dalka.

- ✓ Hay'adda Xuduudda iyo Haajiraadda ayaa kula xiriiri doonta intaad xabsiga ku jirto. Waxay baari doonaan dacwaddaada intaad xabsiga ku jirto.
- ✓ Waa inaad xabsiga ugu dhaqanto isla xeerasha u yaalla maxaabiista aanan dembi lagu xukumin. **Dib u tag bogga 7aad si aad war dheeraad ah u hesho**
- ✓ Isku day in aad gargaar looyar ka hesho. La xiriir urur la yiraahdo Adeegga Talobixinta Haajiraadda haddaadan looyar lahayn. **Cinwaankoodu bogga 20aad ayuu ku yaallaa.** Waa in aad looyarkaaga wici karto, warqad amaba fakis u diri karto. Ama wuu kuu iman karaa.
- ✓ Gargaar dadkan weydiiso haddaad u baahato
    - o sarkaalkaaga shakhsi ahaaneed haddaad mid leedahay
    - o sarkaalka xabsiga ee masuul ka ah waaxdaada
    - o qof la yiraahdo sarkaalka sinnaanta jinsiyadeed ee xabsiga
    - o ama qof la yiraahdo isuduwaha maxaabiista ajnabiga ah haddii mid xabsigaaga joogo.
- ✓ Turjumaan ayaad heli kartaa haddaad mid u baahato. (Kani waa qof ku fahansiin kara wax af Ingiriisi lagu yiraahdo).
- ✓ Waxaad war dheeraad ah ka eegi kartaa buugyare la yiraahdo **Information and Advice for Foreign National Prisoners (Warka iyo Talada loogu talagalay Maxaabiista Ajnabiga ah)**. Maktabadda ayuu nuqul ka yaalllaa.

La xiriiridda shaqaalaha baaraya dacwaddaada

- Dadka ka socda Hay'adda Xuduudda iyo Haajiraadda ayaa kula xiriiri doona intaad xabsiga ku jirto. Waxaa dhici karta in ay iminka ka shaqeeyaan xabsigaaga, ama xabsigaaga ayay iman karaan.
- Waanad iyaga la xiriiri kartaa haddaad u baahato.
- Looyarkaaga, sarkaal xabsi ama guddoomiyaha ayaad weliba weydiisan kartaa in uu la xiriiro shaqaalaha haajiraadda ee baaraya dacwaddaada.

Codsiga in damiinasho lagugu sii daayo (tani waa codsiga in lagaa sii daayo xabsiga inta dacwaddaada la baarayo)

- Waxaad codsan kartaa in xabsiga lagaaga sii daayo damiinasho.
- Waxaad u baahanaysaa inaad buuxiso foom la yiraahdo **IS 91R** si aad u codsato in damiinasho lagugu sii daayo.
- Foomka ayuu ku jiraa war dheeraad ah oo ku saabsan ku bixidda damiinasho.
- Codsiga damiinashada waxaa kaa caawin kara
    - urur la yiraahdo Adeegga Talobixinta Haajiraadda **(macluumaadkoodu waxay ku yaallaan bogga 20aad)**
    - shaqaalaha haajiraadda ee ka shaqeeya ama yimaadda xabsigaaga
    - looyarkaaga ama shaqaalaha xabsiga. Waxay la xiriiri karaan shaqaalaha haajiraadda ee dacwaaddaada baaraya.

Dadka ku caawin kara

1. Adeegga Talobixinta Haajiraadda

Waxay dadkani talo iyo gargaar bilaash ah siiyaan muhaajiriinta la hayo.

Immigration Advisory Service
Head Office
3rd Floor
County House
190 Great Dover Street
London
SE1 4YB

Telefoonka guud 0207 967 1200

Khadka caawinta 0207 967 1299 (saacadaha la shaqeeyo gudahood).

Fakiska 0207 403 5875

2. Adeegga Talobixinta Haynta

Waxay dadkani kaala talin karaan kaana caawin karaan waxyaabaha la xiriira xaaladda muhaajir la hayo. Waxay kaa caawin karaan inaad looyar aragto badina xabsiyada ayay yimaaddaan.

Detention Advice Service
Unit B3
62 Beechwood Road
London
E8 3DY

Telefoonka 0207 254 6888

Fakiska 020 7254 8555

3. Golaha Wadajir ee Daryeelka Muhaajiriinta (Joint Council for the Welfare of Immigrants = JCWI)

Waxay dadkani gargaar, warbixin iyo talo siiyaan muhaajiriinta la hayo.

Joint Council for the Welfare of Immigrants
115 Old Street
London
EC1 9RT

Telefoonka 020 7251 8706

Fakiska 0207 251 8707

Haddaad magangalyo doon tahay (qof ay dalkiisii khatari ka keentay oo sugaya in uu ogaado haddii uu joogi karo Ingiriiska), la xiriir

4. Xarunta Sharci ee Qaxootida (Refugee Legal Centre = RLC)

Refugee Legal Centre
Nelson House
153-157 Commercial Road
London
E1 2DA

Telefoonka 0207 780 3200

Fakiska 0207 780 3201

Waxaad weliba soo wici kartaa lambarradan

1. Lambar **telefoon bilaash ah** 0800 592 3333 ama 0207 780 3333
Waxaad lambarkan soo wici kartaa Isniinta, Arbacada iyo Jimcaha laga bilaabo 10.30ka subaxnimo ilaa 1.00da duhurnimo iyo laga bilaabo 2.00da duhurnimo ilaa 4.30ka galabnimo.

2. Haddaad **xaalad degdeg ah** ugu baahato inaad qof dhakhso kula hadasho waxaad soo wici kartaa 07831 598057.
Waxaad lambarkan soo wici kartaa toddobaadka iyo wiikeendiga laga bilaabo 6.00da fiidnimo ilaa 8.00da subaxnimo.

Ka rafcaan qaadashada dembi lagugu xukumo ama xukun lagugu soo rogo

Ereyada waxtarka leh

Dembiga lagugu xukumo. Markii maxkamaddu go'aansatay inaad dembiga lahayd.

Xukunka lagugu soo rogo. Waxa maxkamaddu amarto in lagugu sameeyo maadaama dembi lagugu xukumay.

Rafcaan qaadasho. Kani waa markaad isku daydo inaad beddesho go'aanka maxkamadda ee khuseeya dembiga lagugu xukumo ama xukunka lagugu soo rogo.

Waxaad isku dayi kartaa inaad beddesho go'aanka khuseeya **dembiga lagugu xukumo** iyo **xukunka** laguu soo saaraba. Tani waxaa loo yaqaannaa rafcaan. Looyarkaaga ayaa kuu sheegi kara haddaad rafcaan qaadan karto iyo waxaad ka rafcaan qaadan karto.

Qodobbada ugu muhiimsan

- Taxaddar u fikir ka hor intaadan go'aansan inaad rafcaan qaadato. Mararka qaar, haddaadan rafcaanka ku guuleysan, muddada rafcaankaaga eed ku jirto xabsiga waxay maxkamaddu ku dari kartaa xukunkaaga.
- Hubi inaad la tashato looyarkaaga ama qareenkaaga ka hor intaad wax go'aansan.
- Waxaa waajibi karta inaad dhakhso u rafcaan dirato. Caadi ahaan 28 cisho gudahood ka dib marka dembi lagugu xukumo ama xukun lagugu soo rogo. Waa suurogal in laguu oggolaado rafcaan qaadashada taas ka dib. Looyarkaaga talo weydiiso.
- Codso in aad la hadasho qof xabsiga jooga oo la yiraahdo sarkaalka adeegyada sharci. Waxuu kuu macnayn karaa sida loo rafcaan qaato.
- Haddaad rafcaan qaadato, waxaad u baahan doonta lacagta aad ku bixinayso. Waxaad codsan kartaa lacag la yiraahdo Maalgelinta Adeegyada Sharci.

Sida loo rafcaan qaato

1. La hadal looyarkaaga ama qareenkaaga. Haddaadan fursad u helin inaad isaga maxkamadda kula hadasho, guddoomiyaha weydiiso inay iyagu kuu iman karaan.

Looyarkaaga ama qareenkaaga ayaa
- kuu sheegi doona nasiibka aad ku leedahay rafcaankaaga inaad ku guuleysato
- buuxin doona foomamka haddaad go'aansato inaad rafcaan qaadato.

2. Codso inaad la hadasho sarkaalka adeegyada sharci. Waxuu kuu macnayn karaa sida loo rafcaan qaato.

3. Sarkaalka adeegyada sharci ayaa kuu sheegi kara foomamkaad buuxinayso iyo halkaad u dirayso. Waxay taasi ku xiran tahay haddaad tagtay Maxkamad Dembiyo culus ama Maxkamad Dembiyo fudud.

4. Haddii rafcaankaaga la samayn karo, codso lacagta aad ku bixinayso rafcaanka. Lacagta waajib ah inaad codsato waxaa la yiraahdaa **Maalgelinta Adeegyada Sharci.**

Maalgelinta Adeegyada Sharci (lacagta) lagu bixiyey maxkamaddaada waxaad ku doonaan kartaa uun talo ku saabsan sida loo rafcaan qaato, rafcaan kuma fulinaysid.

Waxa aad samaynayso haddii…

Aad rabto inaad bedesho looyarkaaga ama qareenkaaga.

- La hadal looyarkaaga ama qareenkaaga hadda una sheeg sababtaad u beddelayso. Waxuu Xaakinka weydiin doonaa hadduu taas kuu oggol yahay.
- Ama lacag ayaad bixin kartaa si aad u aragto looyarka ama lataliyaha sharci eed rabto.

Aad rabto in damiinasho lagugu sii daayo intaad rafcaankaaga sugayso?

- Waxaad u baahanaysaa inaad buuxiso foom la yiraahdo **Form B** ood u dirto Maxkamadda Rafcaanka.

Haddii rafcaankaaga la diido (tani waa adoon ku guulaysan)

- Koox dad oo la yiraahdo **Guddiga gaarka ah ee Dib u eegidda Dacwadaha Dembi** ayaad weydiisan kartaa inay dacwaddaada baaraan.

- Waxay baari karaan dacwadaha la ah in qalad laga galay. Waxay dacwadda ku celin karaan Maxkamadda Rafcaanka.

- Waxaad u baahanaysaa inaad iyaga tusto **war ama daliil cusub** oo aanan lagu soo hadal qaadin maxkamadda ama rafcaanka.

- Waxaa ku caawin kara looyar.

- Waxaa lagugu caawin karaa Maalgelinta Adeegyada Sharci. Waxaad u baahanaysaa inaad buuxiso foomamka la yiraahdo **CDS1** iyo **CDS2** si aad lacagtaas u codsato.

- Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4400**, tuduca 3aad. Waxaad nuqul ka heli kartaa maktabadda xabsiga.

Xisaabinta muddada aad xabsiga ku jiri doonto

Qodobbada ugu muhiimsan

- Maxkamadda ayaa go'aaminaysa muddada xukunkaaga, laakiin waqti ayay qaadataa si faahfaahinta loo dejiyo.
- Markaad xabsiga tagto ayaa laguu sheegi doonaa taariikhda xukunkaagu dhammaanayo. Haddii xabsigu sugayo warka muddada xukunkaaga, waxaa laguu sheegi karaa in warkaasi **ku meelgaar yahay.** Waxay tani ka dhigan tahay inuu isbeddeli karo.
- Haddaad jebiso xeerasha xabsiga maalmo dheeraad ah ayaad xabsiga ku jiri kartaa. Tani kuma jirto xukunkaaga. **War dheeraad ah ka eeg bogga 83aad**
- La hadal sarkaalkaaga shakhsi ahaaneed ama shaqaale kaloo xabsiga haddaad u baahato in lagu fahansiiyo xukunkaaga xabsiga.

Wixii xukunkaaga ku saabsan – tani ma khusayso xukunka xabsi daa'in ama aanan caddayn ee maxaabiista ilaalinta shacabka

Waxaa xukunkaaga lagu xisaabiyaa iyadoo la fiiriyo

- taariikhda lagu xukumay
- muddada xukunkaaga
- taariikhda aad dembiga geysatay
- adeegga xabsigu waxuu tixgelin doonaa waqtiga dembiga xabsi laguugu hayey haddaad kaas geysatay ka hor 4tii Abriil 2005tii
- haddii dembiga aad geysatay ka dib 4tii Abriil 2005tii waxay maxkamaddu xabsiga ku amri kartaa inuusan xisaabta ku darin waqtigii lagu hayey.

Inteed xabsiga ku jiri doontaa?

Waxay taasi ku xiran tahay taariikhda dembigu dhacay. Waxuu war dheeraad ah ku jiraa bilowga **bogga 145aad**.

Dadka waaweyn ee lagu xukumo ilaa 12 bilood

- Sii-dayntaadaada shuruud laguma xiri doono (AUR).
- Maamule dembiile **kuma** kormeeri doono.
- Warbixin la yiraahdo ogaysiin ayaa lagu siin doonaa. Ogaysiintaas ayaa kuu macnayn doonta waxay taasi ka dhigan tahay waana in aad saxiixdo.

Dembiyada la geystey ka hor 4tii Abriil 2005tii

Haddii xukunkaagu 1 sano ka yar yahay

- Waxaa shati la'aan lagugu sii dayn doonaa dhexda (haddaadan 21 jir ka yarayn).

Haddii xukunkaagu 1 sano ka badan yahay uuna 4 sano ka yar yahay

- Markaad xukunkaaga **nuskii** dhammayso ayaa lagu sii dayn doonaa.
- Markay taasi dhacdo, waa inaad aragto qof ka socda carbinta oo hubin doona inaad xafidayso xeerasha shatigaaga.
- Shatigaagu waxuu dhammaanayaa markuu rubuc ka hadho xukunkaaga.

Haddii xukunkaagu yahay 4 sano ama ka badan yahay

- Sii-dayn sharafeed ayaad codsan kartaa markaad gaarto xukunkaaga **nuskii**.
- Haddaad sii-dayn sharafeed hesho, qof ka socda adeegga carbinta ayaa kula socon doona ka dib marka lagu sii daayo.
- Haddaad heli **weydo** sii-dayn sharafeed, sanad kaste ayaad dib u codsan kartaa hadduusan waqti 13 bilood ka yar kaaga harin muddadaada xabsiga.
- Haddaad heli **weydoba** sii-dayn sharafeed, waxaa lagu sii dayn doonaa ka hor dhammaadka xukunkaaga. Taariikhda lagu sii daynayo waxaa la yiraahdaa Taariikhda Sii-dayn sharafeed Ahayn. Waa inaad aragto qof ka socda carbinta oo ku caawin doona hubinna doona inaad xafidayso xeerasha shatigaaga.

War dheeraad ah oo ku saabsan dembiyada la geystey ka hor 4tii Abriil 2005tii

Xukunnada Siyaadada ah

- Waxaa xukun siyaado ah lagaa siin karaa dembi rabshad leh ama galmeed.
- Taariikhda aad xabsiga ka baxayso waxay ku xirnaan doontaa muddada xaakinku ku amro inaad xabsiga ku jirto.
- Haddaad sii-dayn sharafeed hesho waxaana laguu kordhin karaa muddada shatiga.
- Haddaad heli **weydo** sii-dayn sharafeed, sanad kastaad dib u codsan kartaa.
- Haddii kale, ka hor dhammaadka xukunkaaga ayaa lagu sii dayn doonaa. Taariikhda lagu sii daynayo waxaa la yiraahdaa Taariikhda Sii-dayn sharafeed Ahayn. Waa inaad aragto qof ka socda carbinta oo ku caawin doona hubinna doona inaad xafidayso xeerasha shatigaaga.

Dembiyada la geystay 4tii Abriil 2005tii ama ka dib

Haddii xukunkaagu 1 sano ka badan yahay laakiin afar sano ka yar yahay

- Markaad xukunkaaga **nuskii** dhammayso ayaa lagu sii dayn doonaa.
- Waa inaad aragto qof ka socda carbinta oo ku caawin doona hubinna doona inaad xafidayso xeerasha shatigaaga.

Xukunnada siyaadada ah

- Haddii xukunkaagu siyaado yahay, waa inaad sii-daynta sharafeed **codsato**. Waxaad taas samayn kartaa markaad dhammayso qaybta xabsiga ee xukunkaaga.
- Haddaad heli **weydo** sii-dayn sharafeed, sanad kaste ayaad dib u codsan kartaa.

Dembiyada la geystey ka hor 1dii Oktoobar 1992kii

- Sii-dayn sharafeed ayaad codsan kartaa markaad **saddex meelood meel** xukunkaaga dhammayso.
- Haddaad sii-dayn sharafeed hesho waxaa xabsiga shati lagaaga sii dayn doonaa ilaa saddex meelood laba meelood muddada.
- Haddaad heli **weydo** sii dayn sharafeed, waxaad dib u codsan kartaa sanad kaste hadduusan waqti 13 bilood ka yar kaaga harin muddada xabsiga. Haddaadan weligaa helin sii-dayn sharafeed, waxaa xabsiga lagaa sii dayn doonaa ka dib markaad dhammayso **saddex meelood 2 meelood** xukunkaaga.
- Haddaad dembi kale geysato muddada sii-dayntaada sharafeed waxaa kugu waajibi karta inaad dhammaysato inta ka hadhay xukunkaaga.

War dheeraad ah oo ku saabsan shati ku sii daynta iyo sii-daynta sharafeed waxaad ka helaysaa bilowga bogga 141aad.

Waxyaabaha u baahan in aad xalliso – xabsiga dibaddiisa

1. Carruurta ama dadka kale ee aad daryeesho

- Haddaad u baahan tahay inaad daryeel u habayso carruur ama dad kaloo aad daryeesho, islamarkaaba u sheeg shaqaalaha xabsiga.

Lacagaha Hay’adda Taageerada Carruurta

- Haddaad bixinaysay lacagta masruufka carruurta, waxaad u baahanaysaa inaad Hay’adda Taageerada Carruurta u sheegto inaad xabsi ku jirto.

- Waa inaad Hay’adda Taageerada Carruurta taas ugu sheegto 1 asbuuc gudihii. Waa gaf dembi ah haddaad iyaga toddobaad ugu sheegi weydo isbeddellada.

- Waajib **kuguma** aha inaad masruufka carruurta bixiso haddaadan shaqaynin ama aad kaalmooyin (benefits) qaadato.

Waxaad iyaga warqad ugu diri kartaa halkan

Child Support Agency
National Helpline
PO Box 55
Brierly Hill
DY5 1YL

Telefoonka 08457 138 924

2. Kaalmooyinka

Haddaad kaalmooyin iminka qaadato

- La hadal xafiiska Jobcentre Plus ee xaafaddaada islamarka suurogal ah si aad wax u xalliso. Ama qof qoyskaaga ka mid ah taas weydiiso.

- Haddaad xabsi ku jirto in ka badan 21 cisho, kaalmada keliya eed caadi u heli karto waa Kaalmada Ijaarka.

- Haddaad u aragto inaad xafiiskaaga Jobcentre Plus lacag kaalmo ku leedahay warqad markaa u qor kana codso inay xabsiga lacagta kuugu soo diraan. Waxay u baahanayaan inay soo diraan jeeg **giro** la yiraahdo magaca **guddoomiyahana** ku soo qoraan. Waxaa markaa lacagta lagu dari doonaa lacagtaada khaas ahaaneed ee caddaanka ah.

- Haddaadan lacagtaas heli karin, marka lagu sii daayo ayaad dalban kartaa.

Haddaad shaqaynaysay

- Qoyskaaga ayaa u baahan kara inay kaalmooyinka dalbadaan intaad xabsiga ku jirto ama lagu hayo.

- Waa inay degdeg kula xiriiraan xafiiska Jobcentre Plus ee xaafadda.

Hubi inaad islamarka suurogal ah la xiriirto xafiiskaaga Jobcentre Plus. Haddii kale, waxaa adiga ama qoyskaaga idinku adkaan karta inaad kaalmooyin heshaan iminka iyo marka lagu sii daayo.

3. Bixinta kirada ama deynka guryaha lagu gato

- Adiga ama qoyskaaga waxaad heli kartaan **Kaalmada Ijaarka** si la idiinka caawiyo kirada ama deynka guryaha lagu gato.

- Waxaa fiican inaad talo taas u raadsato maadaama ay ku xirnaanayso haddii dembi lagugu xukumay ama laguu hayo.

Bixinta kirada - waxaad samaynayso

Warqad u dir hantiilaha gurigaaga ama wakiilkaaga guryaha si aad ugu sheegto inaad xabsi ku jirto. U sheeg

- Muddada aad xabsiga ku jiri doonto.
- Haddii qof sii ilaalin doono gurigaaga.

Haddaad la degganayd qaraabo oo aad hore u qaadanaysay Kaalmada Ijaarka

- Warqad u dir Xafiiska Kaalmada Ijaarka si aad ugu sheegto inaad xabsi ku jirto.
- Waa in qoyskaagu weliba warqad iyaga u diraan si ay u codsadaan inay la wareegaan kaalmooyinkaaga intaad xabsiga ku jirto.

Haddii qoyskaagu u baahan yahay in loo bilaabo Kaalmada Ijaarka

- Waa inay Xafiiska Kaalmada Ijaarka u diraan warqad ay Kaalmada Ijaarka ku dalbanayaan.

Haddaad kelidaa degganayd

- Waxaad Kaalmada Ijaarka dalban kartaa ilaa 52 asbuuc inta lagu hayo. Ama haddaad xabsi ku jiri doonto in ka yar 13 asbuuc.
- Haddaadan hore u qaadan jirin Kaalmada Ijaarka, kawnsalka xaafaddaada u dir warqad aad kaga codsanayso foom aad ku dalbato.

Haddaadan bixin karin kirada oo aadan heli karin kaalmada ijaarka

- Waxaad gurigaaga u celin kartaa hantiilaha ama wakiilka guryaha. Taas ayaa ka fiicnaan karta iyagoo lacag badan kugu yeesha adiguna deyn badan geshid.
- Waxuu hantiila gurigaagu ku heshiin karaa inuu meel kalood degto kuu helo markaad xabsiga ka baxdo.
- **Talo horta weydiiso NACRO ama Xafiiska Talosiinta Muwaadiniinta.**
- Ururradaasi xabsiga ayay iman karaan. Haddii kale, waxaad NACRO ka soo wici kartaa lambarka 0800 0181 259

Deynkaaga guryaha lagu gato

Waxaa adiga ama qoyskaaga laga caawin karaa bixinta qaybta **dulsaarka ah** ee deynkaaga guryaha lagu gato haddii

- aad qoyskaaga la noolayd oo ay guriga ku sii jirayaan

- **aanan** dembi lagugu xukumin ama aad sugayso in xukun laguu soo saaro, aanad keligaa guri iibsanayso.

Waxa aad samaynayso

- ✓ Waa in adiga ama qaraabadaa warqad u dirtaan xafiiska Jobcentre Plus haddii adiga ama iyagu aad rabtaan inaad Kaalmada Ijaarka dalbataan.

- ✓ Hubi in Shirkaddaada Deynka guryaha lagu gato, bangigaaga caadiga ah ama bangigaaga mujtamaca aad u sheegto inaad xabsi ku jirto.

- ✓ Weliba iyaga u sheeg waxaad u malaynayso inuu dhici doono. Matalan, haddaad rabto inaad bixiso uun qaybta dulsaarka ah ee deynkaaga guryaha lagu gato. Ama haddaad u malaynayso inaadan waxba bixin karin.

- ✓ Muddo kooban ayaad joojin kartaa lacagaha aad bixiso. Haddii kale aqal iibi.

Sida Kaalmada Ijaarka loo bixin doono

Haddaad gurigaaga iibsatay ka hor 2dii Oktoobar 1995kii

- Asbuuca 1 ilaa 8 — Lacag **kama** helaysid kharashka guryeynta
- Asbuuca 9 ilaa 27 — Lacagta nuskeed ayaad helaysaa
- Laga bilaabo asbuuca 27 — Lacagtoo dhan ayaad helaysaa

Haddaad gurigaaga iibsatay ka dib 2dii Oktoobar 1995kii

- Asbuuca 1 ilaa 39 — Lacag **kama** helaysid kharashka guryeynta
- Laga bilaabo Asbuuca 39 — Lacagtoo dhan ayaad helaysaa

4. Canshuurta Dawladda hoose

Waxa aad samaynayso

- ✓ U sheeg kawnsalka xaafaddaada inaad xabsi ku jirto. Canshuurta dawladda hoose waa lagaa dhaafi karaa ama qoyskaagaa laga yarayn karaa canshuurta dawladda hoose.
- ✓ Waa inaad canshuurta dawladda hoose ka hesho buugyare markaad timaaddo xabsiga. Waxaa buugyaraha la socda foomam. Buuxi foomamka si aad kawnsalka xaafaddaada ula xiriirto.

5. Biilasha sida biyaha, gaaska, korontada iyo telefoonka

Kuwan **lagaama** caawin karo intaad xabsiga ku jirto.

Waxa aad samaynayso

- ✓ Waxaad shirkadaha u diri kartaa warqad aad ugu sheegayso inaad xabsi ku jirto. Shaqaalaha weydiiso inay kaa caawiyan qoridda warqadda.
- ✓ Waxaad iyaga weydiisan kartaa haddaad biilasha bixin karto markaad xabsiga ka baxdo. Haddii kale waxaad codsan kartaa in la jaro gaaska, biyaha ama korontada.

6. Caymiska Qaran

Haddaad Caymiska Qaran bixisay intaadan xabsiga imanin

- Lacag Caymis Qaran ah **laguma** siin doono intaad xabsiga ku jirto.
- Laakiin haddaad 16 ilaa 18 jir tahay gunnooyinka togan ee canshuurta (tax credits) ayaa lagu siin doonaa.
- Waxaa weliba gunnooyinka togan lagu siin karaa haddaad 60 ilaa 65 jir tahay.

Lacagta Caymiska Qaran ee aad bixinayso

Intaad xabsiga ku jirto

Ma bixin kartid

- Noocyada Caymiska Qaran ee la yiraahdo Class 1 (Dabaqadda 1aad) iyo Class 2 (Dabaqadda 2aad) (oo khuseeya marka la shaqeeyo).

- Laakiin waxaad kaas **bixin kartaa** haddaad waddo mashruuc gaar ah intaad xabsiga ku jirto. Matalan, markaad lacag ka hesho shaqo aad bulshada ka qabato.

Waxaad bixin **kartaa**

- Nooc Caymis Qaran oo la yiraahdo class 3.

- Haddaad joojiso bixinta noocan Caymiska Qaran, lacagtaada hawlgabka ama kaalmadaada geerida ayaa wax laga dhimi karaa. Waxay taasi ku xiran tahay matalan muddada xukunkaaga.

Si aad war dheeraad ah u hesho la xiriir xafiiskaaga Jobcentre Plus ama warqad u soo dir

HM Revenue & Customs
National Insurance Contributions Office
Benton Park View
Newcastle on Tyne
NE98 1ZZ

Telefoonka 0845 302 1479

7. Lacagtaada hawlgabka dawliga ah

Ma qaadan doontid lacagtaada hawlgabka dawliga ah

- Haddii xukun lagugu soo rogay.
- Inta lagu hayo ama aad maxkamaddaada sugayso.

Waad qaadan doontaa lacagtaada hawlgabka

- Haddii lagu sii daayo adoon lagu xukumin. Waxaa lacagta lagu siin doonaa marka lagu sii daayo.

Haddaad lammaane leedahay

- Lammaanahaagu weli waa qaadan karaa lacagtiisa hawlgabka intaad xabsiga ku jirto hadduusan helin wax la yiraahdo **korodhka ku tiirsanaha.**

- Waa inuu ka fiiriyo xafiiska Jobcentre Plus hadduusan hubin.

Si aad war dheeraad ah u hesho warqad Adeegga Hawlgabka ugu soo dir halkan

National Pension Centre
Tyneview Park
Whitley Road
Benton
Newcastle-upon-Tyne
NE98 1BA

Telefoonka 0845 6060 265

8. Canshuurta dakhliga

- Waa muhiim inaad la socoto wixii canshuurtaada khuseeya intaad xabsiga ku jirto.
- Urur sida Xafiiska Talosiinta Muwaadiniinta ayaa xabsigaaga iman kara kaana caawin kara xallinta canshuurtaada.

Waxa aad samaynayso

- ✓ La xiriir xafiiskaaga canshuurta haddaad gargaar u baahato. Iyaga u sheeg Lambarkaaga Caymiska Qaran iyo lambarkaaga tixraaca haddaad karayso.
- ✓ Xafiiska canshuurta ee xaafaddaada warayso haddaadan hubin xafiiskaaga canshuurtu midka uu yahay.
- ✓ Waxaad weli u baahanaysaa inaad buuxiso foomamka canshuurta haddii laguu soo diro. Ama haddaad kasbato dakhli u baahan inaad iyaga ogaysiiso.
- ✓ Qof ayaa xafiiska canshuurta kuula xiriiri kara. Laakiin waxaad u baahanysaa inaad soo qorto rukhsad aad qofkaas ugu fasaxayso inuu sidaas sameeyo.
- ✓ Haddii loo-shaqeeyahaagu uu kuu sii haynayo shaqada intaad xabsiga ku jirto, weydiiso inuu taas qoraal kuugu soo dhigo si aad u diiwaan gashato.
- ✓ Waxaad weli heli kartaa **gunnooyinkaaga shakhsi ahaaneed** intaad xabsiga ku jirto. Gunnadaada shakhsi ahaaneed waa caddadka dakhli ee sanad kaste ku soo geli kara ee aadan canshuur ka bixinayn.

Waxaad la xiriiri kartaa xafiiskaaga canshuurta si aad u ogaato

- ✓ Haddaad lacagta Gunnada togan ee Canshuurta ee Carruurta ku wareejin karto magaca xaaskaaga ama lammaanahaaga, haddii ay shaqeeyaan.
- ✓ Haddii laguu soo celin karo canshuurta laga qaado dulsaarkaaga bangiga caadiga ah ama bangiga mujtamaca. Waa inaad foom buuxiso si aad taas u samayso.
- ✓ Haddii laguu soo celin karo canshuurta dakhli ee aad bixisay tan iyo 5tii Abriil, haddaad shaqayso aanad haysato dukumeenti la yiraahdo P45.
- ✓ Ama si aad talo u hesho haddaad iskaa u shaqaynaysay (iskiis-u shaqayste).

Dadka ku caawin kara xabsiga dhexdiisa

- Wixii dhibaato ah eed xabsiga kala kulanto shaqaalaha xabsigaad kala hadli kartaa.
- Laakiin waxaa jira dad kaloo iyaguna ku caawin kara.
- Waa in shaqaalaha xabsigu ay kuu sheegaan cidda kalee ku caawin karta. Waa in weliba warbixin taasi ku saabsan ay ku taallo waaxdaada xabsiga.

Waa kan liiska dadka kalee ku caawin kara xabsiga dhexdiisa. Dad dheeraad ah ayaa bogga xiga ku qoran.

Haddaad murugooto ama walwasho ama rabto qof aad la hadasho, waxaad la hadli kartaa

✓ **Wadaad ama qof kaloo diinta ku xiran**.

✓ **Samaritans**. Shaqaalaha xabsiga u sheeg haddaad rabto inaad Samaritans la hadasho. Samaritans waa dad sir kuula hadli kara haddaad aad u murugooto ama walwasho ama dareento inaad is dhaawici karto ama is dili karto. Samaritans maalintii 24 saacadood ayay diyaar yihiin. Qof Samaritan ah ayaad arki kartaa, sir ugula hadal telefoonka (waa inaad lambarka xaafadda codsato) ama warqad ugu dir halkan
Chris
PO Box 9090
Stirling
FK8 2SA

✓ **Maxaabiis kaaloo loo yaqaan dhegeyste ama saaxiib.** Dhegeysteyaashu waa **maxaabiis** u tababbaran inay ku dhegeystaan kuna taageeraan haddaad aad u murugooto ama walwasho. Shaqaalaha xabsi **uma** sheegayaan waxaad ku tiraahdo haddaanay ka walwalsanayn inaad dhaawacdo laftigaaga ama qof kale. Xabsiyo waxaa weliba jooga saaxiibbo. Saaxiibbadu waa maxaabiis u diyaar ah inay ku dhegeystaan haddaad u baahato qof aad la hadasho. Saaxiibbadu shaqaalaha xabsi ayay u sheegi karaan waxaad ku tiraahdo hadday u baahdaan.

✓ **Booqdeyaasha rasmiga ah ee xabsiga.** Kuwani waa dad xaafadda deggan oo booqan kara maxaabiista aanan lahayn dad badan oo soo booqda ama raba qof xabsiga ka baxsan ooy la hadlaan. La hadal qof la yiraahdo sarkaalka xiriirinta booqashada rasmiga ah ee xabsiga si aad uga codsato in dadkaasi midkood kuu iman karo.

Dadka kalee ku caawin kara

Haddii qof ku dhaawacayo ama kula dagaallamayo

- ✓ La hadal xubin **kastoo** shaqaalaha xabsiga islamarkaaba. Wuu ku caawin karaa.

Waxyaabaha kalee lagaa caawin karo

- ✓ **Ururro kale** ayaa iyaguna maxaabiista caawiya. Matalan, Xafiiska Talosiinta Muwaadiniinta ayaa gargaar ka bixiya matalan lacagta iyo sharciga. Ururrada Khamriyacabka ama Mukhaadaraadka Magaca la' (Alcoholics or Narcotics Anonymous) waxay gargaar ka bixiyaan dhibaatooyinka mukhaadaraadka ama khamriga. Shaqaalaha xabsiga weydii gargaarka aad ka heli karto xabsigaaga.

- ✓ **Hay'adda New Bridge Foundation.** Tani waa urur caawiya maxaabista iyagoo xabsiga dadka ugu yimaadda kana caawiya inay isku diyaariyaan nolosha xabsiga ka dib. Shaqaalaha xabsiga warayso haddaad rabto mutaddawac xabsigaaga yimaadda. Ama waxaad hay'adda New Bridge Foundation kala xiriiri kartaa halkan

  The New Bridge Foundation
  27a Medway Street
  London
  SW1P 2BD
  Telefoonka 0207 976 0779

Cidda aad dhibaatooyinka xabsiga kala hadlayso

- ✓ **Guddiga Dabagalka Madaxbannaan.** Dadkani waxay eegaan in xabsiyada si fiican oo xaq ah loo maamulo. Uma shaqeeyaan xabsiga. Waa mutaddawaciin ka socda xaafadda. Haddaad cabasho ka qabto nolosha xabsiga waxaad codsan kartaa inaad aragto qof ka socda Guddiga Dabagalka Madaxbannaan ama xataa Guddigoo dhan marka xigta ee ay xabsiga yimaaddaan. Waa inaad foom gaar ah buuxiso si aad taas u samayso. Waa in waaxdaada xabsiga ay yaallaan foomka iyo buugyare ku saabsan Guddiga Dabagalka Madaxbannaan.

- ✓ Waxaad weliba cabasho u diri kartaa shaqaalaha xabsiga ama qof la yiraahdo Dhexdhexaadiyaha Xabsiyada iyo Carbinta. **War dheeraad ah ka eeg bogga 115aad.**

La xiriiridda qoyska iyo saaxiibbada

Waa in xabsigaagu kaa caawiyo inaad la xiriirto qoyskaaga iyo saaxiibbadaa.

Xabsiga waxaad ka

- diri kartaa waraaqo
- diri kartaa telefoon
- codsan kartaa dad kuu yimaadda.

Sarkaal xabsi ka codso inuu waxyaabahaas kaa caawiyo haddaad u baahato.

Booqashada qaraabada ama saaxiibbada

Qodobbada ugu muhiimsan (kuwo kalaa ku qoran bogga xiga)

- ✓ Waa inaad caadi ahaan buuxiso foom la yiraahdo **Amarka Booqashada** ka hor intaanay cidi kuugu iman karin xabsiga (haddaadan ahayn maxbuus aanan dembi lagu xukumin ama rayid ah)

- ✓ Booqashooyinka waxaa lagu qabtaa gole xabsiga ku yaalla. Shaqaalaha xabsiga ayaa kuu sheegi doona qaybta aad golaha ka fariisanayso.

- ✓ Guddoomiyaha xabsi kaste ayaa dejiya saacadaha iyo maalmaha booqashooyinka la qaban karo. Booqashooyinku **ma** dhici karaan caadi ahaan maalmaha fasaxa rasmiga ah (sida Ciidda masiixiga iyo Easter).

- ✓ Waxaa waajib noqon karta in shaqaalaha xabsigu ay ka go’aan gaaraan in carruuri kuu iman karto iyo in kale. Waxay taasi ku xiran tahay matalan dembiga aad geysatay iyo habdhaqankaaga xabsiga dhexdiisa. Shaqaalaha xabsiga ayaa kuu sheegi doona hadday taasi dhacdo.

- ✓ Caadi ahaan markii kaste ilaa 3 dad waaweyn ah oo carruuri la socoto ayaa kuu iman kara. Waa inay wada yimaaddaan isla mar keliya. Waana in magaacdoodu gebi ku taallo Amarka Booqashada.

- ✓ Carruurtu waa inay caadi ahaan la socoto qof weyn. Laakiin 16 ilaa 18 jirku keligood ayay xabsiyada qaarkood iman karaan.

- ✓ Waxaa fiican inaad soo ogaato cidda kuu imanaysa. Haddii koox kaloo dad ah timaaddo isla maalinta, waxaa loo diidi karaa inay ku arkaan.

- ✓ Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4410**. Maktabadda ayuu nuqul ka yaallaa.

Maxaabiista aanan dembi lagu xukumin iyo rayidka wixii khuseeya

- ✓ Waa in qaraabadaadu caadi ahaan soo wacaan xabsiga si ay uga diyaarsadaan saacad ay ku arkaan. Waajib **kuguma** aha inaad buuxiso Foomka Booqashada.

- ✓ Waxaa caadi ahaan laguu oggol yahay 3 booqasho asbuucii. Booqashooyinkaasi waxay markii kaste soconayaan saacad. 1 booqasho wiikeendigaa laga dhigi karaa.

- ✓ Xabsiyada qaarkood, waxaad ku heli kartaa booqasho sidan ka kooban maalmo dheeraad ah.

- ✓ Waxaa laguu kordhin karaa ama dheerayn karaa booqashooyinka. Waxay taasi ku xiran tahay matalan habdhaqankaaga iyo xabsiga aad ku jirto. **Eeg bogga 64aad.**

- ✓ Booqasho kaste ilaa 3 dad waaweyn ah oo carruuri la socoto ayaa iman kara.

- ✓ Haddii dhowr iyo toban jir kuu imanayaan, shaqaalaha xabsiga ka fiiri. Xabsiyada qaarkood dhowr iyo toban jirka dad waaweyn ayay u arkaan.

- ✓ Waxaad xabsi kale ugu tagi kartaa qaraabo ah maxbuus aanan dembi lagu xukumin. Waxay taasi caadi ahaan dhici kartaa uun haddii la filayo inaad labadiinuba bil kale xabsi ku jirtaan. Shaqaalaha xabsiga weydii haddaad rabto inaad sidaas samayso.

Maxaabiista kaloo dhan wixii khuseeya

- ✓ Waxaad heli kartaa ugu yaraan 2 booqasho 4tii asbuuc. Booqashooyinku saacad ayay soconayaan.
- ✓ Waxaa laguu kordhin karaa booqashooyinka taasoo ku xiran habdhaqankaaga xabsiga dhexdiisa. **Eeg bogga 64aad.**

Sida booqasho loo habaysto

1. Buuxi foom la yiraahdo **Amarka Booqashada.** Amar Booqasho oo cusub ayaa 2dii asbuuc lagu siin doonaa.

2. Foomka ku qor magaacda gebi dadka aad rabto inay kuu yimaaddaan. Ku dar magaacda carruurta aad rabto inay kuu yimaaddaan.

3. Amarka Booqashada u dir mid ka mid ah dadka aad rabto inaad aragto.

4. Dadka kuu imanayaa waa inay foomka soo qaataan.

War kaloo ku saabsan booqashooyinka

Booqashada qof qaraabadaa ah oo ku jira xabsi kale

Waxaad booqan kartaa qaraabo kuu dhow oo ku jira xabsi kale. Waxaad taas codsan kartaa 3dii biloodba mar. Waxaad labadiinuba u baahanaysaan inaad buuxisaan foom Amar Booqasho si aad taas u samayso. Waqti ayay qaadan kartaa si booqashada loo diyaariyo.

Haddii laguu wareejiyo xabsi aad uga fog qoyskaa ama saaxiibbadaa

- Weliba booqashooyinka waad ursursan kartaa. Waxaad ursursan kartaa ugu yaraan 3 booqasho iyo malaha ilaa 26 booqasho. Kuwan waxaa loo yaqaannaa **booqashooyinka urura**. Shaqaalaha xabsiga weydii sida taas loo sameeyo. Waxaa waajibi karta inaad sugto inta taas la samaynayo maadaama ay xabsiyada hawshu ku badan tahay.

- Guddoomiyaha ayaad weliba weydiisan kartaa haddii **waqti yar** laguu wareejin karo xabsi kaloo u dhow qoyskaaga ama saaxiibbadaada. Waxaad taas samayn kartaa ka dib markaad 6 bilood xabsiga hadda ku jirto.

- Waa inaad raacdo xeerasha booqashada ee xabsigaaga cusub.

- Booqashooyinka ayaad dib u ursursan kartaa markaad xabsigaagii hore ku noqoto.

Gargaarka kharashka safarka laga siiyo martida

- Dadka kuu yimaadda waxaa lagu caawin karaa lacag ay ku daboolaan kharashka safarka markay kuu imanayaan. Waa inay 18 jir ka weynaadaan, kaalmooyin gaar ah qaataan oo aanay lacag badan kasban si ay gargaarkan u helaan.

- Waxay u baahanayaan inay buuxiyaan **foom** si ay lacagta uga codsadaan wax la yiraahdo Qorshaha Gargaarka Booqashooyinka Xabsiga.

- Waxuu war taas ku saabsan ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4405** iyo golaha dadku kuugu yimaaddaan.

- Foomkaad buuxinayso waxaad ka helaysaa xabsiga, xarunta martida iyo golaha dadku kuugu yimaaddaan ama haddaad Cuntubka Gargaarka Booqashooyinka Xabsiga kala soo xiriirto halkan

  Assisted Prison Visits Unit
  PO Box 2152
  Birmingham
  B15 1SD

Telefoonka 0845 300 1423 ama 0121 626 2000
(Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 10:15-11:45 iyo 14:15-15:45)
Telefoonka qoraalka (Textphone): 0845 304 0800 (isla saacadahaas)

Waraaqaha

Qodobbada ugu muhiimsan

- ✓ **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4411** ayaa kuu sheegaya waxa ku jiri kara iyo waxa aanan ku jiri karin waraaqahaaga. Shaqaalaha xabsiga gargaar weydiiso haddaadan hubin waxa amarka xabsigu sheegayo maadaama aad u baahan tahay inaad xeerasha ogaato.
- ✓ Asbuuc kaste 1 warqad bilaash ah ayaad diri kartaa. Waxay taasi ka dhigan tahay inaadan u baahnayn inaad tigidhka boosteed u soo iibiso. Haddaad tahay maxbuus aanan dembi lagu xukumin 2 waraaqood bilaash ah ayaad asbuucii diri kartaa.
- ✓ Tani isma beddeli doonto xataa haddii lagu ciqaabo.
- ✓ Waraaqaha kale waa inaad lacag ka bixiso.
- ✓ Warqad bilaash ah ayaad diri kartaa halkii qof kuu iman lahaa, haddii qofkaasi sabab kuugu iman karin.
- ✓ Haddaad u baahato inaad xaalad gaar ah ama degdeg ah warqad ka dirto warqad dheeraad ah oo bilaash ah ayaa laguu oggolaan karaa. Matalan, haddii dhakhso laguugu wareejinayo xabsi kale oo ay tahay inaad qoyskaaga u sheegto.
- ✓ Waxaa laguu soo diri karaa inta waraaqo ee aad rabto.

Sidee ayay waraaqahaagu sir u yihiin?

- Gebi waraaqaha aad dirto aanad hesho shaqaalaha xabsiga ayaa furi doona. Tani waa si loo eego in uusan ku jirin waraaqaha wax aan la oggolayn. Waxaa ka reeban waraaqaha ka socda looyarrada, maxkamadaha iyo ururro kaloo sir wax ku qabta. **Eeg bogga 47aad**.
- Shaqaalaha xabsigu **ma** akhriyaan waraaqaha badidood. Laakiin waxay akhrin doonaan waraaqaha tiro yar kolba mar.

War dheeraad ah oo ku saabsan waraaqaha

- Shaqaalaha xabsigu waxay waraaqahaaga gebi akhrin **karaan** haddii
  - aad tahay maxbuus Qaybta A
  - ay u malaynayaan inaad xabsiga ka baxsan karto
  - ay u malaynayaan inaad carruurta khatar gelin karto (waxaa tan la fiirin doonaa ugu yaraan 6dii biloodba mar)
  - laguu hayo ama lagugu xukumay dembi kadeedis
  - laguu soo saaray amar xannibaad ama amar reebitaan ah (waxaa tan la fiirin karaa 6dii biloodba mar)
  - haddii shaqaalaha xabsigu sabab ugu malaynayaan in waxa waraaqaha ku jira khatar gelin karo xabsiga ama dad kale.

Dirista telefoonka

Qodobbada ugu muhiimsan (kuwo kalaa ku qoran bogga xiga)

- ✓ Shaqaalaha xabsiga ayaa ku siin doona foom aad ku qorto lambarrada telefoonka eed rabto inaad wacdo. Matalan, xubnaha qoyskaaga, saaxiibbadaa iyo looyarkaaga.
- ✓ Shaqaalaha xabsiga ayaa ka dib kuu sheegi doona haddii lambarradaas ay oggol yihiin. Mararka qaar, waxaad lambar wici kartaa iyagoon shaqaalaha xabsigu horta oggolaan. Waxay taasi ku xiran tahay qaybta amniga eed ku jirto.
- ✓ Shaqaalaha xabsiga ayaa ku siin doona lambar la yiraahdo lambar **PIN**. Waa inaad lambarkan horta garaacdo **marwalboo** aad telefoon dirayso.
- ✓ Waa inaad saxiixdo warqad aad ku oggolaanayso xeerar khuseeya isticmaalidda telefoonka.

- ✓ Wicista waxaad ku bixin wax la yiraa **lacagta ku jirta** ood iibsato. Lacagtaad bilowga bixin. Marwalbood wicis dirto kharashka wicista ayaa lacagta laga jarayaa.

- ✓ Lacagta ku jirta waxaad ka iibsan kartaa dukaanka xabsiga adigoo isticmaalaya lacagtaada cad ee khaas ah ama lacagta aad kasbato.

- ✓ Waqti dheeraad ah ayaad telefoonka ku jiri kartaa taasoo ku xiran habdhaqankaaga intaad xabsiga ku jirto. **Eeg bogga 64aad.**

- ✓ Waxaad codsan kartaa inaad isticmaasho telefoon kaloo ka sir badan haddaad u baahato inaad degdeg looyarkaaga ula hadasho. Ama haddii sabab muhiima aad u haysato. Guddoomiyaha ayaa ka go'aan gaari doona inaad taas samayn karto.

Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4440 tuduca 4aad**. Maktabadda ayuu nuqul ka yaallaa.

Haddii qaraabadaa ama saaxiibbadaa dal kale deggan yihiin

- Wicistaada kale ka sokow, waxaad caadi ahaan bishii u diri kartaa 1 telefoon oo **bilaash ah**. Waxaad la hadli kartaa 5 daqiiqo. **Ma** helaysid wicistan bilaash ah haddii qaraabadaa ama saaxiibbadaa kuu timid bishii ugu dambaysay.

- Ajnabiga (dadkaan haysan baasaboor Ingiriisi ah) ama maxaabiista qaraabo u dhow ka joogto dal kale lacagta cad ee khaas u ah ayay ku sii wici karaan qaraabada ama saaxiibbada dalkaas jooga.

Sidee ayuu sir u yahay telefoonka aad dirto?

- Haddaad tahay maxbuus qaybta A ee halis sare ama gaar ah shaqaalaha xabsiga ayaa dhegeysan kara gebi wixii wicis ah ee aad dirto.

- Haddii kale, shaqaalaha xabsigu wicistaada **qaar** ayay dhegeysan karaan.

- Shaqaalaha xabsi waxay maqlayaan labada qof ee telefoonka ku jira. Weliba way duubi karaan telefoonka la diro si nuqul ay uga haystaan.

- Shaqaalaha xabsi ayaa kuu sheegi haddii tani xabsigaaga ka dhici karto.

- Shaqaalaha xabsi wicistaada way jari karaan haddaad tiraa wax la diido.

- Shaqaale ma dhegeysanayaan wicista looyarkaa ama ururro kaloo khaas ah.

Is guursashada ama samaysashada lammaan sharci

- Intaad xabsiga ku jirto waxaad codsan kartaa inaad qof is guursataan ama lammaan sharci samaysataan.

- Si aad tan u samayso, buuxi foom codsi ama warqad u dir guddoomiyaha uguna dhiib shaqaalaha xabsiga.

- Guddoomiyaha ayaa ka go'aan gaari doona haddii arooska ama xafladda sharci lagu qabanayo xabsiga ama xafiis diiwaangelin oo dhow.

- Waa in adiga iyo lammaanahaagu aad waxwalba qaban qaabisaan. Matalan, waxaad u baahanaysaan inaad dadka habboon la xiriirtaan, buuxisaan foomamka saxda ah bixisaanna wixii kharash ah.

- Wadaadka ayaa waxyaabaha qaar idinla qaban qaabin kara.

Warbixin dheeraad ah

- War dheeraad ah oo ku saabsan is guursashada waxuu ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4450**.

- War dheeraad ah oo ku saabsan lammaanta sharci waxuu ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4445**.

Maktabadda ayaad kuwaas nuqulladooda ka heli kartaa.

Xiriirka aad la yeelato looyarkaaga iyo dadka kalee rasmiga ah

Waraaqaha ku socda iyo kuwa ka socda looyarkaaga, maxkamadaha ama ururrada kalee rasmiga ah

- Shaqaalaha xabsi **ma** furayaan ama akhrinayaan waraaqahaad looyarkaaga ama maxkamadaha uga dirto arrimaha sharci haddaan sabab fiican taas loo haysan. Kuwaasi waxaa loo yaqaannaa waraaqaha **Xeerka 39aad**.
- Sidoo kale weeyaan waraaqaha ku socda ururro kale sida dhexdhexaadiyaha xabsiga iyo carbinta, xildhibaankaaga (MP) iyo Samaritans. Ururradaas ka fiiri **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4411**. Maktabadda ayuu nuqul ka yaallaa.

Si aad warqad ugu dirto looyarkaaga, maxkamadaha ama ururrada kalee rasmiga ah

Magaca iyo cinwaanka ka sokow, waa inaad waxyaabahan ku dul qorto bokhshadda ka hor intaadan shaqaalaha xabsiga u dhiibin si ay u diraan

- Ku qor **Prison Rule 39** bokhshadda waraaqaha ku socda looyarkaaga ama maxkamadaha.
- Ku qor **Confidential Access** bokhshadda waraaqaha ku socda dadka kalee rasmi ah.

Si aad warqad uga hesho looyarkaaga, maxkamadaha ama ururradan kalee rasmiga ah

Qof warqadda kuu soo diraya waa inuu waxyaabahan ku dul qoro bokhshadda

- magacaaga iyo lambarkaaga xabsiga
- cinwaankiisa iyo lambarkiisa telefoonka
- Prison Rule 39 ama Confidential Access
- waa in ka dib looyarkaagu saxiixo bokhshadda. Ka dibna waa inuu geliyo bokhshad kale oo ku socota guddoomiyaha. Ama qoraal yar ayuu warqadda soo raacin karaa.

- Waa inaad **Rule 39** ku qorto uun warqadda ku saabsan arrimaha sharciga.
- **Ha** ku qorin warqadda wax **aanan** laguu oggolayn inaad dirto.
- Shaqaalaha xabsigaa warqadda hortaada ku furi kara hadday wax ka shakiyaan. Waa inay horta taas rukhsad ka weydiistaan guddoomiyaha ama agaasimaha.

Marka looyarkaaga ama dad kaloo rasmi ah kuu imanayaan ama ku soo wacayaan

- Looyarkaaga iyo booqdeyaasha kalee rasmi ah (sida dadka sharciga ku hawl leh) ayaa xabsiga kuugu iman kara.
- Sarkaal xabsi ayaa joogi doona markay dadkaasi kuu yimaaddaan. Meel fog oo uusan ka maqlayn waxaad odhanayso ayuuse joogi doonaa.
- Shaqaalaha xabsigu **ma** dhegeysan doonaan wicistaad u dirto looyarkaaga ama dad kaloo sharci.

Xiriirkaad la yeelato wargeysyo, telefishin, raadiye ama majallo

Warqad ayaad u diri kartaa wargeysyo, telefishin, raadiye ama majallo haddii

- aadan wax ka qorin dembi aad geysatay ama dembi qof kale geystay (haddaadan wax dhab ah ka odhanayn dembiyada, ku xukumidda dembi, caddaaladda, xukun soo rogidda, ama adeegga xabsiga)
- **aadan** wax ka qorin maxbuus ama shaqaale xabsi iyadoo ay caddahay qofkaasi cidda uu yahay. Matalan, ma qori kartid qof magaciisa
- aad raacdo gebi xeerasha waraaqaha khuseeya
- **aadan** lacag ka helin wax kastoo aad samayso (haddaadan ahayn maxbuus aanan dembi lagu xukumin).

Waa inaad guddoomiyaha ama agaasimaha weydiisato haddii suxufiin ku soo wici karaan ama kuu iman karaan.

Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4470**. Maktabadda ayuu nuqul ka yaallaa.

Nolosha xabsiga

Lambarkaaga xabsiga

Lambar xabsi ayaa lagu siin doonaa markaad timaaddo xabsiga. Lambarku isma beddelayo haddii xabsi kale laguu wareejiyo. Shaqaalaha xabsiga ayuu lambarku ka caawiyaa in ay la socdaan laftigaaga iyo alaabtaada.

Diiwaannadaada xabsiga

Diiwaankaaga xabsigu waa **macluumaad** kugu saabsan oo xabsigu ku hayo waraaqo iyo kumbiyuutarka.

Waxaa ku jira matalan

- magacaaga iyo taariikhdaada dhalashada
- qolka aad ku jirto
- macluumaad ku saabsan goortaad maxkamadda tagtay
- garsooridda laguu sameeyey intaad xabsiga ku jirtay
- macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga
- macluumaad ku saabsan wixii shaqo ama tababbar ah ee aad waddo.

Amarrada Adeegga Xabsiga (Prison Service Orders = PSO) iyo Amarsiinnada Adeegga Xabsiga (Prison Service Instructions = PSI)

Waxay kuwani macnaynayaan shuruucda xabsiga (xeerasha) iyo habka xabsiyadu wax u sameeyaan.

Waxa shaqaalaha xabsi ku sameeyaan macluumaadka kugu saabsan

- ✓ Shaqaalaha xabsi sirtay u ilaalin doonaan macluumaadka kugu saabsan. Waxayse u baahan karaan inay macluumaadkaas tusaan dad kale sida booliiska iyo maxkamadaha.

- ✓ Waad eegi kartaa macluumaadka xabsigu kaa hayo. Qiimuhu waa £10 haddaad rabto inaad macluumaadka **gebi** aragto.

- ✓ Si aad taas u samayso waa inaad buuxiso foom la yiraahdo **Foomka Codsiga Aragga ee Shakhsiga (Subject Access Request Form)**. Sarkaal xabsi kaas weydiiso. Ama qoraal ayaad warqad ku dhigi kartaa si aad u codsato.

- ✓ Foomka ama qoraalka u dir xafiiska nidaamka/ ilaalinta ama waaxda shaqaalaha.

- ✓ Sharcigu waxuu dhigayaa in xabsigu kaa ilaaliyo macluumaad gaar ah. Matalan, kuuma sheegi karaan macluumaadka lagu xallinayo dembi.

- ✓ Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 9020**. Maktabadda ayuu nuqul ka yaallaa.

- ✓ Si aad war dheeraad ah uga hesho habka xabsiyadu u isticmaalaan macluumaadka kugu saabsan warqad u dir

  The information manager
  H M Prison Service
  Room 330
  Bell House
  John Islip Street
  London
  SW1P 4LH

Qaybtaada amniga

Ereyada waxtarka leh

Xabsiyada furan. Kuwani waa xabsiyo aad ku leedahay xorriyad ka badan xabsiyada kale si aad u warwareegto waxna u samayso. Waxaad yeelan kartaa qol kuu gaar ah iyo fureyaal. Waxaa xabsi furan lagu gelin karaa haddii shaqaaluhu u arkaan in lagu aamini karo.

Xabsiyada xiran. Dadka xabsiga ku jira inta badan waxay joogaan xabsiyo xiran. Xabsiyadani way adag yihiin oo dadku kama baxsan karaan.

Waa maxay qaybtaada amnigu?

- Qaybtaada amnigu waxay ku saabsan tahay nooca maxbuus ee aad tahay.
- Shaqaalaha xabsigu waxay eegi doonaan matalan haddaad waxyeellayn karto dadka kale, ama isku dayi karto inaad xabsiga ka baxsato, iyo khatarta aad geysanayso haddaad baxsato.
- Shaqaalaha xabsiga ayaa ka go’aan gaaraya qaybta amniga ee aad gelayso ka dibna way kuu sheegi doonaan.
- Haddaad ku jirto qayb amni sare (sida A ama B) waxaa lagaa yaaraynayaa xorriyadda waxqabadka xabsiga dhexdiisa ee u taalla maxaabiista kale. Shaqaalaha xabsigu siyaado ayay kuu ilaalin doonaan waxayna si dheeraad ah kaaga horjoogsan doonaan inaad baxsato.
- Dembiileyaasha dhallinyarada ah waxaa u yaalla qaybo amni oo ka duwan kuwa maxaabiista dadka waaweyn ah.

Waa kuwan qaybaha amniga ee dadka waaweyn

1. **Qaybta A.** Tani waa marka shaqaalaha xabsigu u arkaan inaad waxyeellayn doonto qof ka baxsan xabsiga iyo/ama isku dayi karto inaad baxsato markaa si kastoo suurogal ah ayaa la isugu dayi doonaa in la horjoogsado baxsashadaada.

2. **Qaybta B.** Tani waa marka shaqaalaha xabsigu u arkaan inaanan fursad laguu siin baxsashada.

3. **Qaybta C.** Tani waa marka shaqaalaha xabsigu u arkaan inaadan baxsan doonin, laakiin aan lagugu aamini karin xabsi furan.

4. **Qaybta D.** Tani waa marka shaqaalaha xabsigu u arkaan inay xabsi furan kugu aamini karaan.

Waa kuwan qaybaha amniga ee dembiileyaasha dhallinyarada ah

1. **Qaybta A.** Tani waa marka shaqaalaha xabsigu u arkaan inaad qof waxyeellayn doonto iyo in si kastoo suurogal ah la isugu dayo in lagaa horjoogsado ka baxsashada xerada dembiileyaasha dhallinyarada.

2. **Heerka Xannibaadda.** Tani waa markay shaqaalaha xabsi la habboon tahay in lagugu hayo qayb adag oo ka tirsan xerada dembiileyaasha dhallinyarada ah.

3. **Shuruudaha Xiran.** Tani waa marka shaqaaluhu u arkaan inaadan sidaas u sii halis badnayn laakiin aanan weli lagugu aamini karin xero dembiileyaal dhallinyaro ah oo furan.

4. **Shuruudaha Furan.** Tani waa marka shaqaaluhu u arkaan in ay kugu aamini karaan xero dembiileyaal dhallinyaro ah oo furan.

Hubinta in qaybtaada amnigu sax tahay

Shaqaalaha xabsiga ayaa si joogto ah u hubin doona inaad ku jirto qaybta saxda ah ee amniga. Way beddeli doonaan qaybtaada amniga hadday la tahay inaad sidii hore ka nabad badan tahay ama ka khatar badan tahay.

- **Haddii xukunkaagu u dhexeeyo 1 sano iyo 4 sano**

Shaqaalaha xabsigu waxay qaybtaada amniga eegi doonaan 6dii biloodba mar.

- **Haddii xukunkaagu ka badan yahay 4 sano**

Shaqaalaha xabsigu waxay qaybtaada amniga eegi doonaa sanad kaste.

- **Haddaad tahay maxbuus qaybta A**

Shaqaalaha Xarunta Dhexee Adeegga Xabsi ayaa qaybtaada amniga eegi doona.

- **Haddaad tahay maxbuus qaybta D**

Shaqaalaha xabsigu aad uguma baahanayaan inay qaybtaada amniga eegaan.

Waad ka caban kartaa qaybtaada amniga haddaad u aragto inay qalad tahay. **Eeg bogga 110aad.**

Halkaad muddada xukunkaaga ku jirayso

- ✓ Waxaad xukunkaaga ku bilaabi doontaa xabsi ama xero dembiileyaal dhallinyaro ah ee xaafadda oo u dhow maxkamadda lagugu soo xukumay.
- ✓ Xabsigaas ayaad joogi kartaa muddadoo dhan, haddii xukunkaagu waqti yar yahay.
- ✓ Haddii xukunkaagu sii waqti dheer yahay xabsi kale ayaa waqti dhow laguu wareejin doonaa.
- ✓ **Ma** dooran kartid xabsigaad tagayso. Laakiin shaqaalaha xabsiga ayaad weydiisan kartaa haddaad rabto inaad u guurto xabsi u dhow saaxiibbadaa ama qoyskaaga. Taas way kaa caawin **karaan**.
- ✓ Waqti dheer ayaad sugi kartaa si aad xabsi kale ugu guurto maadaama ay maxaabiis badan rabaan inay xabsiga iska beddelaan.

Noocyada kaladuwan ee xabsiyada

1. Xabsiyada Xaafadda

- Waxaad horta tagaysaa xabsi ama xero dembiileyaal dhallinyaro ah haddii
    - iminka maxkamad dembi kugu xukuntay ama xukun kugu soo rogtay
    - lagu hayo oo aad maxkamaddaada sugayso.
- Halkan ayaa qaybtaada amniga lagaa siin doonaa.
- Halkan ayaad joogaysaa ama xabsi kale ama xero kaloo dembiileyaal dhallinyaro ah ayaad u wareegi. Waxay taasi ku xiran tahay muddada xukunkaaga.
- Xabsiyada xaafaddu dhammaantood waa xabsiyo xiran.

2. Xabsiyada tababbarka

- Xabsi tababbar ayaa laguu wareejin karaa waqti dhow ka dib markaad xabsi xaafad tagto.
- Xabsiyada tababbarku waxay noqon karaan xabsiyo furan ama xiran.
- Waxaad xabsiyadan ku qaadan kartaa koorsooyin iyo tababbar kaa caawiya inaadan dembi kale geysan markaad baxdo. Waqti ayaad sugi kartaa si aad u hesho tababbarka ama koorsooyinka.

3. Xerooyinka dembiileyaasha dhallinyarada ah

- Kuwani waa meelo loogu talagalay dhallinyarada 15 ilaa 21 jir ah ee dembi geysatay.

4. Xabsiyada Amniga Sare

- Kuwan waxaa loogu talagalay maxaabiista la siiyey qaybta A ama B ee qaybta amniga
- Waxaa iminka jira 8 xabsi oo amni sare. Waxay yihiin: Belmarsh, Frankland, Full Sutton, Long Lartin, Manchester, Wakefield, Whitemoor, iyo Woodhill.

5. Xabsiyada ay maamulaan shirkado khaas ah (oo mararka qaar la yiraahdo Xabsiyada Qandaraasan)

- Xabsiyadan waxaa maamula shirkado khaas ah ama khaas loo leeyahay.
- Waxay maxaabiistu raacaan isla xeerasha waxaana u yaalla isla xuquuqda maxaabiista xabsiyada kale.
- Shaqaalaha qaarkood kuwa kale way ka duwan yihiin. Matalan, xabsiyada khaas ah waxaa maamula qof la yiraahdo agaasime, ma aha guddoomiye.
- Saraakiisha xabsiga waxaa loo yaqaannaa saraakiisha haynta ee xabsiga.
- Waxaa iminka jira 11 xabsi oo khaas ah. Waxay yihiin: Altcourse, Ashfield, Bronzefield (dumar), Doncaster, Dovegate, Forest Bank, Lowdham Grange, Parc, Peterborough (rag iyo dumar), Rye Hill iyo The Wolds.

Waxa aad xabsiga ku haysan karto iyo waxa aadan ku haysan karin

Qodobbada ugu muhiimsan

- ✓ Waxaa jira waxyaabo badan oo aadan xabsiga ku haysan karin
- ✓ Waxyaabaha kalee aadan haysan karin waa inaad u dhiibto martida kuu timaadda.
- ✓ Waxaa fiicnaan karta inaad dirto ama martida u dhiibto alaabtaada qaaliga ah ama qiimaha leh. Maxaa yeelay xabsigu waxba kama qaban karo haddii alaabtaadu lunto ama jabto, haddaan la caddayn karin in shaqaalaha xabsigu ay ka dambeeyaan.
- ✓ Wixii aadan haysan karin ama u dhiibi karin martida waxaa lagu ridi doonaa baco xiran waxaana lagu hayn doonaa meel adag gudaha ama dibadda xabsiga ilaa aad baxayso.
- ✓ Shaqaalaha xabsigu foom (kaar hanti) ayay kaa saxiixi doonaan marka
  - ° aad xabsi tagto si aad u sheegto inaad aragtay waxa shaqaalaha xabsigu ay ku rideen bacaha oo bacaha hortaada lagu xiray
  - ° markaad tagto ama ka baxdo xabsi cusub si aad u sheegto in alaabtaadu weli hagaagsan tahay
  - ° marka lagaa sii daayo xabsiga si aad u sheegto in alaabtaadu dhan tahay.
- ✓ Marka lagaa sii daayo xabsiga alaabtaadoo dhan ayaa laguu soo celin doonaa, marka laga reebo wixii aanan laguu oggolayn inaad haysato ama sharciga liddi ku ah.

Waxa aad qolkaaga ku haysan karto

- Waxaad qolkaaga ku haysan kartaa alaab 2 sanduuq geli karta.
- Waxaad weliba haysan kartaa
  - rikoodh ama wax aad muusiko ku dhegeysato
  - wax kuwan ka weyn. Matalan, kaban
  - waraaqaha sharci ee laguu oggol yahay inaad haysato.
- Shaqaalaha xabsigu waxay badi hubin doonaan inaadan haysan alaab tiro xad dhaaf ah, ama alaab aan la oggolayn.
- Waxaa waajibi karta inaad u qalanto si aad xaq ugu yeelato inaad alaabta qaarkeed qolkaaga ku haysato. **Eeg bogga 64aad.**

Hoosta ayay ku taxan yihiin waxyaabaha laguu oggolaan **karo** inaad qolkaaga ku haysato. Kuwani way u kaladuwanaan karaan xabsiyada waxayna ku xirnaan karaan qaybtaada amniga.

Waxaad haysan kartaa waxyaabahan

- ✓ Wargeysyo, buugaag iyo majallo.
- ✓ Waxa aad muusiko ku dhegeysato iyo samaacadaha dhegta.
- ✓ Kumbiyuutar iyo waxyaabo soo raaca, sida saxannada kumbiyuutarka.
- ✓ Waxaad sigaar ku cabto. Maxaabiista **dembi lagu xukumay** waxay haysan karaan ilaa 62.5 garaam oo tubaako bannaan ah ama 80 sigaar yar yar ama waaweyn, ama labadaas oo isku jira. Maxaabiista **aanan dembi lagu xukumin** waxay haysan karaa ilaa 137.5 garaam oo tubaako bannaan ah ama 180 sigaar. Waxaa laguu oggolaan karaa uun inaad qolkaaga sigaarka ku cabto.
- ✓ Waxa aad ku ciyaarto, xataa ciyaaraha elektaroonigga ah.
- ✓ Waxyaabo hiwaayadda la xiriira. Matalan, farshaxanka ama wax qoridda.

Waxyaabaha kale ee aad qolkaaga ku haysan karto

- ✓ 1 qafis shimbir iyo shimbir yar (haddii uun xabsigu oggol yahay shimbiraha qafis ku jira, xabsiyo badan ma oggola).
- ✓ Saacad.
- ✓ Qalab garka laguu xirto oo koronto ku shaqeeya.
- ✓ Waxyaabo ku caawiya haddaad naafo qabto.
- ✓ Batariyo.
- ✓ Qalabka nadaafadda (sida caday, daawada lagu cadaydo iyo shiir-dhawr).
- ✓ Fargal aroos ama fargal kaloo cad.
- ✓ Billad ama koore.
- ✓ Buugaag iyo waxyaabo kaloo diintaada la xiriira. Iyo cuud.
- ✓ Sawirro (hadday ku jiraan fareem aan quraarad ahayn).
- ✓ Kaarasha salaanta (matalan kaarasha maalinta dhalashada, haddaanay faashad ku dhejisnayn).
- ✓ Kalandaariyo iyo jadwaliye ama nidaamiye shakhsi ahaaneed.
- ✓ Buug cinwaan.
- ✓ Tigidho boosto iyo bokhshado.
- ✓ Daawo (shaqaalaha ayaa kuu sheegi doona haddaad qolkaaga ku haysan karto.

Haddaad u guurto xabsi kale oo ay waajibto inaad meel habeen joogto

Waxyaabahan ayaad qaadan kartaa: saabuun, suuf wajiga lagu mayro, saqaf ama shanlo, caday, daawada lagu cadaydo, makiinadda garka, daawada lagu xiirto, shambo, shiir-dhawr, raadiye, buug, qalin iyo warqad. Waa inaad adigu alaabtaada daryeesho oo aad ilaaliso.

Lacagtaada

Qodobbada ugu muhiimsan

- ✓ Saaxiibbadaa ama qaraabadaa ayaa lacag kuu soo diri kara intaad xabsiga ku jirto.
- ✓ Waxaa lacagtan loo yaqaannaa **lacagtaada cad ee khaas ah.**
- ✓ Lacagtu toos kuuguma iman karto. Xabsiga ayaa kuu hayn doona.
- ✓ Lacagta waad isticmaali kartaa. Intaad ka isticmaali karto waxay ku xirnaan doontaa sida fiican ee aad xabsiga ugu dhaqanto.
- ✓ Matalan, haddaad tahay maxbuus **dembi lagu xukumay** waxaad isticmaali kartaa ama £4.00, £15.50 ama £25.50 asbuucii. Waxay taasi ku xiran tahay sida habdhaqankaagu u fiican yahay.
- ✓ Haddaad tahay maxbuus **aanan dembi lagu xukumin** waxaad isticmaali kartaa ama £22, £47.50 ama £51.00 asbuucii taasoo habdhaqankaaga ku xiran.
- ✓ War dheeraad ah oo taas ku saabsan waxaad ka heli kartaa **bogga 64aad.**
- ✓ Guddoomiyuhu marar ayuu kuu kordhin karaa intaad lacagtaada ka isticmaali karto. Matalan, haddaad lacag ugu baahato arrimaha sharci, ama haddaad tahay maxbuus ajnabi ah oo aad u baahato inaad dal kale ku wacdo qaraabadaa.

Sida saaxiibbo ama qaraabo lacag xabsiga kuugu soo diri karaan

- Waa inay soo diraan jeegag caadi ah ama jeegagga wareega ee boostada. Waa in kuwan lagu qoro magaca **HM Prison Service** loona diro **guddoomiyaha**.

- Hadday u baahdaan inay lacag caddaan ah soo diraan waa inay warqadda soo raaciyaan qoraal ay ku sheegayaan caddadka lacagta bokhshadda ku jirta.

- Waa inay waxyaabahan bokhshadda ku dul qoraan
  - magacooda iyo cinwaankooda
  - magacaaga iyo lambarkaaga xabsiga.

Dukaanka xabsiga - oo weliba loo yaqaanno makhaayadda

- Waxaad matalan dukaanka asbuuc kaste ka iibsan kartaa tobaako, batariyo, macmacaan iyo qalabka nadaafadda (matalan cadayo iyo shiir-dhawr).

- Dukaannada xabsiyada ku yaalla waxyaabo kaladuwan ayaa yaalla.

- Haddaad wax u baahato matalan wax gaar ah sida wax aad ugu baahato maqaarkaaga ama timahaaga dukaanka markaa weydii hadduu kuu dalbi karo.

- Waxaa laguu oggolaan karaa inaad shirkado wax kaga iibsato dalbasho boosteed (tani waa marka shirkado ay boostada ku soo diraan waxaad iibsatay). Shaqaalaha xabsiga taas ka warayso.

Cabbidda sigaarka

- Meesha keliya ee aad sigaar ku cabbi karto dhismaha xabsiga gudihiisa waa qolkaaga. Waa inaad albaabka qolkaaga xirto markaad sigaarka cabbayso.

- Haddaadan sigaar cabbin, waajib **ma** aha inaad qol la wadaagto qof sigaar cabba.

War dheeraad ah oo ku saabsan cabbidda sigaarka

Sigaar haba yaraatee kuma cabbi kartid

- meelaha loogu talagalay dadka 18 jir ka yar
- baabuurta adeegga xabsiga
- qolalka sariiro badan (meelaha la wada seexdo)
- qolalka ama meelaha shaqaalaha xabsigu kuu diidaan inaad sigaar ku cabto.

Shaqaalaha caafimaad gargaar weydiiso haddaad rabto inaad sigaarka iska joojiso.

Cuntada

- Waa in xabsiyadu hubiyaan in cuntadaad hesho ay fiican tahay. Matalan, inay caafimaad leedahay, halis lahayn aadna hesho cunto kugu filan.

- La hadal shaqaalaha cuntada (shaqaalaha jikada) haddaad dhibaato ka qabto cuntada.

- Ka hor waqtiga cuntada, cuntadaada rabto ayaad buug ka dooran kartaa.

Waa in buugga cuntada ay ku jiraan

- cunto hilib ama kalluun leh
- cunto khudaar ku salaysan
- cunto khudaar dhaaf ah (vegan)
- cunto Xalaal ah
- cunto Yuhuud (Kosher)

- Bariis ayaad baradhada ku beddelan kartaa haddaad rabto.

- Haddaad u baahato cunto gaar ah caafimaadkaaga awgii, shaqaalaha caafimaadka ayaa taas ku ogaysiin doona.

- Cunto gaar ah oo la xiriirta diintaada ayuu xabsigu kuu keeni karaa waqtiga ciid ama munaasabad diimeed.

Dharka

Maxaabiista dembi lagu xukumay

- Waa inaad xirato dharka xabsigu ku siiyo. Waxaa dharkaas ku jira nigisyo, sharaabaad iyo shaadhad.

- Waa in shaqaalaha xabsigu hubiyaan in dharkaasi nadiif yihiin, hagaagsan yihiin welibana ku diirinayaan aadna ku caafimaad qabto.

- Waa in shaqaalaha xabsigu hubiyaan inay badi dhar nadiif ah ku siiyaan.

- Mararka qaar dharkaagaad xiran kartaa haddaad si fiican xabsiga ugu dhaqanto. **Eeg bogga 64aad.**

Maxaabiista aanan dembi lagu xukumin

- Dharkaagaad xiran kartaa haddii ay ku habboon yihiin xabsiga ayna nadiif yihiin oo ay nidaamsan yihiin.

- Laakiin waxaa waajibi karta inaad xirato dharka xabsigu ku siiyo haddii

    - aad tahay maxbuus qaybta amniga A

    - guddoomiyuhu u arko inaad baxsan karto. Waxaa markaa waajibi karta inaad xirato dhar shaqaalaha u fududeeya inay ku arkaan haddaad baxsanayso

    - ku socoto maxkamadda. Hadday sidan noqoto, shaqaalaha xabsiga ayaa karaankooda ku horjoogsan doona in dad kale dharkan kugu arkaan.

- Qaraabadaa iyo saaxiibbadaa ayaa dhar kuu keeni kara kuwo kalena kaa qaadi kara si ay u soo mayraan.

- Waa inaad dharkaaga xirato markaad
    - maxkamadda joogto
    - xabsiga ka baxayso haddaanan dembi lagugu xukumin.

- Shaqalaaha xabsiga dhar weydiiso haddaadan haysan in kugu filan oo aad xirato.

Marooyinka hurdada - go’yaha iyo busteyaasha sariirtaada

- Marooyinka hurdadu waa inay
  - nadiif ahaadaan ayna hagaagsanaadaan
  - diirranaadaan.

- Waa in firaashyada iyo marooyinka la laydhiyo 1 saacad ugu yaraan asbuucii.

- Xabsiga meel dhardhaqis (meel aad dharka ku dhaqan karto) ayaa ku taalla. Dharka iyo marooyinka hurdada ayaad halkaas dhigan kartaa hal jeer asbuucii.

Qubaysiyada jiifka, sarajoogga iyo musqullada

- Waqti kastaad isticmaali kartaa musqusha iyo saxannada gacmaha lagu mayro.

- Waxaad jiif ama sarajoog biyo kulul ku qubaysan kartaa ugu yaraan 3 jeer asbuucii.

- Shaqaalaha xabsiga ayaa ku siin kara qalabka nadaafadda (matalan daawada lagu cadaydo, caday iyo shiir-dhawr) haddaadan haysan lacag aad ku iibsato.

Waqtiga aad dibadda ku soo hawo qaadato

- Maxaabiistu gebi waxay dibadda ku soo hawo qaadan karaan 30 daqiiqo ilaa 1 saacad maalin kaste. Waqti kaladuwan ayay xabsiyadu dibadda kuu fasaxayaan.

- Mararka qaar taasi ma dhici karto. Matalan, haddii jawiga hawadu xun yahay, ama hadday sabab kale u jirto in gudaha lagugu hayo.

- Waxaad samayn kartaa jimicsi sida socsocod. Shaqaalaha xabsiga ayaa kuu sheegi doona jimicsiga aad ku samayn karto xabsigaaga.

- Xabsiyo badan waxay leeyihiin waqti aad samayn karto Tababbarka Jirka (matalan sboorti) iyo weliba waxyaabo kale si aad qolkaaga uga bixi karto.

Dhiirrigelinta iyo fursadaha la kasbado (weliba loo yaqaan IEPs = incentives and earned privileges)

Waxaa halkan lagaga hadlayaa waxa kaleed heli karto ama samayn karto haddaad

- xeerasha ku eekaato
- si fiican uga qayb gasho shaqo iyo hawlo kale sida qorshahaaga xukunka
- xabsi kaste waxa kaleed heli karto ama samayn karto wuu kala duwan yahay.

Matalan, haddaad raacdo xeerasha ood wax fiican ku samaysato xabsiga waxaad matalan samayn kartaa

- lacagtaada ayaad in dheeraad ah ka isticmaali kartaa
- qaraabadaa iyo saaxiibbadaa ayaa si dheeraad ah kuugu iman kara
- lacag dheeraad ah ayaad kasban kartaa
- qoflkaaga ayaad telefishin ku haysan kartaa
- dharkaaga ayaad xiran kartaa
- waqti dheeraad ah ayaad qolkaaga dibadda ka joogi kartaa.

Laakiin, kuwan waa lagaa goyn karaa haddaad xeerasha raaci weydo.

Sida ay u hawlgasho

Shaqaalaha xabsiga ayaa kuu sheegi doona tirada waxa kaleed heli karto ama samayn karto iyadoo ku xiran habdhaqankaaga. Heerasha IEP waa 3

Heerka aasaasiga ah. Haddaad heerka aasaasiga ah joogto waxay taasi kuu fasaxaysaa inaad hesho wax gaar ah oo sharcigu kuu oggol yahay, sida waraaqo iyo booqashooyin. Laguuma oggolaan doono wax kale.

Heerka caadiga ah. Waxay taasi kuu fasaxi kartaa booqashooyin iyo waraaqo dheeraad ah. Waxaa laguu oggolaan karaa inaad telefishin qolkaaga ku haysato aanad lacagtaada in dheeraad ah ka isticmaasho.

Heerka xooggan. Waxay taasi kuu fasaxaysaa xataa wax kaloo dheeraad ah. Matalan, waxaa laguu oggolaan karaa booqashooyin dheeraad ah, telefishin qolkaaga yaalla, ama lacagtaada in dheeraad ah ood ka isticmaasho.

Caafimaadkaaga

Qodobbada ugu muhiimsan – kuwo kalaa ku qoran bogga xiga.

Caafimaadka jirkaaga

- ✓ Maxaabiistu waxay heli karaan isla daryeelka caafimaadka ee dadka xabsiga ka baxsan.
- ✓ Waxaa xabsiga ku taalla qayb daryeelka caafimaadka loogu talagalay. Waxuu xabsigu yeelan karaaba isbitaal.
- ✓ Waxaa xabsiga joogta koox daryeel caafimaad. Kuwani waa dad aad ka hesho daryeelka caafimaad sida takhaatiir, kalkaaliyeyaal caafimaad iyo takhaatiir ilko.
- ✓ Waxaad xabsiga ka heli kartaa macluumaad farabadan oo ku saabsan daryeelka caafimaadka.
- ✓ Shaqaalaha caafimaadka waxaa gebi loo tababbaray isla heerka sare ee shaqaalaha caafimaadka ee xabsiga ka baxsan.
- ✓ Shaqaalaha caafimaadka u sheeg haddaad
  - ◦ dhibaato ka qabto matalan mukhaadaraadka iyo khamriga
  - ◦ qabto fayruska HIV ama cudurka AIDS
  - ◦ u baahan tahay inaad daawo qaadato.

Caafimaadka maskaxdaada

Xabsiga dhexdiisa dad badan ayaa baahi ka qaba caafimaadka maskaxda. Dad ayaa jira ku caawin kara.

Shaqaalaha caafimaadka u sheeg haddaad

- ✓ Lahayd takhtar cilminafsiyeed ama kalkaaliye cilminafsi bulsho ama isbitaal u gashay cudur maskaxeed.
- ✓ Daawo caafimaadkaaga maskaxda ugu qaadanaysay bulshada dhexdeeda.
- ✓ Walwasho ama murugooto.
- ✓ Dareento hoos u dhac niyad ama niyadjab.
- ✓ Dareento walaac ama cabsi.
- ✓ Dhibaato kala kulanto hurdada ama daal badan dareento.
- ✓ U malaynayso in dadku adiga kaa hadlayaan.
- ✓ Codad madaxaaga ka dhex maqlayso.
- ✓ Dareento caro badan.
- ✓ Dareento wareer ama illow.
- ✓ Wax keliya kolba dib uga fikirto.

Shaqaalaha caafimaadka ee xabsiga

Shaqaalaha caafimaadka ee xabsiyada ka shaqeeya qaarkood waa

- takhaatiir
- kalkaaliyeyaal caafimaad
- takhaatiir ilko
- farmashiisteyaal (kuwani waa dadka ka shaqeeya farmashiyaasha ee ku siin kara daawada takhtarkaagu kuu qoray)
- shaqaale gargaar ka bixiya dhibaatooyinka mukhaadaraadka iyo khamriga
- shaqaale gargaar kaa siiya dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda. Waxaa shaqaalahan loo yaqaannaa takhaatiirta cilminafsiyeedka
- shaqaale kaa caawiya caafimaadka galmada iyo ka guud.

Sida aad u arki karto takhtar ama kalkaaliye caafimaad

- Sarkaal xabsi ee waaxdaada u sheeg haddaad u baahato takhtar ama kalkaaliye. Kalkaaliyaha iyo farmashiistaha ayaa dhibaatooyin badan kaa caawin kara adoon takhtar u baahan. Laakiin takhtar codso haddaad weli walwal qabto.

- Waxaad codsan kartaa qof kaloo kooxda caafimaadka ka mid ah haddaadan ku faraxsanayn waxay dhibaatadaada caafimaadka kaaga sheegeen takhtarka, kalkaaliyaha ama xubin kaloo shaqaalaha caafimaadka.

- Haddaanay shaqaalaha caafimaadka ee xabsigu wax ka qaban karin dhibaatadaada caafimaadka, kuwan mid ka mid ah ayaa dhici kara
    - xabsiga ayaa u yeeri kara qof takhasus u leh daryeelka caafimaadka oo xabsiga kuugu yimaadda
    - xabsi kale ayaa laguu wareejin karaa si aad uga hesho daryeelka caafimaadka eed u baahan tahay
    - isbitaal xabsiga ka baxsan ayaa lagu geyn karaa. Hadday tani dhacdo, xabsiga ayaa weli kaa masuul ahaanaya.

Si aad u aragto takhtar ilko ama takhtar indho (indhahaaga u aragto)

- Shaqaalaha xabsiga u sheeg haddaad u baahato takhtar ilke ama takhtar indho.
- Bilaash ayaa laguu daawayn doonaa haddii sababtu ay caafimaadka la xiriirto.
- Muraayado ama waxyaabo kaloo bilaash ah ayaad indhahaaga u heli doontaa haddaad u baahato.

Daawada

- M**a** haysan kartid daawooyinka aad xabsiga u soo qaadato.
- Shaqaalaha soo-dhawaynta, takhtar ama xubin ka mid ah kooxda caafimaadka u sheeg haddaad daawo qaadato.
- Takhtar xabsiga jooga ayaa kuu qori doona daawada aad u baahan tahay. Waxaad taas ka soo qaadan kartaa farmashiga xabsiga.
- Waxaa laguu oggolaan karaa inaad daawadaada haysato taas ka dib. Shaqaalaha xabsiga ayaa ka go’aan gaari doonaa haddaad taas samayn karto wayna kuu sheegi doonaan.

Diiwaannadaada caafimaadka (shaqaalaha caafimaad warqad iyo kumbiyuutar ayay ku diiwaangeliyaan dhibaatooyinkaaga caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka eed hesho)

- Xabsigu diiwaan caafimaad oo cusub ayuu caadi ahaan kuu bilaabi doonaa markaad xabsiga gasho. Xabsigu caadi ahaan **ma** haysan doono diiwaannadaadii caafimaadka ee hore ee xabsiga dibaddiisa.

- Takhaatiirta xabsigu waxay macluumaad ka soo qaadan karaan diiwaannadaadii caafimaadka ee hore hadday u baahdaan. Waa markaadse horta oggolaato uun.

- Waxaad codsan kartaa inaad aragto diiwaannadaada caafimaadka haddaad rabto. Caadi ahaan waad arki kartaa macluumaadka xabsigu ka hayo caafimaadkaaga. Laakiin waxaa jiri kara macluumaad aadan arki karin.

- Xubin ka mid ah kooxda caafimaadka weydiiso haddaad rabto inaad diiwaannadaada caafimaadka aragto. Ama buuxi foom aad ku codsato inaad aragto diiwaannadaada caafimaadka.

- Waa in aanay qaadan in ka badan 40 cisho si shaqaalaha xabsigu ay kuu siiyaan macluumaadka aad codsatay. Haddii diiwaannadaada caafimaadku xabsi kale yaallaan, xabsigaaga ayaa loo soo diri doonaa.

- Waad arki **kartaa** macluumaadka takhaatiirtu caafimaadkaaga ka siiyaan maxkamadaha ama Guddiga Sii-daynta sharafeed hadduusan takhtar kuu diidin inaad aragto.

Dhibaatooyinka caafimaadka iyo cudurrada

Fayruska HIV iyo cudurka AIDS

- Cudurka AIDS waxaa keena fayruska la yiraahdo **HIV** (Fayruska Dhicista difaaca jirka ee Insaanka) (Human Immunodeficiency Virus).
- Dadku fayruska HIV ayay horta qaadaan ka hor intuusan cudurka AIDS ku dhicin.
- Cudurka AIDS waxuu yimaaddaa goorta dambee uusan jirka qofku iska celin karin xanuunsashada.
- Dadka qaba HIV waxay u muuqan karaan ayna dareemi karaan inay caafimaad qabaan. Laakiin fayruska HIV ayay haddana dadka kale u gudbin karaan.

Sidaad u qaadi karto HIV/ AIDS

- HIV waxaad qaadi kartaa haddii dhiig ama shahwo qof qaba HIV jirkaaga galaan.
- Siyaabaha ugu badan eed HIV ku qaadi karto waa
  - galmada cinjir la'
  - wadaagga irbado ama qalab (matalan, mukhaadaraad lagu qaato, sawirka jirka lagu samaysto ama dhegaha ama jirka lagu dalooshado). Qalabku waa magac kaloo irbadaha iyo alaabta la isugu mudo mukhaadaraad dariiqeed.

Qof **kama** qaadi kartid HIV adigoo samaynaya waxyaabaha maalin kaste sida

- la hadlidda qofka
- ka salaamidda gacanta
- taabashada qofka markaad ag marayso
- Isticmaalidda isla suxuunta iyo mindyaha ama fargeetooyinka qofku isticmaalo
- Isticmaalidda isla musqusha qofku isticmaalo

Daawaynta iyo daawooyinka

- **Lagaama** daawayn karo HIV ama AIDS. Laakiin waxaa jira daawooyin aad qaadan karto si aad HIV u xakamayso iyo haddaad AIDS qabto.

Waxa aad samayn karto

Si aad isaga ilaaliso halista HIV/ AIDS

✗ Galmo **ha** ku samayn cinjir la'aan.

✗ **Sababna** cid kale **ha** kula wadaagin irbado.

Haddaad ka walwal qabto HIV/ AIDS

✓ Waxaad sir kula hadli kartaa xubin ka mid ah kooxda caafimaadka.

✓ Ama waxaad la hadli kartaa lataliye ama xubin ka mid ah kooxda xabsiga ee la yiraahdo Kooxda Maamulka Cudurrada La isku gudbin karo.

✓ Xabsigaad isaga baari kartaa HIV. **Sir** ayaad u heli doontaa natiijooyinka baaristaas.

✓ Kooxda caafimaadka weydiiso cinjirro, ilko xireenno (galmada afka) ama saliidaha galmada haddaad u baahato. Waa in shaqaalaha caafimaadku kuwaas ku siiyaan hadday u arkaan inaad haddii kale halis ugu jirto qaadista HIV

✓ Haddaad sabab kastoo jirtaba dad kale irbado la wadaagto, la hadal qof ka mid ah kooxda caafimaadka. Waxuu ku siin karaa wax aad ku nadiifiso irbadaha iyo waxyaabaha kale (qalabka).

Cagaarshowga nooca B iyo Cagaarshowga nooca C

- Kuwani waa fayrusyo aad qof kale ka qaadi karto. Waxaad ka qaadi kartaa qof dhiiggiisa iyo markaad galmo la samayso.

- Waxaa jira tallaal lagaa siin karo Cagaarshowga nooca B laakiin mid uma jiro Cagaarshowga nooca C. Tallaalku waa wax aad qaadan karto oo marka hore kaa horjoogsan kara inaad fayruska qaaddo.

- La hadal qof ka mid ah kooxda caafimaadka haddaad ka walwal qabto Cagaarshowga nooca B ama nooca C ama haddaad war dheeraad ah rabto.

Cudurrada iyo Jeermisyada Galmada La isugu tebiyo - cudurrada aad ku qaadi karto galmada aad qof la samayso. Weliba loo yaqaanno STDs

- Waxaa jira cudurro iyo jeermisyo farabadan oo galmada la isugu tebiyo oo kaladuwan. Qaarkood matalan waa kalaamidiya iyo herbiiska saxaaxa.

- Kuwan intooda ugu badan waa lagaa daawayn karaa haddaad shaqaalaha caafimaad degdeg ugu tagto.

- Xabsiyada inta ugu badan waxaa jooga shaqaale caafimaad oo gaar ah ood ula tagi karto dhibaatooyinka caafimaadka ee galmada. Laakiin takhaatiir iyo shaqaale kaloo caafimaad oo badan ayaa iyaguna daawayn kara cudurrada iyo jeermisyada galmada la isugu tebiyo.

- La hadal kooxda caafimaadka haddaad ka walwal qabto inaad galmada cudur ku qaadday. Si sir ah ayaad iyaga ula hadli kartaa.

Dhibaatooyinka mukhaadaraadka iyo khamriga

Qodobbada ugu muhiimsan

- ✓ Haddaad qabto dhibaato la xiriirta khamriga ama mukhaadaraadka, islamarka suurogalka ah gargaar weydiiso xubin ka mid ah shaqaalaha caafimaadka.
- ✓ Waxay hubin karaan inaad hesho gargaarka kuu habboon.
- ✓ Waxaad xabsiga ku heli kartaa caawimaadyo farabadan si aad u joojiso mukhaadaraadka ama khamriga.
- ✓ Sarkaalkaaga shakhsi ahaaneed ama xubin kaloo shaqaalaha xabsiga u sheeg haddii maxaabiis kale rabaan inaad isticmaasho mukhaadaraad ama khamri ama kuwan aad xabsiga soo geliso.

Kaa baaridda mukhaadaraadka

Shaqaalaha xabsigu waxay kaa qaadi karaan baaris lagu eego inaad mukhaadaraad qaadatay. Si ay taas u sameeyaan kaadida ayay kaa qaadi doonaan wayna baari doonaan si ay uga eegaan calaamadaha inaad mukhaadaraad qaadatay.

- Waxaa mukhaadaraad lagaa baari karaa intaad xabsiga ku jirto haddii
  - shaqaaluhu doortaan inay baaris kaa qaadaan. Shaqaalaha ayaa tiro yar oo maxaabiis kala sooc la’aan ku dooran doona bil kaste si ay u baaraan
  - shaqaalaha xabsigu u arkaan inaad mukhaadaraad qaadatay
  - aad hore mukhaadaraad badan u isticmaashay baaris lagaa qaadayna ay muujisay inaad mukhaadaraadka dabaqadda A xabsiga ku qaadatay. Hadday sidaas noqoto marar badan ayaa baaris lagaa qaadi karaa.

War dheeraad ah oo ku saabsan baarista mukhaadaraadka

- Shaqaaluhu waxay rabaan inay hubiyaan inaadan mukhaadaraad qaadan intaanay waxyaabaha qaar ku siinin. Matalan, intaanay xabsiga waqti yar kaa saarin, ama ku siin shaqo aad ugu baahan tahay inay dadku ku aaminaan.
- Waxaa lagu baari karaa haddaad u wareegto xabsi kale ama markaad timaaddo xabsiga.

Maxaa dhacaya marka mukhaadaraad lagaa baarayo?

1. Shaqaalaha xabsiga ayaa kuu sheegi doona waxa dhici doona iyo sababta mukhaadaraad lagaaga baarayo.

2. Waa inay shaqaalaha xabsigu kaadi kaa qaadaan si ay u baaraan.

3. Sir ayaad taas u samayn kartaa laakiin waa in shaqaalaha xabsigu ay arki karaan inaadan wax ku samaynayn kaadida lagaa qaadayo.

4. Kaadida lagaa qaado waxaa lagu eegi doonaa meel la yiraahdo shaybaar si loo hubiyo inaanay mukhaadaraad ku jirin.

5. Shaqaalaha xabsi islamarka suurogal ah ayay ku siin doonaan natiijada baarista.

6. Shaqaalaha xabsi kooxda caafimaadka ayay u sheegi doonaan haddii natiijooyinku muujiyaan inaad mukhaadaraad qaadatay. Waxaa taas lagu hubinayaa inaadan qaadan daawo saamayn karta natiijada baarista. Waa inaad horta oggolaato in shaqaalaha xabsigu u sheegi karaan kooxda caafimaadka.

7. Haddii baaristu muujiso inaad mukhaadaraad qaadatay waa inaad **qirato** ama **diiddo** qaadashada mukhaadaraad. Garsoorid aad taas kaga hadasho ayaa laguu diri doonaa (hoosta ayaad war dheeraad ah taas kaga helaysaa).

Haddaad diiddo inaad mukhaadaraad qaadatay

- Mar labaad ayaa mukhaadaraad lagaa baari doonaa si loo eego in natiijooyinka baaristii ugu horraysay ay sax ahaayeen ama qalad ahaayeen.

- Haddii ay natiijooyinka baaristu isbeddeli waayaan kaadida lagaa qaado ayaad u diri kartaa shaybaar xabsiga ka baxsan si uu dib u baaro.

- Shaqaalaha xabsigu dukumeentiyo ayay ku siin doonaan haddii natiijooyinka baaristu ay muujiyaan inaad mukhaadaraad qaadatay ama haddaad rabto inaad bixiso lacagta baarista kale. Dukumeentiyadan waxaa loo yaqaannaa

    - Warbixinta Maxaabiista laga siiyo Baarista Mukhaadaraadka ee Waajibka ah

    - Warbixinta Looyarrada iyo Maxaabiista laga siiyo Doonashada Baaris Madaxbannaan ee Kaadida lagu samaynayo Baarista Mukhaadaraadka ee Waajibka ah.

Haddaad qirato ama baaristu weli muujiso inaad mukhaadaraad qaadatay

1. Haddaad mukhaadaraad qaadatay, waxaad sidaas ku jebisay **Xeerka Xabsi ee lambarka 51(9)** ama **Xeerka Dembiile Dhallinyaro ah ee lambarka 55(10) ah.**

2. Dembi ayaa caadi ahaan lagugu eedayn doonaa waana in garsoorid laguu diro. Garsooriddu waa marka adiga iyo guddoomiye ama xaakin ka baxsan xabsigu aad ka wadahadashaan dembiga kana go’aan gaartaan haddaad dembiga geysatay.

3. Haddii dembi lagugu helo, xabsiga ayaa ka go’aan gaari doona waxa ugu fiican in la sameeyo. Waa lagu ciqaabi karaa ama fursadaha qaar ayaa lagaa qaadi karaa. Ama waxaa laguu diri karaa dad kaa caawiya dhibaatada mukhaadaraadka. Matalan, urur la yiraahdo CARAT (Latalin, Baaris, Gudbin, Talobixin iyo Daryeel buuxa) (Counselling, Assessment, Referral, Advice and Thoroughcare).

Marka shaqaalaha la weydiisto baarista mukhaadaraadka (tani waxaa la yiraahdaa baarista mukhaadaraadka ee iskaa ah)

Baaris mukhaadaraad ayaad codsan kartaa haddaad rabto. Sababtaad taas u rabi karto waa adoo raba inaad mukhaadaraad iska joojiso. Shaqaalaha xabsigaa siday karaan kuu caawin doona haddaad sheegto inaad mukhaadaraadka iska joojinayso.

Waxaa jira 2 shay oo aad samayn karto

1. Codso inaad tagto qaybta xabsiga ee la yiraahdo **qaybta baarista mukhaadaraadka ee iskaa ah.** Qaybtan nabadda ah ee xabsiga ayaad joogi kartaa waxaana lagaaga caawini joojinta mukhaadaraadka. Waa inaad saxiixdo foom aad ku oggolaanayso xeerar khuseeya joogitaanka qaybtaas xabsiga. Waana in mukhaadaraadka lagaa baaro.

2. Adoon u guurin qayb kaloo xabsiga ka mid ah ayaa weli lagaa caawin karaa inaadan mukhaadaraadka ku laaban. Waxaad codsan kartaa inaad gasho wax la yiraahdo barnaamijka baarista mukhaadaraadka ee iskaa ah. Waa inaad saxiixdo foom aad ku sheegayso inaad raaci doonto xeerar taas khuseeya. Waana in mukhaadaraadka lagaa baaro.

- ✓ Waa inaad saxiixdo foom aad ku oggolaanayso inaad raacdo xeerar gaar ah haddaad rabto inaad mukhaadaraadka iska joojiso.
- ✓ Waxuu foomku kuu sheegayaa waxa dhacaya haddii baaris muujiso inaad weli mukhaadaraad qaadato.
- ✓ Laguma ciqaabi doono haddii la ogaado inaad mukhaadaraad qaadato. Laakiin shaqaalaha xabsiga ayaa wax kale samayn kara sida kaa qaadista qaybtaas xabsiga.

- Xabsiyo wax kaloo la yiraa fursado ayaad ku helaysaa haddaad oggolaato baaris mukhaadaraad muujisa inaadan mukhaadaraad qaadan. Matalan, waxaa laguu oggolaan booqashooyin dheeraad ah ama isticmaalidda lacagtaada siyaado.

- Shaqaalaha xabsi tan ka warayso. Waa inaad saxiixdo foom aad ku oggolaanayso xeerar gaar ah iyo inaadan mukhaadaraad qaadanayn. Waxuu foomku kuu sheegayaa waxa aad u baahaynayso inaad samayso iyo waxa dhacaya haddii la ogaado inaad mukhaadaraad qaadato.

Gargaarkaad ka heli karto dhibaatooyinka mukhaadaraadka iyo khamriga

Maxbuus **kaste** ayaa gargaar ka heli kara joojinta mukhaadaraadka ama khamriga

Waxaad gargaar ka heli kartaa

1. **Kooxda caafimaadka.** Wax badan ayay samayn karaan si ay kaaga caawiyaan joojinta mukhaadaraadka ama khamriga.

2. Waxaad gargaar ku heli kartaa waaxdaada xabsiga ama adigoo xabsiga uga guura qayb kaloo la yiraahdo qaybta baarista mukhaadaraadka ee iskaa ah. **Eeg bogga 76aad.**

3. **Adeegga CARAT** (Latalin, Baaris, Gudbin, Talobixin iyo Daryeel buuxa). Kuwan waa dad ka baxsan xabsiga ama saraakiil xabsi. Maxaabiista ayay ka caawiyaan joojinta mukhaadaraadka. Goor dhow ka dib markaad xabsiga tagto ayaad arki kartaa qof ka socda CARAT. Waxay kula dejin doonaan qorshe kaa caawiya joojinta mukhaadaraadka.

4. **Barnaamijyo baxnaanis ee mukhaadaraad.** Qofka ku caawinaya ee ka socda CARAT ayaa war kaa siin kara noocyadan kalee gargaarka aad heli karto. Waa in hawlwadeenkaaga CARAT uu horta kuu oggolaado helitaanka gargaarkaas. Xabsi kale ayaa lagu geyn karaa si gargaarkaas laguu siiyo.

Noocyadaas gargaarka, waxaa kaaga waajibi kara baarista mukhaadaraadka. Haddii la ogaado inaad mukhaadaraad qaadato, waa lagaa jari karaa gargarkaas.

- Ha ka walwalin qofka ku caawinaya inaad kala hadasho qaadashada mukhaadaraadka. Waxuu kuu sheegi doonaa macluumaadka sir uu ku hayn karo iyo macluumaadka ku waajiba in uu dad kale u sheego.

- Haddaad ka walwalsan tahay qof qoyskaaga ka tirsan oo mukhaadaraad qaata, ama sida dhibaatadaada mukhaadaraadku ay iyaga u saamaynayso, qof CARAT ka socda taas kala hadal. Qofka CARAT ka socda ayaa habayn kara in qoyskaagu helo gargaar ama warbixin.

Caqiidadaada

- ✓ Xabsiga caqiidadaada ayaad ku gudan kartaa.
- ✓ Shaqaalaha xabsiga ayaad u sheegi kartaa caqiidadaada markaad xabsiga timaaddo. Waxay ka dib kaa caawin doonaan inaad hesho waxa aad ugu baahan tahay gudashada caqiidadaada.
- ✓ Waa in xabsigu hubiyo inay jirto meel aad caqiidadaada ku soo gudan karto. Matalan, si aad ugu tukato ama ugaga qaybqaadato kulanno diimeed.
- ✓ Xabsiwalba waxaa joogta koox dad kaa caawiya gudashada caqiidada. Waxaa taas loo yaqaannaa **kooxda wadaaddada.**
- ✓ Wadaad ayaad codsan kartaa xataa haddaadan diinna aaminsanayn. Wadaaddadu waxay diyaar u yihiin in ay dhegeystaan maxbuus **kaste** oo raba qof uu la hadlo. Matalan, haddii uu isagu murugaysan yahay ama walwalsan yahay.
- ✓ Xabsigu waxuu xafidi doonaa taariikhaha iyo saacadaha salaadda iyo fasaxyada iyo ciidaha adeegyada diimeed.
- ✓ Marwalba ayaad ka qayb qaadan kartaa adeegga ugu muhiimsan ee caqiidadaada. Matalan, weli waad ka qayb qaadan kartaa haddaad ku jirto kalasaar, liiska baxsashada ama isbitaal. Wadaad u sheeg adeegga ka hor haddaad weli rabto inaad ka qayb qaadato.
- ✓ La hadal mid ka mid ah wadaaddada ama qof la yiraahdo **sarkaalka kaladuwanaanta** hadduusan xabsigu daboolayn baahiyahaaga diimeed.
- ✓ War dheeraad ah ayaa ku jira **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4550.** Maktabadda ayuu nuqul ka yaallaa.

Dadka kaa caawinaya gudashada caqiidadaada

- Kooxda wadaaddadu waa koox dad oo caqiidooyin kaladuwan kuwaasoo diyaar u ah inay kaa caawiyaan gudashada caqiidadaada.

- Kooxaha xabsiwalba jooga way kaladuwan yihiin laakiin waxaa caadi ahaan la heli karaa wadaaddo ka socda diimahan iyo caqiidooyinkan

    - Kaniisadda Ingland (Church of England)
    - Kaniisadaha Roman Kaatholig, Methodist iyo kuwa Furan
    - Muslin
    - Buddhist
    - Yuhuud
    - Hindu
    - Siig

Dadka diimaha ama caqiidooyinka kale ayaa xabsiga iman kara haddii loo baahdo.

Rastafarianka xabsiyadu diin uma aqoonsana. Laakiin, kooxda wadaaddada ayaa ku caawin karta haddaad Rastafarian tahay. Waxaad heli kartaa cuntada khudaarta ama ta khudaar dhaaf ah iyo waxyaabaha kaleed u baahato, sida buugaagta.

Hubinta in shaqaalaha xabsigu caqiidadaada og yihiin

- Markaad xabsiga timaaddo waa inaad shaqaalaha xabsiga u sheegto haddaad rabto inaad caqiido gudato. Waxay sidaas shaqaalaha xabsigu ku hubin karaan inaad hesho waxa aad u baahan tahay si aad caqiidadaada u gudato.

- Markaad xabsiga timaad caqiidadaada ayaa lagu weydiin. Waxaad caqiidadaada u sheegi kartaa shaqaalaha xabsiga, ama mid ma rumaysni ayaad odhan kartaa.

- Waxaa taas loo yaqaannaa **diiwaangelinta** caqiidadaada.

War dheeraad ah oo ku saabsan caqiidadaada

- Haddaad ka dib rabto inaad ka qayb qaadato adeegyo ama waxqabadyo diimeed, waxaad u tagaysaa adeegyada caqiidada aad isku diiwaangelisay.

- Wadaad ayaa kuu iman doona goor dhow ka dib markaad xabsiga timaaddo si loo hubiyo in laguu diiwaangeliyey caqiidada saxda ah iyo si loo ogaado haddaad u baahan tahay wax diinta la xiriira.

Haddaad rabto inaad beddesho caqiidadaada

- Caqiido kale ayaad ku beddeli kartaa caqiidada aad isku diiwaangelisay.

- Waa inaad buuxiso foom aanad saxiixdo si aad u sheegto inaad rabto inaad caqiido kale qaadato.

- Kooxda wadaaddada ayaa kaa caawin doonta inaad caqiidadaada cusub u hesho wadaad ku habboon.

Haddaad rabto inaad wadaad caqiido kale aragto adoon caqiidadaada beddelin

Sidaas waad samayn kartaa haddii

- guddoomiyaha iyo wadaaddadu ku faraxsan yihiin inaad dhab u rabto inaad war dheeraad ah ka hesho, ama gudato, caqiido kale

- guddoomiyaha iyo wadaaddadu u arkaan inaad sabab fiican taas u haysato oo aadan rabin inaad dhibaato keento.

Ka qayb qaadashada adeegyo diin ama waxqabadyo kaloo caqiido

- Waa in xabsigu asbuuc kaste 1 saaco ugu yaraan u dhigo adeegyada diimeed.

- Kooxda wadaaddada ayaa kuu sheegi doonta taariikhaha iyo saacadaha adeegyada, kulannada ama waxqabadyada diimeed.

- Adeegga ugu muhiimsan caqiidada aad ku diiwaansan tahay ayaad ka qayb qaadan kartaa.

- Waxaad ka qayb qaadan kartaa kooxaha ama waxqabadyada kalee loogu talagalay caqiidadaada haddii ay meel ka bannaan tahay.

- Adeeg diin ayaad ka qayb qaadan kartaa xataa haddaad xabsiga u sheegtay inaadan mid rumaysnayn.

- Waxaad tagi kartaa kulanno caqiido kale. Horta kala hadal wadaadkaaga.

- Marar wax kalood xabsiga ka qabato, sida jimicsi maalin kaste ama martida, ayaa dhaca isla waqtiga arrimo muhiim ah ee caqiidadaada. Shaqaalaha xabsiga ayaa ku geyn kara munaasabaddaada diimeed hadday sidaas noqoto.

Waxa Wadaadku kuu qaban karo

- Wadaaddadu waxay kaa caawin karaan inaadan ka go’in dunida xabsiga ka baxsan. Matalan, waxay xabsiga kuugu yeeri karaan qof diimeed oo ka socda kaniisadda, masaajidka, tembalka xaafaddaada ama bulshadaada.

- Waxay weliba kaa caawin karaan inaad la xiriirto qoyskaaga. Waxay taas kala shaqayn karaan qoyskaaga ama dad kale sida adeegga carbinta.

- Haddaad dal kale ka timid (maxbuus ajnabi ah) waxuu wadaadku kaa caawin karaa inaad dalkaas kula xiriirto qoyskaaga.

Gargaarka kale. Matalan, laga bixiyo waxyaabaha sida helitaanka sii-daynta sharafeed ah

- Waxaad wadaadkaaga ka codsan kartaa inuu wax kugu saabsan kuugu sheego ama kuugu qoro warbixinnada kugu saabsan ee la sameeyo intaad xabsiga ku jirto.

- Shaqaalaha xabsigu waxay qori doonaan warbixinno kugu saabsan oo ka kooban macluumaad matalan ku saabsan habdhaqankaaga, iyo waxyaabaha aad qabatay sida shaqada ama tacliinta. Waxaa warbixinnadaas loo isticmaali doonaa si loo gaaro go’aanno ku saabsan. Matalan, dad ka socda Guddiga Sii-daynta sharafeed ayaa warbixinnada eegi doona si ay uga go’aan gaaraan haddaad sii-dayn sharafeed heli karto iyo haddii kale.

Xeerasha Xabsiga

Qodobbada ugu muhiimsan

- Xeerasha Xabsigu waxay khuseeyaan xabsiwalba laakiin guddoomiyaha ayaa weliba yeelan kara xeerar degaaneed.
- Markaad Xeerasha Xabsiga jebiso waxaa loo yaqaannaa **dembi.**
- Dembi ayaa lagugu eedayn karaa waana lagu ciqaabi karaa.
- **Xeerka Xabsiga ee lambarka 51** iyo **Xeerka Xerada Dembiileyaasha Dhallinyarada ah ee lambarka 55** ayaa dembiyada ka hadlaya.
- Way adkaan kartaa in Xeerasha Xabsiga la fahmo. Waxaad ka eegi kartaa buug la yiraahdo Buugga Edebta Xabsiga (Prison Discipline Manual). Waxaa kan weliba loo yaqaannaa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 2000.** Nuqulka buugga ayaad ka helaysaa waax kaste iyo maktabadda.

Haddaad samayso waxyaabaha bogagga xiga midkood, waxaad ku jebini Xeerasha Xabsiga dembi ayaanad geysani.

Habdhaqan dulmin kara, u hanjabi kara ama dhaawici kara qof kale

- Haddaad qof dulmido ama garaacdo ama la dagaallanto.
- Haddaad qof u dulmido ama u garaacdo jinsiyaddiisa (jinsiyaddu waa matalan midabka maqaarka qof iyo asalkiisa ama dhaqankiisa).
- Haddaad tiraahdo ama samayso wax ka caraysiin karaa, u hanjabi kara ama cabsigelin kara qof kale. Iyo haddaad taas u samayso sababtoo ah jinsiyadda qof.
- Haddii qof aanan taas rabin aad dadka ka fogayso. Matalan, haddaad meel ku xirto.
- Haddaad la timaaddo habdhaqan khatar gelin kara qof kale ama caafimaadkiisa waxyeellayn kara.
- Haddaad u edeb darnaato qof ka shaqeeya xabsiga ama xerada dembiileyaasha dhallinyarada ah ama cid kaloo soo booqata.

Ka horjoogsashada shaqaalaha xabsiga inay shaqadooda qabtaan

- Haddaad qof ka shaqeeya xabsiga ka horjoogsato inuu tago meeshuu xabsiga uga baahdo. Matalan adoo dhisa derbi aad qof ugu diidayso inuu qolkaaga soo galo.
- Haddaad qof ka shaqeeya xabsiga ka horjoogsato inuu shaqadiisa qabto.

Ka baxsashada xabsiga

- Haddaad ka baxsato xabsiga ama dadka ku haya. Matalan, haddaad ka cararto ilaalo ku wadda.
- Haddaad soo noqon weydo marka waqti gaaban lagaa sii daayo xabsiga. Waxaa taas loo yaqaannaa dhuumasho.

Mukhaadaraadka iyo khamriga

- Haddii lagu amro in kaadidaada la baaro oo ay muuqato inaad qaadatay mukhaadaraad, xataa haddaad qaadatay waqtiga gaaban eed xabsiga ka baxday.
- Haddaad doorato inaad khamri cabto ama la ogaado inaad sakhraansan tahay ka dib markaad khamri cabto.

Khasaare aad u geysato xabsiga ama xerada dembiileyaasha dhallinyarada ah.

- Haddaad gubto dhismaha qayb ka mid ah ama wax ku jira.
- Haddaad khasaare u geysato ama burburiso qayb dhismaha ka mid ah ama wax ku jiroo aadan adigu lahayn.
- Haddaad derbiyada ku dhejiso ama ku qorto ama ku sawirto wax qof ka caraysiin kara, u hanjabi kara ama cabsigelin kara.
- Ama haddaad waxyaabahan midkood u samayso sababtoo ah jinsiyadda qof.

Waxyaabaha aad haysan karto iyo kuwa aadan haysan karin

- Haddaad haysato wax aan laguu oggolayn. Matalan, telefoonka gacanta, mindi ama mukhaadaraad.
- Haddii wax gaar ah aad ku haysato tiro ka badan inta laguu oggol yahay.
- Haddii qof ku soo booqda aad ka aqbasho wax aan laguu oggolayn inaad xabsiga ku haysato. Matalan, mukhaadaraad.
- Haddaad qof ka iibiso ama siiso wax aan laguu oggolayn inaad haysato.
- Haddaad qof ka iibiso ama siiso wax adigu kelidaa aad haysan karto.
- Haddaad qof kale ama xabsiga ka qaadato ama ka xaddo wax adigu aadan lahayn.

Ka joogitaanka xabsiga meel aanan laguu oggolayn

- Haddaad ka tagto meel lagaa rabo inaad joogto.
- Haddaad tagto meel **aanan** laguu oggolayn inaad tagto.

Markaad samayn weydo waxa shaqaalaha xabsigu kugu amraan

- Haddii shaqo laguu diro ood si fiican u samayn **weydo** ama iska daysaba.
- Haddaad raaci **weydo** amar ama xeer habboon inaad raacdo.
- Haddaad jebiso xeerasha xabsiga midkood ama isku daydo inaad qof kale taas ka caawiso.

Jebinta xeerasha waqtiga gaaban eed xabsiga ka baxdo

- Haddaad xeerasha jebiso haddii waqti gaaban xabsiga lagaa sii daayo. Taasi waxay khusaysaa **Xeerka Xabsiga ee lambarka 9** ama **Xeerka Xerada Dembiileyaasha Dhallinyarada ah ee lambarka 5**.

Jebinta xeerasha xabsiga

Markaad xeerasha xabsiga jebiso waxaa loo yaqaannaa **dembi.**

Maxaa dhacaya haddaad dembi geysato?

1. Sarkaal xabsi ayaa islamarkaaba (ama **48** saacadood gudahood) kuu sheegi doona hadduu u arko inaad dembi geysatay iyo waxa dembigu yahay. Waxuu ku siin doonaa foom wax kaaga sheegaya dembiga.

2. Waa inaad tagto dhegeysi (oo weliba loo yaqaanno garsoorid). Tani waa marka adiga iyo shaqaalaha xabsigu aad ka wadahadashaan dembiga iyo waxaad gebi u malaynaysaan inuu dhacay. Dhegeysiga waxaa maamuli doona guddomiyaha ama qof xabsiga ka baxsan oo la yiraahdo garsoore madaxbannaan.

3. Goorta dhegeysiga, waa inaad qirato ama diiddo dembiga.

4. Guddoomiyaha ama garsooraha madaxbannaan ayaa go'aansan doona inay dembiga kugu heleen ama kugu waayeen. Waxay taas samayn doonaan ka dib markay dhegeystaan laftigaaga iyo dadka kalee wax ka og waxa dhacay.

5. Haddii dembiga lagugu helo, waa lagu ciqaabi doonaa. Liiska ciqaabyadu waxuu ku yaallaa **bogga 87aad.** Haddii dembiga lagugu waayo, wax kale lama samaynayo.

Ciqaabyada

Qodobbada ugu muhiimsan

- ✓ Ciqaabyada lagu saari karo waxaa lagaga hadlayaa **Xeerka Xabsiga ee 55 iyo 55A** iyo **Xeerka Dembiilaha dhallinyarada ah ee 60 iyo 60A.**
- ✓ Ciqaabta lagu saaro waxay ku xiran tahay heerka darnaanta ee dembiga.
- ✓ Xabsigu booliiskuu u yeeri karaa haddii loo arko inuu dembigu daran yahay.
- ✓ Haddaad tiro dembi oo 1 ka badan geysato dembi kaste ayaa laguu ciqaabi karaa. Ciqaabyada waa la isku daba xigsiin karaa.
- ✓ Maalmo siyaado ayaad xabsiga joogi kartaa haddii dembigu si ku filan u daran yahay.
- ✓ Laakiin, haddii maalmo dheeraad ah lagu saaro, tirada maalmaha dheeraadka ah ee dembi kaste lagaa saaro ma dhaafi karto 42.
- ✓ Ciqaabta aanan ahayn digniin rasmi ah waxaa dib loo dhigi karaa ilaa 6 bilood. Waxay taasi ka dhigan tahay in ciqaabtaadu bilaabmi karto haddaad muddadaas dembi kale geysato.
- ✓ Guddoomiyaha ayaa ku saari kara ciqaabta aanan ahayn maalmo dheeraad ah.
- ✓ Garsooraha madaxbannaan (xaakin degmo) ayaa keligii ku saari kara maalmo dheeraad ah, iyo weliba ciqaabyada kale.

Waa kan liiska ciqaabyada lagaa saari karo dembiga aad geysato

- Digniin rasmi ah ayaa lagu siin karaa.
- Fursadahaaga (sida telefishin aad ku haysato qolkaaga) ayaa lagaa goyn karaa ilaa 42 cisho. Ama ilaa 21 cisho dembiilaha dhallinyarada ah.
- Waxaa la xannibi karaa lacagta ilaa 84 cisho ee aad kasbato. Ama ilaa 42 cisho dembiilaha dhallinyarada ah. Laakiin waxaa lagu siin doonaa lacag aad tigidho boosto ku iibsan karto kuna diran karto telefoon si aad qaraabadaada ula xiriirto.
- Qol ka fog maxaabiista kale ayaa kelidaa lagugu xiri karaa ilaa 35 cisho. Ama ilaa 16 cisho dembiilaha dhallinyarada ah ee 18 jir ka weyn. Waxaa taas loo yaqaannaa qol ku xabbisid. Takhtar ama kalkaaliye caafimaad ayaa horta ku eegi doona si loo hubiyo in aad taas samayn karto.
- Waxaa laguu diidi karaa inaad maxaabiista kale la shaqayso ilaa 21 cisho.
- Haddii lagu hayo, fursadahaaga ayaa lagaa goyn karaa.
- Waxaa waaxda xabsiga ama qaybta la dego lagaa saari karaa ilaa 28 cisho. Ama ilaa 21 cisho dembiilaha dhallinyarada ah.

Waxaa ciqaabyadan loogu talagalay **dembiilaha dhallinyarada ah oo keliya**

- Waxaa laguu diidi karaa inaad waxqabadyo ka qayb qaadato ilaa 21 cisho.
- Waxaa kugu waajibi karta 2 saacadood oo kale oo shaqo maalintii ilaa 21 cisho.

Maalmaha dheeraadka

- Haddii dembigu si ku filan u daran yahay, waxaa lagu saari karaa ilaa 42 cisho oo dheeraad ah ood xabsiga ku jirto iyo weliba ciqaabyada kale.
- Maalmaha dheeraadka ah kuma jiraan xukunkaaga laakiin xabsiga ayaad waqtiga dheeraadka ah joogi doontaa.
- Garsooreyaasha madaxbannaan (waa xaakimiin degmo) ayaa keligood ku saari kara maalmo dheeraad ah.

War dheeraad ah oo ku saabsan maalmaha dheeraadka ah

- Haddii lagu hayo, waxaad maalmaha dheeraadka ah buuxinaysaa uun haddii dembi lagugu xukumo oo xukun lagu saaro.

- Maalmo dheeraad ah laguma saarayo haddaad tahay maxbuus xabsi daa'in ku jira, maxbuus loo xiray si shacabka loo ilaaliyo, maxbuus rayid ah, ama maxbuus ajnabi ah oo xabsi lagu hayo inta haajiraaddaada la xallinayo.

Garsooridda xabsiga – oo weliba loo yaqaanno dhegeysi

Qodobbada ugu muhiimsan

- ✓ Waa inaad tagto dhegeysi xabsi si aad dembiga uga hadasho.
- ✓ Dhegeysiga waxaa maamuli doona guddomiyaha ama xaakin degmo oo xabsiga ka baxsan (oo la yiraahdo garsoore madaxbannaan).
- ✓ Waxuu dhegeysigu caadi ahaan dhici doonaa maalin ka dib marka shaqalaaha xabsigu ay ku ogaysiiyaan dembiga ay u arkaan inaad geysatay.
- ✓ Waxaa lagu siin doonaa ugu yaraan 2 saacadood si aad dhegeysiga isugu diyaariso.
- ✓ Maxaabiista kale ayaa lagaa fogayn karaa ilaa inta dhegeysigaagu dhacayo.
- ✓ Waxaad fursad u heli doontaa inaad sheegto waxa aad u malaynayso inuu dhacay.
- ✓ Waxaad weliba u yeeran kartaa markhaati dhegeysiga timaadda oo ka hadasha.
- ✓ Waxaad u yeeran kartaa dad kaloo ku caawiya. Matalan, looyar ama qof la yiraahdo McKenzie friend. **Eeg bogga 94aad.**
- ✓ La hadal sarkaal xabsi ama looyarkaaga haddaadan fahansanayn waxa dhacaya ama aad u baahato inaad su'aalo jeediso.

Maxaa dhici doona dhegeysiga ka hor?

- Waa lagu **wargelin** doonaa**.** Tani waa marka sarkaal xabsi kuu sheego dembi uu u arko inaad geysatay.

- Waa in sarkaalka xabsigu islamarkaaba (ama 48 saacadood gudahood) kuu sheego dembiga uu u arko inaad geysatay.

- Waxuu dhegeysigu caadi ahaan dhici doonaa maalinta taas ku xigta (haddaanay ahayn Axad ama Maalin la Fadhiyo).

- Waxaa lagu siin doonaa ugu yaraan 2 saacadood si aad dhegeysiga isugu diyaariso.

Dhegeysiga ka hor waxaa lagu siin doonaa **2** foom

1. **Foomka 1127A.** Waxuu kani kaaga warramayaa dembiga sarkaalka xabsigu u arko inaad geysatay. **Waa** inaad sheegto haddaadan fahmayn waxa foomkan ku qoran.

2. **Foomka 1127C.** Waxuu kani kuu sheegayaa waxa dhegeysiga ka dhici doona

   Foomkan waxaad

   - ku qori kartaa bayaan ku saabsan waxaad u aragto inuu dhacay. Taas ku samee dhabarka foomka. Warqad kale codso haddaad u baahato

   - ku qori kartaa magaacda markhaatida aad rabto inay dhegeysiga yimaaddaan, haddaad marxaladdaas garanayso cidda ay yihiin. Dhegeysiga ayaad ku sheegi kartaa dadka aad rabto inay markhaati kuu noqdaan haddaad ka jeceshahay.

War dheeraad ah oo ku saabsan dhegeysiyada

- Takhtar ama kalkaaliye ayaa caafimaadkaaga baari kara dhegeysiga ka hor si loo hubiyo inaad dhegeysiga tagi karto.
- Maxaabiista kale ayaa lagaa fogayn karaa ilaa inta dhegeysigaagu dhacayo.

Waxa aad samaynayso dhegeysiga ka hor

- ✓ Ka fikir waxa aad rabto inaad ka tiraahdo dhegeysiga.
- ✓ Ka fikir in qof kale arkay waxa dhacay. Markhaati ayuu dhegeysiga kaaga noqon karaa.
- ✓ Waxaa wax kuu tari karta inaad dhegeysiga ka hor eegto buug la yiraahdo Buugga Edebta Xabsiga. Kan waxaa weliba la yiraahdaa **PSO 2000**. Nuqulkiisa waxaad ka heli kartaa waaxdaada iyo maktabadda xabsiga. Nuqul ka codso haddaadan maktabadda tegi karayn.
- ✓ Waxaad codsan kartaa in dhegeysiga taariikh dambe laga dhigo haddaad dhegeysigaaga ka hor arki weydo Buugga Edebta Xabsiga.
- ✓ Haddii akhriska ama qoristu kugu adag yihiin, ama aad wax fahmi weydo markaa gargaar weydiiso sarkaal xabsi ama looyarkaaga.

Maxaa dhegeysiga ka dhici doona?

1. Guddoomiyaha ayaa eegi doona haddii

- aad haysato foomamka **1127A** iyo **1127C**
- aad fahansan tahay sababta aad dhegeysiga u joogto iyo waxa dhici doona
- aad heshay waqti kugu filan si aad dhegeysiga isugu diyaariso. Matalan, si aad uga fikirto waxa aad rabto inaad tiraahdo.
- aad gargaar rabto, sida talobixin sharci ah ama turjumaan

2. Qof ayaa eedda akhrin doona. Eeddu waa dembiga shaqaalaha xabsigu u arkaan inaad geysatay.

3. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad **qiranayso** ama **diidayso** dembiga.

Haddaad dembiga qirato

- Sarkaalka xabsiga ee ku wargeliyey ayaa akhrin doona bayaan ku saabsan waxa dhacay.

- Waa inaad adigu ka dib sheegto sidaad taas u aragto. Matalan su'aalo ayaad jeedin kartaa.

- Sheeg haddii **aadan** oggolayn waxa sarkaalka xabsigu sheegay. Weliba markhaati ayaad codsan kartaa haddii **aadan** oggolayn waxa sarkaalka xabsigu sheegay.

- Waa in guddoomiyuhu baaro wixii aad sheegto inaadan oggolayn.

- Guddoomiyaha ayaa ku go'aan gaari kara in bayaanku sax yahay oo uusan jirin wax kaloo la baaro. Hadday sidaas noqoto, waxuu ku weydiin doonaa haddaad rabto inaad bixiso **jawaab dhibyarayn.** Tani waa markaad guddoomiyaha u sheegi karto wax aad u aragto inuu dembigaaga khafiifin karo.

- Shaqaalaha xabsiga midkood ayaa ka dib akhrin doona war ku saabsan habdhaqankaaga tan iyo markii xabsiga aad timid. Iyo wixii dhegeysi ah ee hore kuugu dhacay.

- Waxaad ka dib sheegi kartaa sidaad u aragto warka uu qofkaasi akhriyey.

- Guddoomiyaha ayaa ka dib ciqaabtaada kuu sheegi doona. Ka dib waxaa nuqul lagaa siin doonaa foom kuu sheegaya ciqaabtaada. Foomka waxaa la yiraahdaa **Foomka 256D.**

- Haddii guddoomiyuhu, marnaba, u arko in dembigaagu yahay heer darnaan oo ku filan si laguu saaro maalmo dheeraad ah, garsoore madaxbannaan ayuu ka codsan doonaa inuu dacwaddaada eego.

- Waxay qaadan kartaa ilaa 28 cisho si aad garsooraha madaxbannaan u aragto.

Haddaad dembiga diiddo, ama aadan hubin jawaabta aad bixinayso

- Sarkaalka xabsiga ee ku wargeliyey ayaa akhrin doona bayaan ku saabsan waxuu u malaynayo inuu dhacay.

- Waxaad sheegi kartaa sidaad taas u aragto ama su'aalo ayaad jeedin kartaa.

- Guddoomiyaha ayaa sarkaalka xabsiga su'aalo weydiin doona. Waxuu weliba codsan karaa inuu markhaati maqlo.

- Adiga iyo guddoomiyaha ayaa markhaatida su'aalo weydiin kara.

- Waxaa ka dib lagu weydiin doonaa sidaad u aragto eedda (waxa shaqaalaha xabsigu u arkaan inaad samaysay) iyo daliilka ay keeneen.

- Markhaati kuu dooda ayaad u yeeri kartaa haddaad rabto (haddaanay jirin sabab aad u fiican oo taas kuu diidaysa siduu guddoomiyuhu u arko).

- Adiga, sarkaalka xabsiga iyo guddoomiyaha ayaa markhaatida su'aalo weydiin kara.

- Waxaad sheegi kartaa sababaha ugu muhiimsan eed u aragto inaadan dembiga geysan.

- Guddoomiyaha ayaa ka dib go'aankiisa kuu sheegi doona. Waxaa kaas loo yaqannaa guddoonka. Waa inuu guddoomiyuhu aad u hubo inaad dembiga geysatay ka hor intuusan dembiga kugu helin.

- Haddii dembiga lagugu helo, guddoomiyaha ayaa ciqaabtaada kuu sheegi doona. Waxuu guddoomiyuhu ka dib nuqul kaa siin doonaa foom kuu sheegaya ciqaabtaada. Foomka waxaa la yiraahdaa **Foomka 256D.**

- Haddii guddoomiyuhu, marnaba, u arko in dembigaagu yahay heer darnaan oo ku filan si laguu saaro maalmo dheeraad ah, garsoore madaxbannaan ayuu ka codsan doonaa inuu dacwaddaada eego.

Gargaarka kaleed ku heli karto dhegeysiga

Gargaar noocyadan ah ayaad dhegeysigaaga ku heli kartaa

- talobixin sharci ah
- wakiil sharci ah (looyar ayaa dhegeysiga iman doona si uu kuu matalo)
- saaxiib ama lataliye ku soo raaca (qofkan waxaa loo yaqaannaa McKenzie friend). Qofkaasi wuu iman karaa si uu qoraallo kuugu sameeyo talana kuu siiyo. Laakiin **kuma** matali karo waxuuna hadli karaa oo keliya haddii guddoomiyuhu oggolaado. Saaxiibkaaga McKenzie friend waxuu noqon karaa matalan wadaadka, sarkaal xabsi ama maxbuus kale.

Haddii dhegeysiga uu guddoomiye maamulayo

Talobixin sharci ah ayaad heli **kartaa**. Waxaad taas ku heli kartaa telefoon, warqad ama booqasho aad la yeelato looyarkaaga.

Ma heli kartid wakiil sharci ah hadduusan guddoomiyuhu kuu oggolaan sababtoo ah matalan

- heerka darnaanta dembiga iyo ciqaabta lagu saari karo
- su’aalaha ka soo shaacbixi kara sharciga
- inta aad ka fahansan tahay waxa dhacaya
- waxyaabaha hakin kara dacwadda ama dhibaato keeni kara. Matalan, haddaad dhibaato kala kulantay diyaarinta dooddaada difaaca maadaama lagaa fogeeyey maxaabiista kale.

Caadi ahaan dhegeysiga noocaas ah **ma** keenan kartid McKenzie friend ama lataliye.

Laakiin waxaad keenan kartaa McKenzie friend ama lataliye haddaadan fahansanayn waxa dhacaya, dacwaddu dhib badan tahay ama guddoomiyuhu u arko inay xaq tahay in taas laguu oggolaado.

Haddii dhegeysiga uu maamulayo garsoore madaxbannaan (xaakin degmo)

- Marwalbaad heli **kartaa** wakiil sharci ah (looyar ku matala ayaa imanaya).
- Guddoomiyaha ama sarkaalka adeegyada sharci ayaa kaa caawin kara dhibaatooyinka aad kala kulanto helitaanka wakiil sharci ah.

Codsiga dib u eegid khusaysa dhegeysiga ama ciqaabta

Waxaad

- ✓ Dib u eegid codsan kartaa haddaad u aragto in dhegeysiga hab xun loo sameeyey ama ciqaabta lagu saaray aad u aragto mid si xad dhaaf ah u adag.
- ✓ Guddoomiyaha ayaa wax ka qaban kara hadduu u arko in dhegeysiga si xun loo sameeyey.
- ✓ Codsan kartaa in lagaa celiyo maalmo dheeraad ah oo lagu saaray.

Maxaa dhacaya haddii dhegeysiga si xun loo sameeyo ama ciqaabta lagu saaro aad u aragto mid si xad dhaaf ah u adag?

1. Haddii guddoomiyuhu u arko in dhegeysiga si xun loo sameeyey

Haddii dhegeysiga uu guddoomiye maamulay

- Guddoomiyaha ayaa beddeli kara natiijada dhegeysiga. Matalan, waxuu beddeli karaa kugu helidda dembiga iyo ciqaabta lagu saaray.

Haddii uu dhegeysiga maamulay garsoore madaxbannaan (xaakin degmo)

Guddoomiyuhu waxuu

- dacwadda ku celin karaa xaakinka degmo ee sare si uu u eego.

2. Haddaad u aragto in dhegeysiga si xun loo sameeyey ama ciqaabta lagu saaro mid si xad dhaaf ah u adag.

Haddii dhegeysigaaga uu guddoomiye maamulay

- Sarkaal xabsi ee waaxdaada weydiiso foom la yiraahdo **Foomka ADJ1**.
- Foomka buuxi uguna dir guddoomiyaha **6** asbuuc gudahood ka dib dhegeysiga.
- Qof la yiraahdo maamule degmo ayaa ka go'aan gaari doona dacwaddaada.
- Haddii maamulaha degmo u arko in dhegeysigaaga si xun loo sameeyey, waxuu beddeli karaa kugu helidda dembiga ama ciqaabta lagu saaray.

Haddii uu dhegeysigaaga maamulay garsoore madaxbannaan

- Qoraal **warqad cad** ugu dir guddoomiyaha si aad ugu macnayso sababtaad u rabto in la eego natiijada dhegeysigaaga. **Ha** buuxin Foomka ADJ1. Waa inaad guddoomiyaha warqadda ugu dirto 14 cisho gudahood ka dib dhegeysiga.
- Waxaa warqaddaada loo diri doonaa xaakin la yiraahdo xaakinka degmo ee sare si uu u eego. Xaakinku waxuu ka socdaa Maxkamadda Dembiyada fudud ee Westminster.
- Xaakinka degmo ee sare waxuu go'aansan kara inuu beddelo ciqaabta lagu saaray. Laakiin **ma** beddeli karo kugu helidda dembiga.

Haddaadan weli faraxsanayn taas ka dib

- Qof la yiraahdo **Dhexdhexaadiyaha Xabsiyada iyo Carbinta** ayaad weydiisan kartaa inuu dacwaddaada eego. Qofkani uma shaqeeyo xabsiga. Shaqadiisu waa eegidda cabashooyinka maxaabiista ee ku saabsan nolosha xabsiga.
- Waxaad dhexdhexaadiyaha u diri kartaa warqad aad ku weydiisanayso inuu dacwaddaada eego. Ama looyarkaagaad weydiisan kartaa inuu taas sameeyo.
- Dhexdhexaadiyuhu waxuu horta isku dayi doonaa inuu xalliyo xaaladda adiga iyo guddoomiyaha idinka dhexaysa.

War dheeraad ah oo ku saabsan dhexdhexaadiyeyaasha

- Hadday taasi wax xallin weydo, dhexdhexaadiyuhu warbixin ayuu ka qori doonaa waxa la habboon in la sameeyo.
- Dib **looma** samayn karo dhegeysigaaga. Laakiin waxuu dhexdhexaadiyuhu ku talin karaa in xabsigu beddelo kugu helidda dembiga ama ciqaabta lagu saaray.

  Warqad dhexdhexaadiyaha ugu soo dir halkan

  Prisons and Probation Ombudsman
  Ashley House
  2 Monck Street
  LONDON
  SW1P 2BQ

Dib u eegid maxkamadeed

- Xaakin ayaad weydiisan kartaa inuu dacwaddaada eego. Laakiin waxaa laguu diidi karaa inay taasi dhacdo. Markaa waxaa ugu fiican inaad horta ku cabato siyaabaha laga soo hadlay.
- Haddaad rabto inuu xaakin dacwaddaada eego, looyarkaaga u dir warqad aad ku weydiisanayso inay taasi dhacdo.

Kaa celinta maalmo dheeraad ah oo lagu saaro

- Waxaad codsan kartaa in lagaa celiyo qaar maalmaha dheeraadka ah ee lagu saaray.
- Waxaad caadi ahaan codsan kartaa in lagaa celiyo ilaa **nus** maalmahaas.
- Waxaad codsan kartaa in maalmaha dheeraadka ah lagaa celiyo **6 bilood** ka dib markii ugu dambaysay ee dembi lagugu helay. Ama 6 bilood ka dib markii ugu dambaysay ee aad codsatay in lagaa celiyo maalmaha dheeraadka ah.
- Haddaad dembiile dhallinyaro ah tahay, waxaad codsan kartaa **4 bilood** ka dib.

Sidaad u codsanayso kaa celinta maalmo dheeraad ah oo lagu saaro

- La hadal shaqaalaha waaxdaada midkood. Waxuu shaqaaluhu eegi doonaa in lagaa celin karo maalmaha dheeraadka ah ee lagu saaray.

- Waxaa ka dib lagu weydiin doonaa inaad qoraal ku dhigto sababta ay kuula habboon tahay in lagaa celiyo maalmaha dheeraadka ah ee lagu saaray

- Shaqaalaha waaxdaada midkood ayaa ka dib warbixin kaa qori doona una diri doona guddoomiyaha. Waxuu weliba warbixinta raacin doonaa macluumaadka ku saabsan wixii dembiyo ah eed geysatay.

- Waxay u badan tahay inaanan lagaa celin maalmahaas dhammaantood. Laakiin goor dambe ayaad haddana codsan kartaa in kuwo kale lagaa celiyo.

Kalasaarka, baaridda qolkaaga iyo wixii kalee shaqaalaha xabsigu samayn karaan si ay nabadda xabsiga u ilaaliyaan

- ✓ Waxaa jira waxyaabo kaloo shaqaalaha xabsigu samayn karaan si ay u xukumaan waxa xabsiga ka dhaca.

- ✓ Waxyaabahaas ciqaabyo **lagama** dhigi karo. Laakiin waxaa la isticmaali karaa marka loo baahdo si dadka kale dhaawac looga ilaaliyo iyo si xabsiga nabadda loogu ilaaliyo.

- ✓ Waxyaabahaas marar dhif ah ayaa la isticmaalaa.

Kalasaarka (war dheeraad ah ayaa ku jira **Xeerka Adeegga Xabsiga ee 45**)

Waa maxay kalasaarku?

- Kalasaarku waa marka lagaa fogeeyo maxaabiista kale.
- Guddoomiyaha ayaa ka go'aan gaaraya in kalasaar lagu gelinayo iyo in kale.
- Waxaa lagugu hayn karaa qayb kaloo xabsiga ka mid ah oo la yiraahdo qaybta kalasaarka. Maxaabiista kale ayaa lagaa fogayn doonaa. Waxaa laguu geyn karaa maxaabiis kaloo iyaguna kalasaar ku jira.
- Waxaa dhici karta inaad shaqayn weydo waxaana waajibi karta inaad qolkaaga ku jirto waqti ka badan maxaabiista kale.

Waa maxay sababta laguu gelin karo kalasaarka?

- Haddii adiga ama shaqaalaha xabsi u aragtaan inaad khatar ku jirto. Matalan, waxaad rabi kartaa in lagaa fogeeyo maxaabiista kale haddaad u malaynayso inay ku dhaawici doonaan sababtoo ah nooca dembiga aad geysatay. Matalan, haddaad geysatay dembi galmeed. Looyarkaaga ama booliiska ayaa laga yaabaa inay taas kaala taliyeen.
- Haddaad la timaaddo habdhaqan shaqaalaha xabsigu u arkaan inuu khatar gelin karo dadka kale ama dhibaato u geysan karo xabsiga intiisa kale.

Inteed ku jiri doontaa kalasaarka?

- Guddoomiyuhu waxuu kalasaarka ku gelin karaa ilaa 3 cisho marka hore.
- Taas ka dib waxaa kalasaarka lagu gelin karaa ilaa 1 bil ah. Ka dibna ilaa 1 bil ah mar kastoo taas ka dambeeya.
- Maxaabiista 21 jir ka yar waxaa kalasaarka la gelin karaa ilaa 14 cisho ugu badnaan.
- Ka dib 3da cisho ee ugu horreeya, waa in guddoomiyuhu 14kii cishaba mar ugu yaraan uu eego inay weli habboon tahay in lagugu hayo kalasaarka.

Waxyaabaha aad ka fikirayso haddaad rabto inaad kalasaar gasho

- ✓ Gelidda kalasaarku waa wax aad u culus oo la sameeyo. Si taxaddar badan uga fikir kar hor intaadan codsan in lagu geliyo kalasaarka.
- ✓ Waxaad kalasaar geli kartaa uun haddii guddoomiyuhu oggolaado inay habboon tahay.
- ✓ Haddaad kalasaar gasho, maxaabiista kale ayaa bilaabi kara inay kaa shakiyaan taasoo kugu sii adkayn karta inaad ku noqoto waaxdaada.

Gargaarkaad heli karto intaad kalasaarka ku jirto

Haddaad wax ka walwasho intaad kalasaarka ku jirto, la hadal sarkaal xabsi ama guddoomiyaha.

Dadkan ayaa **maalinwalba** soo booqda qaybta kalasaarka

- sarkaal xabsi
- guddoomiyaha
- takhtar ama kalkaaliye caafimaad.

Dadkan ayaa weliba qaybta kalasaarka soo booqda – laakiin ma aha maalinwalba

- wadaadka
- qof ka socda Guddiga Dabagalka Madaxbannaan (kuwani waa dad eega in xabsiyada si fiican oo xaq ah loo maamulo).

Degaan gaar ah iyo qalab xaddidid

Waxyaabahan badi lama isticmaalo. Laakiin shaqaalaha xabsigu way isticmaali karaan haddii

- aad si rabshad leh u dhaqmayso
- aad dhaawici karto ama waxyeellayn karto laftigaaga, dadka kale ama xabsiga.

Degaanka gaarka ah waa qol shaqaalaha xabsigu kugu xiri karaan haddaad si rabshad leh u dhaqmayso. Waxaa dhici karta in qolku uusan lahayn saabaan. Waxaa qolka lagugu xiri doonaa ilaa intaad is dejinayso.

Qalabka Xaddididdu waa shayo la saari karo jirkaaga si aadan u dhawicin laftigaaga ama dad kale. **Suunka jirka** ayaa ah nooca qalabka xaddididda ee la isticmaali doono. Waa suun dhexda lagu xiro ooy katiinado ku rakiban yihiin.

- Suun jir ayaa laguu xiri doonaa haddii kugu xiridda qol gaar ah ay waxtari weydo.
- Waxaa suun jir laguu xiri karaa uun haddaad 17 jir ka weyn tahay.
- Shaqaalaha xabsiga ayaa sidaad tahay eegi doona 4tii saacadoodba mar.
- Qof ka socda Guddiga Dabagalka Madaxbannaan (dadka eega in xabsiyada si fiican oo xaq ah loo maamulo) ayaa 1 cisho gudaheed kuugu iman doona. Qofkaasi waxuu weliba goobjoog ahaan doonaa hadday suurogal tahay marka shaqaalaha xabsigu eegayaan sidaad tahay.

Qodobbada ugu muhiimsan

- ✓ Waa in guddoomiyuhu oggolaado ka hor inta shaqaalaha xabsigu aanay kugu xirin qol gaar ah ama kuu xirin suunka jirka.
- ✓ Waa in shaqaalaha xabsigu ay kooxda caafimaadka u sheegaan inay taasi dhacday.
- ✓ Takhtar ama kalkaaliye caafimaad ayaa islamarka suurogalka ah ku soo eegi doona.
- ✓ Waa in qof ka socda Guddiga Dabagalka Madaxbannaan (dadka eega in xabsiyada si fiican oo xaq ah loo maamulo) 1 cisho gudaheed kuugu yimaaddo.
- ✓ Guddiga Dabagalka Madaxbannaan ayaa weliba eegi doona inay sax ahayd in shaqaalaha xabsigu kugu xiraan qol gaar ah ama kuu xiraan suunka jirka.
- ✓ Shaqaalaha xabsiga ayaa badi sidaad tahay soo eegi doona. Islamarka habdhaqankaagu uusan khatar ahayn, shaqaalaha xabsiga ayaa kaa saari doona qolka gaarka ah iyo / ama suunka jirka.

Kacdoonka Xabsiga

Haddaad ka qayb qaadato qas xabsi oo daran, waxaa lagugu eedayn karaa dembiga **kacdoonka xabsiga.**

Kacdoonka xabsigu waa marka adiga iyo maxaabiis kale aad samaysaan waxyaabo aad isugu dayaysaan inaad ku qabsataan xabsiga oo aad xukunka iyo maamulka xabsiga ugu diiddaan guddoomiyaha iyo shaqaalaha kalee xabsiga.

Waxaa dembiga kacdoonka xabsiga lagugu eedayn karaa haddii

- shaqaale ama maxaabiis dhaawacmaan
- xabsiga khasaare gaaro
- guddoomiyaha uu ka lumo xukunka xabsiga qayb ahaan ama gebi ahaan.

Haddii lagugu eedeeyo dembiga kacdoonka xabsiga waxaa

- lagu saari karaa xukun xabsi oo ilaa 10 sano ah
- lagu saari karaa ganaax markaasoo ay kugu waajibayso inaad lacag bixiso
- ama labadaas shay.

Haddii maxaabiista kalee ku hareera jooga bilaabaan kacdoon xabsi

- **ha ku** biirin
- ka tag meesha uu ka dhacayo
- haddii kale, shaqaalaha xabsiga ayaa u malayn kara inaad kacdoonka ka qayb qaadanaysay waxayna kugu eedayn karaan dembiga kacdoonka xabsiga.

Baaridda qolkaaga iyo alaabtaada

- Saraakiisha xabsiga ayaa waqti kaste baari kara qolkaaga iyo alaabtaada si ay xabsiga nabadda ugu ilaaliyaan.
- Ma jiro xeer khuseeya inta jeer ee taas la samayn karo. Waxay ku xiran tahay xabsiga aad ku jirto ama sida aad nabad ula eeg tahay shaqaalaha xabsiga.

Maxaa dhacaya marka qolkaaga ama alaabtaada la baarayo?

- Qolkaagaa jirkaaga gebi lagu baari doonaa ka hor intaanan qolkaaga la baarin.
- Waa inaad shaqaalaha xabsiga u dhiibto wixii laguu oggolayn inaad haysato.
- Meel kale ayaa xabsiga lagaa geyn doonaa inta qolkaaga la baarayo.
- Shaqaalaha xabsiga ayaa shayo ka qaadi kara qolkaaga si ay u soo eegaan. Mashiinno Raajo ayaa aad loogu sii eegi karaa alaabtaada.
- Shaqaaluhu way eegi karaan dukumeentiyadaada sharci laakiin ma akhrin doonaan.

Ku baaridda

Shaqaalaha xabsigu 2 nooc oo baaris ayay kugu samayn karaan

1. Baarista gacmo maris

Tani waa marka shaqaalaha xabsigu

- ku weydiin karaan inaad iska saarto kabaha aanad faaruqiso jeebabkaaga
- kaa eegi karaan afka, sanka (daloollada sanka), dhegaha iyo timaha.

- ✓ Shaqaalaha xabsigu waqti kaste ayay kugu samayn karaan baarista gacmo maris.
- ✓ Shaqaale kaste ee xabsi, xataa shaqaalaha dumarka ah, ayaa baarista gacan maris kugu samayn kara. Shaqaalaha xabsiga u sheeg haddaanay kula habboonayn in haweenay kugu samayso baarista gacmo maris. Matalan, diinta awgeed.
- ✓ Baarista gacmo maris waxay dhici kartaa ka hor ama ka dib u kala wareegiddaada laba meelood ee xabsiga.

2. Baarista jirkaaga gebi

Tani waa marka shaqaaluhu

- Baari karaan dharkaaga.
- Baari karaan jirkaaga. Shaqaaluhu waxay weliba ku weydiin karaan inaad foorarsato ama kambaruursato si ay u eegaan inaadan wax ku qarin futadaada ama saxaaxaaga. Waa inaanay jirkaaga taaban markay taas samaynayaan.
- Goorta baarista dhar ayaad marwalba xirnaan doontaa. Shaqaalaha xabsigu waxay kolba eegi doonaan dharkaaga qar keliya dib ayaanad dharkaas u xiran kartaa ka hor intaanay qarka kale eegin.

War dheeraad ah oo ku saabsan baarista jirka gebi

- ✓ Sarkaal kaste ee xabsi, sarkaal kaste oo sare, sarkaal kaste oo guud ama guddoomiyaha ayaa kugu samayn kara baarista jirka gebi.
- ✓ Waxaa baarista samayn doona shaqaale xabsi oo lab ah.
- ✓ Baarisyada jirka gebi waqti kaste ayaa la samayn karaa. Matalan
    - marwalbood xabsiga ka baxayso ama timaaddo
    - xoogaa ka hor intaanan qolkaaga la baarin
    - markaad tagto qaybta kalasaarka
    - ka dib markaad u tagto saaxiibbo ama qaraabo ama looyarkaaga
    - ka dib booqashawalba haddaad tahay maxbuus qaybta A ee amniga sare.
- ✓ Waa in shaqaalaha xabsigu si cad kuugu macneeyaan waxa dhici doona ka hor intaanay kugu samaynin baarista jirka gebi.
- ✓ Baarisyada jirka gebi waa in lagu sameeyo hab fiican oo nabad ah.
- ✓ Waa in shaqaalaha xabsiga ee baarista samaynaya oo keliya ay caadi ahaan goobjoog ahaadaan inta baaristu socoto.

Sida habboon in laguula dhaqmo xabsiga dhexdiisa

Xabsiga dhexdiisa, waa in laguula dhaqmo si habboon. Haddii kale, waxbaad isku dayi kartaa inaad ka qabato.

Bogga xiga waxaa ku jirta warbixin ku saabsan qaar ka mid ah shuruucyada loogu talagalay in lagu ilaaliyo nabaddaada, iyo waxyaabaha ah in xabsigu sameeyo si loo hubiyo in si habboon laguula dhaqmo.

Sharciga Xuquuqul Insaanka ee 1998kii soo baxay

- Sharcigani waxuu ku saabsan xuquuqda aadamaha. Qofwalba waxaa u yaalla xuquuqul insaan sida xaqa noolaanta ama xaqa maxkamad caddaali ah.
- Haddaad u aragto inaad seegtay xuquuqul insaankaaga maxkamadda ayaad dacwaddaada geyn kartaa.
- Si aad war dheeraad ah uga hesho Sharciga Xuquuqul Insaanka eeg buugyare la yiraahdo **Guide to the Human Rights Act (Hagaha Sharciga Xuquuqul Insaanka)** iyo baakad warbixineed oo la yiraahdo **The Human Rights Act (Sharciga Xuquuqul Insaanka).** Labadaasba maktabadda ayaad ka helaysaa.

Rabshadda ama xoogsheegashada

- Waxuu maxbuuswalba xaq u leeyahay inuu nabadqab dareemo.
- Haddii qof rabshad kuu geysanayo ama kuu xoogsheeganayo, islamarkaaba shaqaalaha xabsiga u sheeg. Waxaad u sheegi kartaa shaqaale kastoo xabsi sida saraakiisha xabsiga, wadaadka iyo shaqaalaha tacliinta.
- Rabshadda iyo xoogsheegashadu waa matalan dad ku garaacaya ama kuu hanjabaya (matalan, ku leh inay ku dhaawici doonaan ama wax kugu samayn doonaan).
- Shaqaalaha ayaa ku caawin doona hadday taasi ku haysato.

Sinnaanta jinsiyadeed – dadka jinsiyada kaladuwan ka socda

- Jinsiyadda qofku waxay ku saabsan tahay waxyaabo badan sida asalkiisa iyo dhaqankiisa iyo midabka maqaarkiisa.
- Sida sharcigu dhigayo, waa in xabsiyadu hubiyaan in dadka ka socda gebi jinsiyadaha kaladuwan loola dhaqmo si fiican oo xaq ah. Guddoomiyaha iyo maamuleyaasha sare ayaa ka masuul ah inay hubiyaan in sidaas ay noqoto.
- **Amarka Adeegga Xabsiga ee 2800** ayaa ka hadlaya waxa xabsiga waajib ku ah inuu sameeyo si loo hubiyo in dadka ka socda gebi jinsiyadaha kaladuwan loola dhaqmo si fiican oo xaq ah. Maktabadda xabsiga ayuu nuqul ka yaallaa.
- Waxaad weliba akhrisan kartaa nuqulka qorshaha xabsiga ee lagu hubinayo in dadka ka socda gebi jinsiyadaha loola dhaqmo si fiican oo xaq ah. Waxaa kani loo yaqaannaa **Qorshaha Waxkaqabadka Sinnaanta JInsiyadeed.**

Sida habboon in laguula dhaqmo

Waa in xabsigu hubiyo in

- laguula dhaqmo si fiican oo xaq ah
- aad samayn karto waxyaabaha la xiriira caqiidadaada iyo dhaqankaaga. Matalan, xirashada dharka la xiriira caqiidadaada, haysashada buugaag diimeed iyo la socodka munaasabadaha diimeed
- aad qaadan karto cuntada la xiriirta diintaada iyo dhaqankaaga
- warbixinta buuggan oo kale ah aad ku heli karto luqado kale haddaad u baahato ama aad heli karto turjumaan luqadeed oo ku caawiya.

Waxaad samaynayso haddii si xun laguula dhaqmay sababtoo ah jinsiyaddaada, ama haddaad aragto qof kaloo taas lagu samaynayo

- ✓ La hadal shaqaale ama buuxi foom la yiraahdo **COMP 1** ama foom la yiraahdo **Racist Incident Reporting Form (Foomka Ka warbixinta Dhacdo Midabtakoor)**.

- ✓ Haddaadan dareensanayn inaad waxyaabahaas samayn karto, guddoomiyaha, maamulaha degmo, ama guddoomiyaha Guddiga Dabagalka Madaxbannaan ayaad si taas ka sir badan u weydiisan kartaa inuu eego waxa dhacay.

- ✓ Buuxi foom la yiraahdo **COMP2 confidential access complaint form (foomka cabashada ee araggiisu sir yahay)** si aad taas u samayso. Waxaad foomka ku ridi kartaa bokhshad xiran oo sirta loo ilaalin doono.

- ✓ Haddaadan weli faraxsanayn taas ka dib waxaad la xiriiri kartaa qof la yiraahdo Dhexdhexaadiyaha Xabsiyada iyo Carbinta.

- ✓ Ama waxaad la xiriiri kartaa urur la yiraahdo Guddiga gaarka ah ee Sinnaanta iyo Xuquuqul Insaanka. Waxay talobixin iyo gargaar siiyaan maxaabiista u arka in si xun loola dhaqmay sababtoo ah jinsiyaddooda. Waxaad iyaga kala xiriiri kartaa halkan

  The Equality & Human Rights Commission
  3 More London Riverside
  Tooley Street
  London SE1 2RG

  Telefoonka 0203 117 0235

Yaa kaa caawin kara inaad taas samayso?

Waxaad gargaar ka heli kartaa

- ✓ xubin kastoo shaqaalaha xabsiga
- ✓ xubin shaqaale oo la yiraahdo sarkaalka sinnaanta jinsiyadeed
- ✓ koox shaqaale oo la yiraahdo Kooxda Waxkaqabadka Sinnaanta Jinsiyadeed
- ✓ wakiillada maxaabiista. Kuwani waa maxaabiis tagta kulannada la xiriira jinsiyadda waxayna halkaa ka matalayaan ra'yiga maxaabiista kale
- ✓ shaqaale kale oo la yiraahdo isuduwaha ka hortagga xoogsheegashada ama isuduwaha kordhinta nabadda xabsiyada
- ✓ xubin ee Guddiga Dabagalka Madaxbannaan (dadka eega in xabsiyada si fiican oo xaq ah loo maamulo).

Haddaad tahay **maxbuus ajnabi ah** (tani waxay ka dhigan tahay in **aadan** haysan baasaboor Ingiriisi ah)

Waxaad gargaar ka heli kartaa

- ✓ xubin shaqaale oo la yiraahdo sarkaalka sinnaanta jinsiyadeed
- ✓ xubin shaqaale oo la yiraahdo sarkaalka xiriirinta ajnabiga
- ✓ safaaraddaada. Warqad ayaad u diri kartaa si aad gargaar u weydiisato ama sarkaalka sinnaanta jinsiyadeed ama sarkaalka xiriirinta ajnabiga ayaad weydiisan kartaa inay taas kuu sameeyaan
- ✓ cinwaanno warqado loo diro ayaa yaalla maktabadda xabsiga. Waxaad codsan kartaa liis la yiraahdo **Liiska Diblomaasiyeed ee London** ama waxaad eegi kartaa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4630**
- ✓ waxaad weliba warbixin, buggan oo kale ah, ku heli kartaa luqado kale.

Maxaabiista naafaysan

Sharci la yiraahdo Sharciga Kalasooca Naafeed ayaa jira si dadka naafaysan looga ilaaliyo in si xun loola dhaqmo.

Waa in xabsigu sharcigaas raaco. Waa inuu sameeyo waxuu karayo si loo hubiyo

- inaad ka qayb qaadan karto nolosha xabsiga
- in laguula dhaqmo si fiican oo xaq ah.

Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 2855**. Maktabadda ayuu nuqul ka yaallaa.

Yaa ku caawin kara haddaad tahay maxbuus naafaysan?

- ✓ Sarkaalkaaga shakhsi ahaaneed ama sarkaalka waaxdaada. Iyaga kala hadal wixii aad u baahato ee la xiriira naafonimadaada. Matalan, haddaad u baahato in warbixinta hab kale lagugu siiyo.
- ✓ Xubin shaqaale oo la yiraahdo sarkaalka xiriirinta ee naafonimada.
- ✓ Qof ka socda kooxda caafimaadka.
- ✓ Ama warqad ayaad guddoomiyaha u diri kartaa (waxay u badan tahay inaad u baahan doonto inaad buuxiso foom la yiraahdo **COMP1** si aad taas u samayso)
- ✓ Ama waxaad la xiriiri kartaa urur la yiraahdo Guddiga gaarka ah ee Sinnaanta iyo Xuquuqul Insaanka. Waxay talobixin iyo gargaar siiyaan maxaabiista u arka in si xun loola dhaqmay sababtoo ah naafonimadooda. Waxaad iyaga kala xiriiri kartaa halkan

The Equality and Human Rights Commission
3 More London
Riverside
Tooley Street
London SE1 2RG

Telefoonka 0203 117 0235

Sida cabasho ama codsi loo sameeyo

Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 2510**. Maktabadda ayaad nuqulkiisa ka helaysaa.

Samaynta codsi (waxay tani ka dhigan tahay wax weydiisashada)

- Sarkaal xabsi ayaad waqti kaste wax weydiin kartaa.
- Si aad wax u codsato waxaa waajibi karta inaad foom buuxiso. Haddii shaqaalaha xabsigu go'aansadaan inaadan heli karin wixii aad codsatay, waa inay sababta kuu sheegaan.

Sida cabasho loo sameeyo

- Waxaad cabasho samayn kartaa haddaad u aragto in si xun laguula dhaqmay xabsiga dhexdiisa.
- Waa inaad cabashadaada ku samayso **3** bilood gudahood ka dib marka dhibaatadu dhacdo.

  Si aad cabasho u samayso waxaad ama

  - horta u cabasho sheegan kartaa shaqaalaha xabsiga
  - cabasho u diri kartaa dad **ka baxsan** xabsiga (sida xildhibaankaaga).
- Horta isku day inaad dhibaatada horta ka xalliso dhinaca dadka xabsiga jooga. Dadka xabsiga ka baxsan waxay caadi ahaan filan doonaan inaad horta isku dayday inaad dhibaatada ka xalliso dhinaca shaqaalaha xabsiga.

1. Ka cabashada waxyaabaha ay ka mid yihiin

- Garsooridda (dhegeysiga).
- Qaybta amniga ee lagu geliyey.
- Go’aannada ku saabsan haddii hore lagaaga sii dayn karo xabsiga sababtoo ah matalan adoo qaba cudur ku dili doona ama maadaama ay aad u yar tahay halista inaad dembi kale geysato. Waxaa taas loo yaqaannaa **sii-daynta naxariiseed**.

- Noocyadaas cabashada waxaa loo yaqaannaa **mawduucyada reeban**. Waxaa ka go’aan gaari kara uun maamulaha degmo ama shaqaale kaloo xabsiga ka baxsan.
- Liiska mawduucyada reeban ayaa ku jira **Amarka Adeegga Xabsiga ee 2510 Lifaaqa H**. Waxaad kaas ka heli doontaa maktabadda.
- Waxaad codsi ku samayn kartaa ama waxyaabahan kaga caban kartaa oo keliya qoraal aad u dirto maamulaha degmo.
- Maamulaha degmo ayaa warqad kuugu soo jawaabi doona si uu kuugu sheego waxuu go’aansaday 6 asbuuc gudahood ka dib markuu warqaddaada helo.
- Waxaad cabasho u diri kartaa Dhexdhexaadiyaha Xabsiyada iyo Carbinta ama looyarkaaga haddaadan weli faraxsanayn. **Eeg bogga 115aad.**

2. Ka cabashada waxyaabaha kale

Sida cabasho loo sameeyo

1. Dhibaatada kala hadal xubin shaqaale. Haddaad leedahay sarkaal shakhsi ahaaneed, isaga la hadal. Taas ayaa dhibaatada xallin karta.

2. Hadday taasi wax xallin weydo, codso inaad la hadasho sarkaalka dhulka ama maamulaha waaxdaada.

War dheeraad ah oo ku saabsan cabashada

3. Hadday taasi wax xallin weydo, qoraal ku dhig cabashadaada. Waa inaad buuxiso foom la yiraahdo **COMP1** si aad taas u samayso. Foomkaaga aad buuxisay waa inaad ku riddo **sanduuq cabashooyin.** Foomkaaga toos ha ugu dhiibin xubin shaqaale.

4. Waxaa laguu soo celin doonaa foomka ooy la socoto jawaab kuu sheegaysa waxa shaqaalaha xabsigu ka yiraahdaan cabashadaada. Waa inaad jawaabtaada ku hesho 3 maalmood oo shaqo gudahood.

5. Haddii **aadan** ku faraxsanayn jawaabta aad ka heshay shaqaalaha xabsiga, waxaad codsan kartaa in cabashadaada mar labaad la eego adoo buuxinaya foomka **Comp 1A**.

Ku cabashada hab sidaas ka sir badan

- Si aad cabasho ugu samayso hab sidaas ka sir badan, waxaad buuxin kartaa foom la yiraahdo **COMP2 Confidential Access Complaint Form (Foomka Cabashada ee Araggiisu Sir yahay)**. Foomka ku qor sababta aad habkan sidaas ka sir badan ugu cabanayso.
- Waxaad foomka bokhshad xiran ugu diri kartaa guddoomiyaha, guddoomiyaha Guddiga Dabagalka Madaxbannaan ama maamulaha degmo.
- Waa inaad taas samayso uun haddii cabashadaadu khusayso wax aad u daran ama aad kuugu adag inaad kala hadasho shaqaalaha xabsiga.
- Qofka foomka aad u dirto ayaa ka go’aan gaari doona habka ugu fiican in loo baaro cabashada. Waxuu u baahan karaa inuu la hadlo dad kale, xataa qofka aad ka cabanayso.

Ka cabashada shaqaalaha

- Haddaad u aragto in shaqaalaha xabsigu ay jebiyeen xeerasha xabsiga ooy si xun kuula dhaqmeen, waxaad cabasho u diran kartaa guddoomiyaha ama maamulaha degmo. Xabsiyada khaas ah dhexdooda, waa inaad maareeyaha u dirato cabashooyinka ku saabsan saraakiisha haynta ee xabsiga.

- Buuxi foom cabasho oo la yiraahdo **COMP1** ama waxaad ku sii faraxsanaan kartaa inaad buuxiso foomka **COMP 2**. Foomka ku qor faahfaahinta qaladka aad u aragto in shaqaaluhu ay geysteen. Matalan, sheeg waxa dhacay, halkuu ka dhacay iyo goorta iyo haddii cid kale aragtay waxaas dhacay.

- Waxaa cabashada baari doona xubin sare ee shaqaalaha. Waxuu qofkaasi la hadli doonaa laftigaaga, qofka aad ka cabanayso iyo cidda aragtay waxa dhacay.

Haddii la soo ogaado inaad sax tahay, waxuu guddoomiyuhu

- Tallaabo ka qaadi doonaa xubinta shaqaale eed ka cabatay.

- U yeeri doonaa booliiska haddii loo baahdo.

- Kuu soo diri doonaa warqad uu kuugu sheegayo wixii lagu go’aan gaaray. Waxay taasi caadi ahaan qaadataa qiyaas ahaan 2 asbuuc. Maamulaha degmo ayaa warqad kuu soo diri doona haddaad ku cabatay habka sidaas ka sir badan ee la yiraahdo aragga sirta ah.

Ka noqoshada cabasho

- Haddaad ka noqoto waqti kaste ayaad cabashada joojin kartaa.

- U sheeg xubin shaqaale. Qofkaas ayaa ku weydiin doonaa inaad foomka ku qorto inaad rabto inaad cabashadaada joojiso.

Dadka kaleed la hadli karto ee xabsiga jooga

- Waxaad weliba cabashadaada kala hadli kartaa urur la yiraahdo **Guddiga Dabagalka Madaxbannaan**, ka dib markaad isku daydo inaad ka xalliso dhinaca shaqaalaha. Waxuu ururkani eegaa in xabsiyada si fiican oo xaq ah loo maamulo.

- Dadka ka tirsan Guddiga Dabagalka Madaxbannaan waa mutaddawiciin ka yimid bulshada xaafadda. Waxaa jira buugyare aad eegi karto oo ku saabsan Guddiga Dabagalka Madaxbannaan. Waaxdaada ayuu yaallaa.

- Waxaad u baahanaysaa inaad buuxiso foom si aad u codsato in Guddiga Dabagalka Madaxbannaan ay eegaan cabashadaada. Waaxdaada xabsiga ayaad foomka ka heli kartaa.

Guddiga Dabagalka Madaxbannaan **waxay**

- Guddoomiyaha weydiin karaan inuu macneeyo go’aan cabashadaada ku saabsan.

- Guddoomiyaha kala talin karaan waxa kalee la samayn karo.

- Muujin karaan war aanan hore loo eegin.

Iyagu **ma**

- Beddeli karaan go’aan xabsigu gaaray.

Dadka xabsiga ka baxsan eed cabashadaada u diri karto – ka dib markaad isku dayday inaad cabashada ka xalliso dhinaca shaqaalaha xabsiga

1. Dhexdhexaadiyaha Xabsiyada iyo Carbinta

- Waxaad warqad u diri kartaa qof la yiraahdo Dhexdhexaadiyaha Xabsiyada iyo Carbinta haddaad hore isugu dayday inaad cabashadaada ka xalliso dhinaca shaqaalaha xabsiga oo aadan weli faraxsanayn.

- Dhexdhexaadiyuhu uma shaqeeyo xabsiga. Shaqadiisu waa eegidda cabashooyinka maxaabiista ee ku saabsan nolosha xabsiga.

- Dhexdhexaadiyuhu cabashooyinka **adigu** aad soo dirtay uun ayuu eegi karaa.

- Waa inaad warqad ugu dirto dhexdhexaadiyaha **1** bil gudaheed ka dib marka shaqaalaha xabsigu ay kaaga soo jawaabaan cabashadaada.

- Dhexdhexaadiyaha gebi wixii aad karayso ugu sheeg warqaddaada u dirayso. Laftigiisu caadi ahaan kuuma iman doono si uu kuula hadlo markaa waxaad u baahan tahay inaad warqaddaada ugu sheegto gebi wixii aad karayso.

- Waa in dhexdhexaadiyuhu caadi ahaan qaato **12** asbuuc ama ka yar si uu u baaro cabashadaada. Qoraal ayaa laguugu soo sheegi doonaa go’aanka la gaaray.

- Haddii dhexdhexaadiyuhu u arko inaanan si habboon laguula dhaqmin, waxuu guddoomiyaha weydiin karaa inuu beddelo go’aankiisa ama waxuu isbeddello kula talin karaa madaxa Adeegga Xabsiga.

  Warqad dhexdhexaadiyaha ugu soo dir halkan

  Prisons and Probation Ombudsman
  Ashley House
  2 Monck Street
  London
  SW1P 2BQ

  Waa jira buugyare aad eegi karto oo ku saabsan dhexdhexaadiyaha iyo sida loo cawdo. Maktabaddda ayuu yaallaa.

2. Cabashooyinka ku saabsan caafimaadka

- Haddii cabashadaadu la xiriirto caafimaadka waa inaad horta la hadasho kooxda caafimaadka ee xabsiga.

- Hadday taasi wax xallin weydo, waxaad warqad u diri kartaa Ururkaaga Daryeelka Aasaasiga ah si aad ugu sheegto cabashadaada. Ururrada Daryeelka Aasaasiga ah waxay ka masuul yiihiin adeegyada caafimaadka sida takhaatiirta, takhaatiirta ilkaha iyo takhaatiirta indhaha ee xaafaddooda ku yaalla.

- Haddaadan weli faraxsanayn Guddiga gaarka ah ee Daryeelka caafimaadka ayaad weydiisan kartaa inay cabashadaada eegaan. Waxay shaqada ururkani tahay hubinta in adeegyada daryeelka caafimaadka si fiican loo maamulo.

  Warqad ku saabsan cabashadaada iyaga ugu soo dir halkan

  Healthcare Commission
  FREEPOST NAT 18958
  Complaints Investigation Team
  Manchester
  M1 9XZ

- Haddaadan ku faraxsanayn go'aanka Guddiga gaarka ah ee Daryeelka caafimaadka, Dhexdhexaadiyaha Baarlamaanka iyo Adeegga Caafimaadka ayaad markaa weydiisan kartaa inuu cabashadaada eego. Warqad dhexdhexaadiyaha ugu soo dir halkan

  The Parliamentary and Health Service Ombudsman
  Millbank Tower
  Millbank
  London
  SW1P 4QP

- Haddaad gargaar uga baahato samaynta cabasho ku saabsan caafimaadka, urur la yiraahdo Adeegga Talobixinta Madaxbannaan ee Cabashooyinka (Independent Complaints Advisory Service = ICAS) gargaar weydiso.

- Macluumaadkooda xiriirka waxaad ka heli kartaa shaqaalaha xabsiga, maktabadda xabsiga ama adigoo NHS Direct (NHS Toos) ka soo wacaya lambarka 0845 4647.

3. Xildhibaankaaga

- Waxaad warqad u diri kartaa xildhibaanka xaafadda gurigaaga.
- Hubi inaad cinwaanka gurigaaga ku qorto warqaddaad u dirayso.
- Xildhibaankaagaad weydiin kartaa inuu cabashadaada Dhexdhexaadiyaha Baarlamaanka iyo Adeegyada Caafimaadka u gudbiyo si uu isaguna u eego.

4. Looyarkaaga.

Looyarkaaga ayaa kaa caawin kara su'aalaha sharciga la xiriira.

5. Madaxa Booliiska.

Warqad ayaad u diri kartaa booliiska xaafadda haddaad u aragto in dembi la geystay. Qof la yiraahdo sarkaalka xiriirinta ee booliiska ee xabsiga weydii cinwaanka saxda ah eed warqaddaada u dirayso.

6. Waxaad codsi wadajir loo qoro u diri kartaa Boqoradda, baarlamaanka ama xubintaada Baarlamaanka Yurub.

Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 2510.** Waxaa halkaas ku jira foom aad nuqul ka samaysan karto si aad codsigaaga wadajir loo qoro u samayso.

7. Masuuliyiinta Magdhawga Dhaawacyada Dembiga.

Haddaad ku dhaawacantay dembi rabshad leh oo qof kuu geystay, warqad ayaad ururkan u diri kartaa. Waxay shaqadoodu tahay inay dadka magdhaw (lacag) ka siiyaan dhaawacyada ku gaara dembi rabshad leh ama sababo kale. Waxaad iyaga warqad ugu diri kartaa halkan.

CICA
Tay House
300 Bath Street
Glasgow
G2 4LN

Maamulka dembiilaha, qorshaynta xukunka iyo isku diyaarinta sii-daynta

Maamulka dembiilaha

Waxay tani ku saabsan tahay sida loo maamulo waqtiga aad ku jirto xabsiga ama ku kormeeridda bulshada.

Maamulka dembiilaha waxaa loo sameeyaa si loogu hubiyo in la yareeyo suurogalka dembi aad mustaqbalka geysato.

Waxaa dembiileyaasha dhammaantood loogu diyaarinayaa tartiib tartiib.

Baaristaada iyo qorshahaaga xukunka

Xabsiyada iyo adeegyada carbintu waxay isticmaalaan Nidaamka Baarista Dembiilaha. Waxaa kan loo yaqaannaa marka la soo gaabiyo **OASys** (Offender Assessment System = OASys).

Waxuu iyaga ka caawiyaa inay ogaadaan sababta aad dembiga u geysato iyo waxa aad u baahan tahay inaad samayso si aad u joojiso dembi geysashada.

Waxaa weliba loo isticmaalaa si loo ogaado haddii ay suurogal tahay inaad dhaawacdo laftigaaga ama dad kale iyo si lagaala shaqeeyo inaadan taas samaynin.

Qofwalboo ku jiri doona xabsiga 12 bilood ama ka badan nidaamka OASys ayaa qorshe loogu sameeyaa.

Baarista ayaad ka qayb qaadanaysaa waxaana lagu tusayaa gebi wixii la qoro.

Baarista ayaa la isticmaalaa si qorshe waxqabad loo dejiyo. Qorshahaas waxqabadka ayaa loo yaqaannaa **qorshahaaga xukunka.**

Matalan, qorshaha xukunku waxuu muujin karaa waxa aad samayn doonto si aad u beddesho habdhaqankaaga marmar ama sida aad wax uga qaban doonto dhibaatooyinka mukhaadaraadka ama khamriga la xiriira.

Qorshahaaga xukunku waxuu saamaynayaa ugu badnaan go’aannada iyo isbeddellada yimaadda muddada xukunkaaga iyo ka dib marka lagu sii daayo.

Maamulaha dembiilaha iyo shaqaalaha kale

Maamulaha dembiiluhu waa qof ka socda adeegga carbinta. Waxuu ka dhex shaqeeyaa bulshada waxuuna caadi ahaan ku caawin doonaa gebi waqtiga aad ku jirto xabsiga ama ku kormeeridda bulshada.

Waxuu kaa caawin doonaa inaad isbeddello ku samayso noloshaada si aad isaga yarayso suurogalka dembi aad mustaqbalka geysato.

Waxaad xabsiga weliba ku yeelan kartaa kormeere dembiile oo soo raaca sarkaalka shakhsi ahaaneed.

Waxay kaa caawin doonaan inaad ku eekaato qorshahaaga xukunka.

Kormeerahaaga dembiilaha iyo/ama sarkaalkaaga shakhsi ahaaneed waxay la shaqayn doonaan maamulahaaga dembiilaha. Meelo gaar ah, isla qof keliya weeyaan kormeeraha dembiilaha iyo sarkaalka shakhsi ahaaneed.

Haddaad qabto su’aalo ku saabsan nidaamka OASys ama maamulka dembiilaha, la hadal shaqaalaha xabsiga.

Habaynta Ilaalinta Shacabka ee Hay’ado Badan (Multi-Agency Public Protection Arrangements = MAPPA)

Booliiska, adeegyada carbinta iyo xabsiga ayaa tani isticmaala si ay xirfadleyaal kale ula maamulaan dembiileyaasha rabsheed iyo galmeed. Waxaa loo isticmaalaa si shacabka waxyeello looga ilaaliyo.

Waa laguu sheegi doonaa hadday tani ku khusayso.

Haddii lagaa qaado baaris MAPPA, waxaa loo isticmaali doonaa si loo sameeyo qorshaha maamulka halista. Waxay baaristu weliba shaqaalaha ka caawin doontaa inay ka go’aan gaaraan haddaad halis gelinayso dad kale, sida carruurta.

Qorshahaaga xukunka

Qorshahaaga waxaa ku jiri doona himilooyin.

Kuwani waa waxyaabo aad rabto inaad samayso ama beddesho.

Matalan, waxaad yeelan kartaa himilooyin la xiriira tacliinta sida

- ✓ qoraalka – wax akhriska iyo qorista
- ✓ tirada – xisaabta iyo maamulka lacagta
- ✓ barashada xirfad cusub si aad u sii awooddo inaad shaqo hesho markaad xabsiga ka baxdo
- ✓ maridda imtixaanno iyo qaadashada shahaadooyin.

Sida qayb ka ah qorshahaaga waxaa kugu waajibi karta inaad ka qayb qaadato kooxo ama koorsooyin kaa caawiya inaad ka fikirto sababta aad dembi u geysato iyo inaad beddesho habdhaqankaaga.

Tusaalooyinka qaarkood

Waxaa jira koorsooyin aad geli karto oo kaa caawiya inaad xaaladaha ka fikirto ood xukunto sida aad uga ficilceliso. Matalan

- Koorsooyin la yiraahdo Xirfadaha Xooggan ee Fikirka iyo Xoojiyaha Xirfadaha Garadka. Garadku waxuu ka dhigan yahay wixii la xiriira sida aad u fikirto.
- Koorso kaa caawisa inaad maamusho shucuurtaada oo la yiraahdo Xukumidda Carada iyo Barashada Maamuliddeeda (Controlling Anger and Learning to Manage It = CALM).
- Barnaamijyada Daawaynta Dembiilaha Galmada (oo badi loo yaqaanno SOTPs = Sex Offender Treatment Programmes).

War dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada

Waxaa jira barnaamijyo ku caawiya haddaad qabto dhibaatooyinka rabshadda.

Matalan

- Barnaamijka Xiriirrada Caafimaadka leh haddaad lammaanahaaga ku xadgudubtay.
- Barnaamijka Isku Beddelidda Caqliga haddaad badi rabshad leedahay.
- Barnaamijka Chromis Programme ee loogu talagalay dadka rabshad leh ee qaba dhibaatooyin gaar ah oo aanan lagaga caawin karin kooxaha kale.
- Barnaamijyo lagaaga caawiyo inaad dib ula degto bulshada xabsiga ka dib.

Tacliinta

Waxuu xabsiwalba leeyahay maktabad iyo waax tacliin.

Matabadda waxaa laguugu diyaariyey inaad u isticmaasho sida maktabadaha dadweynaha ee xabsiga dibaddiisa.

- Buugaag ayaad ka qaadan kartaa kana dalban kartaa.
- Waa inaad fursad u hesho inaad maktabadda tagto ugu yaraan 20 daqiiqo asbuucii.
- Maktabadaha intooda ugu badan waxaa yaalla buugaag ku qoran luqado kale.
- Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 6710.**

Waxbarashada

Ka hor intaadan casharro bilaabin waraysi ayaa lagaa qaadayaa waxaana la eegayaa taageerada aad uga baahan karto matalan wax akhriska iyo qorista. Waxay taasi kaa caawinaysaa inaad doorato koorsooyinka kuu habboon.

Waxaad yeelanaysaa jadwal iyo qorshe waxbarasho oo kuu gaar ah ood kala heshiisay shaqaalaha tacliinta.

War dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada

Waxaad casharro ka qaadan kartaa maaddooyin badan oo kaladuwan. Matalan

- wax akhriska iyo qorista
- xisaabta
- casharrada ingiriisiga ee loogu talagalay dadka ku hadla luqado kale
- farshaxanka
- casharrada ganacsiga.

Koorsooyinka aad barato waxaad gebi ku heli kartaa shahaadooyin laga aqoonsado xabsiga dibaddiisa, sida GCSEs ama NVQs. Waxaad markaa sii wadan kartaa tacliintaada markaad xabsiga ka baxdo haddaad rabto.

Waxaa lagaa caawin karaa koorsooyinka waxbarashada waraaqo is-dhaafsi, sida koorsooyinka jaamacadda Open University (OU).

Maxaabiista **21 jir ka weyn** waa in fursad loo siiyo inay ka qayb qaadaan ciyaaro sboorti ama casharrada Tababbarka Jirka ugu yaraan saacaad asbuucii.

Shaqada iyo tababbarka

Tababbarka

Adeegga Xabsigu waxuu la shaqeeyaa Golaha Waxbarashada iyo Xirfadaha. La xiriir sarkaalka tacliinta si aad war dheeraad ah uga hesho waxa aad ka heli karto Golaha Waxbarashada iyo Xirfadaha intaad xabsiga ku jirto iyo markaad ka baxdo.

Tababbarku waxuu ku saabsan yahay kaa caawinta barashada xirfado kaa caawin doona inaad shaqo hesho. Waxaa kaas loo yaqaannaa **tababbarka xirfadeed**.

Tababbarka xirfadeed waxuu badi ku xiran yahay casharro tacliimeed. Sidaas, waxaad ku qaadan kartaa koorso tababbar ah waxaanad heli kartaa shahaadooyin.

Matalan, waxaad koorso tababbar ah ka qaadan kartaa naqshadda iyo qurxinta. Isla waqtigaas, waxaad dhigan kartaa casharro xisaab iyo wax akhris si aad u qaadan karto shahaadada GCSEs ama Shahaado Xirfadeed ee Qaran (National Vocational Qualification = NVQ).

Xabsi kaste waxaa yaallaa buug la yiraahdo **tusiyaha tacliinta iyo waxbarashada** oo kuu sheegi doona koorsooyinka tababbarka ee xabsigaaga laga wado.

Shaqada

Waa in shaqadu ka mid noqoto waxyaabaha ugu badan eed maalintii qabato intaad xabsiga joogto. Waa in shaqadu qayb weyn ka noqoto sida lagaaga caawinayo inaad hesho xirfado iyo shahaadooyin si aad shaqo u heli karto markaad xabsiga ka baxdo.

Goor dhow ka dib markaad xabsiga timaaddo, baaris ayaa lagaa qaadi doonaa si loo eego nooca shaqada ee sida ugu badan kuugu fiicnaan doonto.

Shaqada xabsi waxaa caadi ahaan lagu qabtaa hoosooyin warshad iyo/ama cilmi beero (beer-falasho) iyo cuntubyo beer ka shaqayn. Badeecooyin ayaad samayn doontaa waxaanad bixini adeegyo looga baahdo xabsiga bulshadana laga iibiyo.

Shaqada cuntubyadaas waxay ku siini xirfadaha iyo khibradda ganacsiyada matalan

- dhar-samaynta
- injiniirnimada
- farsamada alwaax-qorista
- daabacaadda
- macluumaad gelinta kumbiyuutar
- qaabaynta caagga
- kumbiyuutar ku nidaaminta
- dayactirka dhulka.

Lacag ayaad ka heli doontaa shaqadaad xabsiga ka qabato. Lacag ayaa weliba lagu siin doonaa haddaad shaqo rabto laakiin aanay mid kugu habboon ka jirin xabsigaaga. Lacagtaasi caadi ahaan waa nuska intaad helayso haddaad shaqayso.

Shaqada bulsheed

U shaqaynta bulshada xaafadda ee xabsiga u dhow waxaa loo yaqaannaa **dibad ka shaqayn**. Waa fursad aad u hesho inaad isku-kalsoonidaada dhisto ka hor intaadan xabsiga ka bixin. Waxay weliba kaa caawin doontaa inaad sii fahanto masuuliyadda kaa saaran bulshadaada iyo dadka kula nool kulana shaqeeya. Dibad ka shaqaynta waxaa ka mid noqon doonta shaqo

- laga qabto mashaariic deegaaneed
- loo qabto dad waayeel ah
- loo qabto dad naafaysan
- laga qabto falal la xiriira ciyaaraha sboortiga.

Ururrada shaqada

Xabsiyo waxay leeyihiin ururro shaqo oo u gaar ah oo kaa caawiya inaad shaqo hesho markaad baxdo. Ururrada shaqadu waxay kaa caawin doonaan matalan isu diyaarinta waraysiyada iyo sida shaqooyin loo raadsado.

Shaqaalaha xabsiga weydii hadduu urur shaqo ka jiro xabsigaaga.

Xabsiyada intooda ugu badan waxaa jooga shaqaale loo tababbaray inay talobixin iyo taageero kaa siiyaan shaqada.

Mutaddawacnimada

Waxaad xabsiga ka noqon kartaa dhegeyste mutaddawac ah.

Ama waxaad yeelan kartaa shaqo gaar ah sida inaad maxaabiista kale uga hadasho kulannada ama gargaaridda goobta cibaadaysiga ama maktabadda.

Isku diyaarinta inaad xabsiga ka baxdo

Ka hor intaadan xabsiga ka bixin waxaad u baahan doontaa inaad ogaato

- ✓ Halkaad ku noolaan doonto.
- ✓ Sidaad kaalmooyinkaaga u xallinayso.
- ✓ Deeqahaad codsan karto si ay kaaga caawiyaan inaad hesho meel aad ku noolaato.
- ✓ Haddaad shaqaynaysay ka hor intaadan xabsiga gelin haddaad u baahan tahay inaad dirato foomam canshuureed.
- ✓ Haddii dharkaad ku gashay xabsiga ay weli ku le'eg yihiin.
- ✓ Hadday tahay inaad aragto adeegga carbinta aanad ku jirto shati.

Hantidaada

Markaad xabsiga ka baxayso gebi hantida khaaska ah, sida dharkaad xirnayd markaad timid, waa laguu celin doonaa. Xabsiyada intooda ugu badan waxay fursad kuu siiyaan inaad isku daydo dharkaaga xoogaa maalmo ah ka hor intaadan bixin. Haddaanay ku le'ekayn ama ku habboonayn xilliga sanadka laga joogo, saaxiibbadaa ama qaraabadaada ayaad weydiisan kartaa inay dhar kuu keenaan.

Haddaanay taasi suurogal ahayn, waa in Adeegga Xabsiga ku siiyo **dhar xorriyadeed**. Kuwani waa dhar aad xabsiga kaga baxdo oo ku le'eg kuna habboon xilliga sanadka.

Dharka ka war doono xoogaa maalmo ah ka hor marka aad baxayso.

Rukhsadda safarka

Waxaa lagu siin doonaa rukhsad safar ood ku tagto gurigaaga ama cinwaan kaloo Ingiriiska ku yaalla. Waxaad taas ku raaci kartaa tareen, bas ama bas weyn.

Deeqaha sii-daynta

Tani waa deeq aad ku sii noolaato ilaa intaad helayso Taageerada Dakhliga ama Taageerada Shaqo raadsadaha. Waa lacag yar – qiyaas ahaan £46.

Laguma siin doono deeqda sii-daynta haddii

- aad 18 jir ka yar tahay
- aad xabsiga ku jirayso 14 cisho ama ka yar
- aad xabsiga ugu jirto ganaax aad bixin weydey
- aad tahay maxbuus rayid ah
- lagu hayo ama aad masaafurin sugayso
- aad toos u tagayso isbitaal
- aad tagayso meel Ingiriiska ka baxsan ood ku noolaanayso
- aadan u qalmayn inaad hesho Taageerada Dakhliga
- laguu soo celiyey muddo ka yar 14 cisho.

Waxuu guddoomiyuhu weliba deeq kaloo yar siin karaa guri bixiye (hantiile) si uu kuugu helo meel aad degto.

Deeqdaas guddoomiyaha ayaa ikhiyaar u leh, xabsiguna waxuu eegi doonaa haddii meesha aad lacagta u rabto habboon tahay.

Guryeynta

Haddaad guri laawe noqonayso marka lagu sii daayo, waxaa jira ururro kaa caawin kara inaad guri hesho. Guryuhu waxay u badnaanayaan hostallo ama aqallo la wadaago. Haddaad leedahay maamule dembiile, isagaa taas weliba kaala hadlaya.

Cuntubka dib u dejinta ee xabsiga taas gargaar ka weydiiso.

Xabsiyo waxay isticmaali karaan kaydka macluumaadka Warbixinta Adeegga ee Si fudud loo Heli karo ee NACRO. Weydii haddii xabsigaagu taas samayn karo. Taasi waa warbixin kumbiyuutar ku jirta.

War dheeraad ah oo ku saabsan guryeynta

NACRO waa hay'ad samafal ah oo caawisa dadka xabsi ku soo jiray.

Waxaad iyaga kala xiriiri kartaa lambarka 0800 0181 259.

Shelter waa hay'ad samafal ah oo caawisa dadka guri laawe ah.

Waxaad Shelter kala xiriiri kartaa lambarka 0808 800 4444.

Lacagta iyo kaalmooyinka

Waxaad kaalmooyinka ka codsanaysaa xarunta shaqada ee **Jobcentre Plus**.

Xarunta Jobcentre Plus iyo lataliyeyaasha Xafiiska Kaalmada ee xabsigaaga ayaad gargaar ka weydiisan kartaa codsiga kaalmooyinka **ka hor** intaadan xabsiga ka bixin.

Haddaadan arki karin lataliye ka hor intaadan bixin, wac ama tag xaruntaada Jobcentre islamarka aad karto ka dib markaad xabsiga ka baxdo.

- Iyaga u sheeg inaad u baahan tahay inaad lataliye ku aragto **Qorshaha Bilowga cusub**. Kani waa qorshe loogu talagalay dadka xabsi ku soo jiray.
- Waxaad u baahan tahay inaad taas ku xalliso **7 cisho** gudahood ka dib markaad xabsiga ka baxdo. Waxaad markaa kaalmooyinka dalban kartaa laga bilaabo maalintaad xabsiga ka baxdo.

Ballantaada xarunta Jobcentre Plus waxaad u baahanaysaa in **aad u qaadato**

- Aqoonsi (identification = ID) nooc uun ah sida baasaboorkaaga, leysinkaaga gawaarida ama warqaddaada dhalashada.
- Lambarkaaga Caymiska Qaran.
- Warqad rasmi ah oo ka socota xabsiga.

Haddaadan ku noqonayn xaafadda gurigaaga, ama dukumeentiyadaas ay hayaan saaxiibbadaa ama qaraabadaadu, hubi inaad xalliso sidaad iyaga u heli doonto. Hubi intaas samaysay **ka hor** intaadan xabsiga ka bixin.

Canshuurta dakhliga

Haddaadan foomka **P45** ka haysan shaqadaadii ugu dambaysay, waxaa lagu siin doonaa foomka **P80-1** ee Waaxda Canshuuraha ka hor intaadan xabsiga ka bixin.

Waxaad u baahanaysaa inaad kaas buuxiso oonad u dirto xafiiska canshuurta ee ku hawl lahaa shaqadaadii ugu dambaysay.

Waxaad u baahan tahay inaad kaas u buuxiso si aad u hesho Gunnada Shaqo raadsadaha iyo Taageerada Dakhliga.

Haddaad iskiis-u shaqayste noqonayso, la xiriir xafiiska canshuurta ee xaafaddaada.

Deeqaha iyo deymaha

Haddaad qaadan doonto Taageerada Dakhliga ama Gunnada Shaqo raadsadaha ee Dakhliga ku Salaysan waxaad weliba heli kartaa **Deeq Daryeel Bulsho**.

Waxay deeqdani ku caawinaysaa haddaadan haysan dhar ama saabaan. Waxaa loo tixgelin doonaa muddadaad xabsiga ku jirtay. Waxaa weliba loo tixgelin doonaa haddii dhar lagaa xaday, kaa lumeen ama wax kaa noqdeen ama haddii culays badan ku saarmay ama kaa lumay markaasoo dharkaagu runtii ku le’ekayn.

Khasab kuguma aha inaad deeqdaas soo celiso.

Deeqaha kale

Haddaadan heli karayn Deeq Daryeel Bulsho waxaad heli kartaa **Deyn Dhibaato**. Waa inaad kaas soo celiso. Lacago ayaa si toos ah looga jari doonaa kaalmooyinkaaga ilaa intaad soo celinayso.

Caafimaadkaaga

Waxaad codsan kartaa inaad aragto takhtarka ama kalkaaliyaha caafimaad ka hor intaadan bixin haddaad ka walwal qabto caafimaadkaaga ama daawadaada.

Isticmaalka mukhaadaraadka dariiqeed marwalba waa khatar. Haddaad mukhaadaraad ku isticmaalaysay xabsiga, xusuusnow inay u badan tahay inay ka daciifan yihiin kuwa dibadda. Waxaad halis ku gelaysaa inaad xad dhaaf u qaadato mukhaadaraadka xabsiga dibaddiisa.

Haddii iminka lagaa daaweeyo dhibaatooyin mukhaadaraad, waxaa laguu gudbin doonaa adeeg daawayn mukhaadaraad ee bulsho oo daawaynta kuu sii wada.

Saacadda sii-daynta

Maalinta lagu sii daynayo, waxay u badan tahay inaad xabsiga ka bixi doonto ka hor 8.45 subaxnimo.

Haddii taariikhda lagu sii daynayo ay ku dhacdo Sabti ama Axad, waxaad bixi doontaa Jimcaha ka soo horreeya.

Haddii taariikhda lagu sii daynayo ay ku dhacdo Maalin la Fadhiyo, waxaad bixi doontaa maalinta ugu dambaysa ee la shaqaynayo ka hor Maalinta la Fadhiyo. Taasi waxay caadi ahaan noqonaysaa Jimce.

Haddaad sii-dayn sharafeed ku baxayso taariikhda lagu sii daynayana wiikeendi tahay waxaad markaa bixi Isniin. Hadday tahay Maalin la Fadhiyo, waxaad caadi ahaan bixi ka dib Maalinta la Fadhiyo. Talaaddo ayay taasi caadi ahaan noqonaysaa.

Shatiga iyo kormeeridda

Haddii xukunkaagu ka badan yahay 1 sano shati ayaa lagugu sii dayn doonaa. Dembiilaha yar eeg **bogga 159aad** maadaama aad yeelanayso shati haddaad 21 jir ka yar tahay. Waa inaad samayso waxyaabaha shatigaagu kugu amro, sida inaad meel gaar ah joogto ama aragto maamulahaaga dembiilaha.

Ku qabashada albaabka weyn

Haddii la filayo in lagu qaban doono markaad baxdo, guddoomiyaha ayaa taas kuu sheegi doona ka hor intaadan bixin, haddaanay booliisku rabin inaad ogaato. Haddii guddoomiyuhu kuu sheego inay taasi dhici doonto, waxaad u sheegi kartaa saaxiibbadaa, qoyskaaga iyo looyarkaaga.

Sharciga Baxnaaniska Dembiileyaasha

Kani waa sharci ku saabsan dembiyada la isku xukumo ee laga bannayn karo (saari karo) diiwaankaaga waqti ka dib.

Waxaa waqtiga loo yaqaannaa **muddada baxnaaniska**.

- Muddada baxnaanisku waa waqti go'an oo ka soo bilaabma taariikhdii dembi lagugu xukumay.
- Intay tahay waxay ku xirnaanaysaa xukunka lagu saaray, shaqo kuma leh dembiga ama muddadaad xabsiga ku soo jirtay.
- Marka dembi lagugu xukumay la banneeyo, khasab ma aha inaad sheegtid markaad shaqo codsanaysid, caymis qaadanaysid ama aad ku jirto dacwad dembi ama khaas ah.
- Marka dembi lagugu xukumay la banneeyo bannaan ayuu ahaanayaa, xataa haddii dembiyo kale goor dambe lagugu xukumo.

Xukunnada ka badan 2 sano iyo badh weligood lama banneeyo.

Waxay jadwalladani ku tusayaan muddada baxnaaniska ee loo filanayo muddooyin kaladuwan ee xukun. Waxay kuwani khuseeyaan xukunnada xabsi ku dhiga.

Xukunka	**Muddada baxnaanis 18 jir iyo ka weyn**	**Muddada baxnaanis Ka yar 18 jir**
Ka badan 2 sano iyo badh	**Marna lama banneeyo**	**Marna lama banneeyo**
Ka badan 6 bilood ilaa 2 sano iyo badh	10 sano	5 sano
6 bilood ama ka yar	7 sano	3 sano iyo badh
Ganaaxyo, carbin, adeeg bulsho, amarro isku jir iyo bandow	5 sano	2 sano iyo badh
Sii-dayn buuxda	6 bilood	6 bilood

Muddada baxnaanisku kuwaas way uga duwanaan kartaa xukunnada qaar

Xukunka	**Muddada baxnaanis 18 jir iyo ka weyn**	**Muddada baxnaanis Ka yar 18 jir**
Carbin, kormeerid, amar daryeel, sii-dayn shuruud leh ama ku adkayn	1 sano ama ilaa amarku dhammaanayo (joogsanayo), midkii ugu badan	1 sano ama ilaa amarku dhammaanayo (joogsanayo), midkii ugu badan
Amar xarun la yimaaddo, amarro isbitaal (oo leh ama aan lahayn amar xaddidaad)	5 sano ama 2 sano ka dib marka amarku dhammaado (midkii ugu badan)	1 sano ka dib marka amarku dhammaado

Marka ah inaad sheegto dembiyada lagugu xukumay ee la banneeyey

Waa inaad sheegto dembiyada lagugu xukumay ee la banneeyey haddaad shaqooyin gaar ah qabanayso.

- looyar
- takhtar
- takhtar ilko
- xisaabiye
- kalkaaliye caafimaad
- farmashiiste

Waa inaad sheegto dembiyada lagugu xukumay ee la banneeyey haddaad codsanayso shaqo ama inaad samafal ku qabato shaqo la xiriirta carruurta iyo dhallinyarada 18 jir ka yar.

Waa inaad sheegto dembiyada lagugu xukumay ee la banneeyey haddaad rabto inaad qabato shaqooyinka matalan

- gadeyaasha qoriyaha
- hawlwadeyaasha guri-khamaar
- agaasimeyaasha iyo maamuleyaasha shirkadaha iyo urrurada caymiska
- maamulaha guri xannaanayn
- shaqooyinka dawladda qaarkood
- qandaraasleyaasha gaashaandhigga

Waa inaad sheegto dembiyada lagugu xukumay ee la banneeyey haddaad waraaqo u codsanayso

- qoriyo
- buntukhyo gaaban
- qaraxdooyin

Haddaad codsanayso shaqo foomka codsiguna ku weydiiyo dembiyada lagugu xukumay ee **aan la bannayn** waa inaad sheegto.

Haddaad sidaas samayn weydo oo la soo ogaado, waa lagaa cayrin karaa shaqada sababtoo ah adoon iyaga u sheegin loo-shaqeeyahaaga.

Haddaad dalka kale tagayso waa inaad eegto xeerasha dalkaas ee khuseeya sheegidda dembiyada lagugu xukumay. Safaaradda dalka ayaa taas kuu sheegaysa.

Diiwaannada dembiga

Dembiyada gebi, ee la banneeyo ama aan la bannayn, waxay ku sii jiraan diiwaankaaga dembiga. Diiwaannadaas waxaa lagu hayaa Kumbiyuutarka Qaran ee Booliiska.

Waxaa laga saari karaa haddaanay booliisku kugu shaqo yeelan sanado badan ka dib.

Dembiyada diiwaansan qaarkood weligood lama saari doono, xataa haddaanay booliisku kugu shaqo yeelan sanado badan ka dib. Waxaa taas sabab u ah dembiga aad geysatay.

Ku sii-daynta Shati Ku meelgaar ah

Ku sii-daynta shati ku meelgaar ah waxay ka dhigan tahay inaad waqti gaaban ka bixi karto xabsiga.

Matalan waxaa ku sii-daynta shati ku meelgaar ah laguu oggolaan karaa

- ✓ marka waalid ama lammaane aad u xanuunsanayo
- ✓ si lagaaga caawiyo dib ula degidda bulshada xukunka markaad dhammaysato

Ku sii-daynta shati ku meelgaar ah waxaa caadi ahaan lagu soo gaabiyaa ROTL (Release on temporary licence).

- × Qofwalba looma oggolaado ROTL.

War dheeraad ah oo taas ku saabsan ayaa ku jira **Amarka Adeegga Xabsiga ee 6300.**

Qofwalba looma oggolaan karo ROTL. Maxaabiista **aanan** ku bixi karin shati ku meelgaar ah waa

- Qaybta A ama kuwa ku jira liiska baxsashada.
- Kuwa aanan dembi lagu xukumin iyo kuwa lagu xukumay laakiin aan weli xukun la saarin.
- Kuwa ku jira dacwad dal kale loogu dirayo – oo dal kale rabo sababtoo ah dembi laga yaabo inay halkaas ka geysteen.
- Kuwa xukun la saaray, laakiin loo hayo eedo kale ama sugaya in xukun laga saaro dembiyo kaloo lagu xukumay.
- Maxaabiista qaybta B looma oggolaan karo sii-dayn maalin ama habeen ah ee dib u degid laakiin waxaa la fasaxi karaa haddii qarabo u dhow dhimanayso.
- Haddaad xukun ku jirto mid kalena lagu saaro sababtoo ah amar kalawareegis ood bixin weydey, waxaad ROTL codsan kartaa uun waqtigaas dambe, kama codsan kartid xukunkaaga hore.
- Maxaabiista ku jira xukun xabsi daa'in waxaa caadi ahaan shati ku meelgaar ah laguu sii dayn doonaa uun hadday joogaan xabsiyo furan ama qayb furan.
- Maxaabiista ku jira xabsi daa'in ee shuruudo xiran waxaa shati ku meelgaar ah lagu sii dayn karaa hadday joogi karaan xabsiyo furan ama qayb furan laakiin aanan loo wareejin karin sababo caafimaadeed awgood.

Haddii guddoomiyuhu u arko in lagugu aamini karo xabsiga dibaddiisa waxaa jira 4 nooc oo shati oo ugu muhiimsan

Shatiga ujeeddooyinka gaarka ah

Waxuu kani socdaa xoogaa saacado ah waxaana loo helaa

- booqashada qaraabo dhimanaya oo isu dhowdihiin
- si loo tago aaska qaraabo kuu dhow
- adeegyada nikaaxa ama diimeed
- si daawayn loo doonto – muddada ballanta isbitaalka ama daawaynta
- si loo tago maxkamad, maxkamad gaar ah ama baaritaan.

Shatiga sii-daynta maalinta ah ee dib u degidda

Waxaa kan loogu talagalay

- ka qayb qaadashada mashaariicda adeegga bulsho ama waxyaabaha kalee xukunkaaga ka mid ah ee kugu waajiba inaad xabsiga dibaddiisa ka qabato si aad sii-daynta isugu diyaariso
- la xiriiridda qoyskaaga
- koorsooyinka tababbarka ama tacliinta ee ku saabsan xirfadaha nolosha iyo shaqada.

Shatiyada sii-daynta habeenka ah ee dib u degidda

Waxaa kan loogu talagalay waxyaabo la siman ka sii-daynta maalinta ah, laakiin waxaa kaloo loogu talagalay si aad u soo joogto meesha aad degi doonto marka xabsiga lagaa sii daayo.

Shatiga dib u degidda ee loogu talagalay daryeelka carruurta

Waxaa kan loogu talagalay maxaabiis gaar ah oo ilme 16 jir ka yar u ah waalidka ama daryeelaha keliya. Waxaa fasaxan la qaadan karaa 2dii biloodba mar – markaa 6 jeer sanadkii.

Qorshaha shatiga dhammaadka haynta (oo weliba loo yaqaanno ECL = end of custody licence)
Kani waa qorshe ku meelgaar ah oo la bilaabay 2007dii.

- ✓ Waxaa kan loogu talagalay gebi maxaabiista ku habboon ee xukunkoodu yahay 4 asbuuc ama ka badan, laakiin 4 sano ka yar.
- ✓ Qorshaha shatiga dhammaadka hayntu waxuu ka dhigan yahay in lagu sii dayn karo ilaa 18 cisho ka hor taariikhdaada rasmiga ah ee sii-daynta.
  - × Dadka qaarkood ma heli karaan ECL.

Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarsiinta Adeegga Xabsiga ee 42/2007**. Waxaad kaas ka helaysaa maktabadda xabsiga.

Haddii lagugu sii daayo qorshaha ECL waa inaad raacdo xeerasha xukunkaaga. Xabsiga ayaa lagugu soo celin doonaa haddaad jebiso shuruudaha (xeerasha) shatiga.

Lacag ayaa lagugu caawin karaa haddii qorshaha lagugu sii daayo. Kaalmooyin ma dalban kartid ilaa aad garayso taariikhda ahayd in lagu sii daayo.

Matalan, haddii qorshaha lagugu sii daaya 1da Maarso, laakiin xukunkaagu uu dhammaanayey 18ka Maarso, kaalmooyin ma dalban kartid ilaa 18ka Maarso.

Maxaabiista **aanan** lagu sii dayn karin ECL

- Dembiileyaasha galmada ee diiwaansan.
- Maxaabiista xukun ugu jira rabshad daran.
- Maxaabiista baxsaday mar hore oo la hayey.
- Maxaabiista hore u jebiyey mid kastoo ka mid ah shuruudaha kalee sii-daynta ku meelgaarka ah.

War dheeraad ah oo ku saabsan maxaabiista aanan lagu sii dayn karin ECL

- Maxaabiista aanan diyaarsan meel ay degaan.
- Maxaabiista la masaafurin doono markay xukunka dhammaystaan.
- Maxaabiista dal kale loo diri doono.
- Maxaabiista loo hayo eedo dheeraad ah ama sugaya in xukun wax kale laga saaro.
- Maxaabiista dib loogu soo celiyey xabsiga ee ka soo noqday bandow guri ku hayn ama shati kale.
- Maxaabiista ku jira barnaamij daawayn oo habboon inay raacaan markay baxaan, hadduusan maamulahaaga dembiiluhu waqti kaloo hagaagsan taas kuugu habayn karin.

Sii-daynta iyo kormeeridda

Waxaa jira xuruufo lagu soo gaabiyey ereyo la xiriira sii-daynta iyo kormeeridda

- SED – Sentence Expiry Date (Taariikhda Dhammaadka Xukunka)
- LED – Licence Expiry Date (Taariikhda Dhammaadka Shatiga)
- SLED – Sentence and Licence Expiry Date (Taariikhda Dhammaadka Xukunka iyo Shatiga)
- ACR – Automatic Conditional Release (Sii-daynta Rasmiga ah ee Shuruud leh)
- ADA – Additional Days Added (Maalmaha Dheeraadka ah ee Lagu daro)
- AP – All Purpose Licence (Shatiga Ujeeddo Kaste)
- HDC – Home Detention Curfew (Bandowga Guri Ku hayn)
- ARD - Automatic Release Date (Taariikhda Rasmiga ah ee Sii-daynta)
- NPD – Non-Parole Date (Taariikhda Sii-dayn sharafeed Ahayn)
- CRD – Conditional Release Date (Taariikhda Sii-daynta Shuruud leh)

Taariikhda, kormeerid ama kormeerid la'aan, lagugu sii daayo iyo muddada kormeeriddaasi soconayso, waxay ku xiran tahay muddada xukunkaaga iyo goortii dembi lagugu xukumay.

Waa wax aanan si fudud loo fahmi karin.

Haddaad su'aalo qabto waa inaad la hadasho shaqaalaha xabsiga ama maamulahaaga dembiilaha.

Bandowga guri ku hayn (Home detention curfew = HDC)

Maxaabiista ku jira xukun 3 bilood ilaa 4 sano ah waxaa hore loogu sii dayn karaa bandowga guri ku hayn. Waxaa kaas weliba loo yaqaannaa silig u xirid.

Waxaad sidaas ku xiranaysaa silig elektaroonig ah oo lagugula soconayo.

Waxaad yeelanaysaa xeerar aad raacayso oo ku saabsan halka aad tagi karto iyo saacadda kugu waajibta inaad guriga ku soo noqoto.

War dheeraad ah oo ku saabsan HDC

Si laguugu sii daayo Bandowga guri ku hayn, **waa** inaad haysato meel aad degto markaad xabsiga ka baxdo. Haddaadan haysan meel aad tagto **Adeegga Guri iyo Taageero ee Clearsprings** ayaad weydiisan kartaa haddaad ka heli karto meel aad degto.

Waxaad ka heli kartaa meel aad degto oo ka tirsan aqallo yar yar ama guryo kuwa is saaran ah. Waxay noqon kartaa meel aad la wadaagto ilaa 4 kaloo qof. Waa inaad cuntada karsato, meesha nadiifiso aanad kirada bixiso.

Guriga Clearsprings waxaa loogu talagalay uun muddada aad ku jirto Bandowga guri ku hayn.

Waa inaad xabsiga ku jirto xukunkaaga rubuciis ama 30 cisho (midkii ugu badan). Waxaad HDC ku jiri kartaa ilaa 135 cisho (4 bilood iyo badh).

Shaqaalaha ayaa eegi doona haddii HDC kuu habboon yahay. Waxay taasi ku xirnaan doontaa haddaad nabad gelinayso dadka kale haddaad xabsiga ka baxdo.

Waxaad dooran kartaa in **aanan** lagugu sii dayn HDC.

Haddii HDC laguu diido waad ka rafcaan qaadan kartaa. Isticmaal nidaamka cabashooyinka si aad taas u samayso.

Haddaad bandowgaaga ku jebiso sababo aadan wax ka qaban karin, sida adoo awoodi waaya inaad sii degganaato cinwaankaad ku heshiisay, waxaad codsan kartaa in HDC dib laguugu sii daayo.

Haddii xabsiga lagugu soo celiyo ka dib jebinta HDC-gaaga waxaa laga yaabaa inaanan mustaqbalka HDC lagugu sii dayn. Waxay taasi ku xirnaan doontaa haddaad soo hoos galayso Sharciga Caddaaladda Dembiga ee soo baxay 1991kii ama 2003dii. Haddaadan hubin la hadal xubin shaqaalaha ka mid ah.

War dheeraad ah oo ku saabsan HDC

Haddii lagugu soo celiyo xabsiga waad ka rafcaan qaadan kartaa.

Maxaabiista qaar **weligood** HDC looma oggolaan doono. Matalan

- Maxaabiista ay ku waajibto inay saxiixaan diiwaanka dembiilaha galmada.
- Dembiileyaasha rabshadda iyo galmada ee hadda ku jira xukun siyaado ah.
- Maxaabiista ka soo noqon waaya Ku sii-daynta Shati Ku meelgaar ah.
- Maxaabiista xabsiga ku soo gala amar isbitaal, amarsiin isbitaal ama amarsiin wareejin ah.
- Maxaabiista ku jira xukun la saaray markay raaci waayeen amar bandow.
- Qaar ka mid ah maxaabiista lagu soo celiyey xabsiga ka dib markay raaci waayeen shuruudaha bandowga ee HDC.
- Maxaabiista laga masaafurin karo Ingiriiska.
- Qaar ka mid ah maxaabiista, mar kaste, loogu celiyey xabsiga dembi ay geysteen ka hor intaanay dhammaan muddadii ‘halis ahaanshaha’ ee xukunkooda.
- Maxaabiista, marka xukun la saarayo, ay uga hadhay in ka yar 14 cisho bartamaha xukunkooda.
- Maxaabiista aanan ganaax bixin ama samaynin wax maxkamaddu iyaga ku amartay (xaqiraadda maxkamadda).

Waxuu war dheeraad ah ku jiraa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 6700.**

Sii-daynta sharafeed

Waxaa jirta warbixin gaar ah oo ku saabsan sii-daynta sharafeed oo loogu talagalay maxaabiista xukunno sii badan ku jira – sida xukunnada xabsi daa'in ama xukunnada aanan caddayn ee ilaalinta shacabka. Shaqaalaha xabsiga ama maamulahaaga dembiilaha warbixintaas weydiiso.

- ✓ Sii-daynta sharafeed waa marka hore lagaaga sii daayo xabsiga xukunkaaga adoon dhammaysan markaasood hoos gasho kormeeridda adeegga carbinta.
- ✓ Waxaad codsan (weydiisan) kartaa sii-daynta sharafeed 6 bilood ka hor taariikhda ugu soo horraysa ee lagu sii dayn karo.
- ✓ Go'aannada ku saabsan sii-daynta sharafeed waxaa intooda ugu badan gaara koox dad madaxbannaan ah oo la yiraahdo Guddiga Sii-daynta sharafeed.
- ✓ Xeerasha khuseeya sii-daynta sharafeed way u kaladuwan yihiin maxaabiista muwaadiniinta Ingiriiska ah iyo kuwa ajnabiga ah.
- ✓ Haddaad u baahato warbixin ku saabsan sii-dayntaada sharafeed garraaniga sii-daynta sharafeed ee xabsiga ayaad weydiin kartaa.

Sii-daynta sharafeed ee maxaabiista muwaadiniin Ingiriis ah

Sii-dayn sharaafeed waa hab aad shati xabsiga kaga bixi karto. **Eeg bogga 136aad.**

Maxaabiista intooda ugu badan, sii-daynta sharafeed waxaa u oggolaada koox dad oo la yiraahdo **Guddiga Sii-daynta sharafeed.** Guddigu kama tirsana adeegga xabsiga ama Wasaaradda Caddaaladda. Way wada madaxbannaan yihiin.

Si ay u go'aamiyaan haddaad sii-dayn sharafeed ku bixi karto, waxay Guddigu eegaan

- ✓ Warbixinno ay qoreen shaqaalaha xabsigu.
- ✓ Warbixinno ay qoreen shaqaalaha carbintu.
- ✓ Faahfaahinta dembigaagii hore (sababtii xabsiga laguu dhigay).
- ✓ Habdhaqankaaga xabsiga dhexdiisa.
- ✓ Haddaad ka taageero helayso saaxiibbo iyo qaraabo haysatana meel aad degto.
- ✓ Waxa sii-dayntaada u qorshaysan – matalan, shaqo ma haysataa?

War dheeraad ah oo ku saabsan sii-daynta sharafeed ee muwaadiniinta Ingiriiska

Waxaad codsan (weydiisan) kartaa sii-dayn sharafeed 6 bilood ka hor xukunkaaga nuskii. Taariikhda aad ku bixi karto sii-dayn sharafeed waxaa loo yaqaannaa Taariikhdaada U qalmista Sii-daynta sharafeed (Parole Eligibility Date = PED).

Khasab ma aha inaad sii-dayn sharafeed codsato haddaadan rabin.

4 bilood ka hor PED-daada, waxaa lagu weydiin doonaa haddaad rabto inaad aragto gebi warbixinnada loo dirayo Guddiga Sii-daynta sharafeed. Waxaa warbixinnadaas loo yaqaannaa **Galkaaga Sii-daynta sharafeed**.

Warbixinnadaas ayaad u isticmaali kartaa si aad wax uga qorto sababta aad u rabto sii-daynta sharafeed iyo waxa aad samayn doonto haddii lagu sii daayo.

2 bilood ka hor PED-daada dad ka socda Guddiga Sii-daynta sharafeed ayaa kulmi doona si ay dacwaddaada u eegaan. Kooxdaas yar waxaa loo yaqaannaa **Gole.**

Waxay rabi karaan inay kula hadlaan ka hor intaanay wax go'aansan.

Taariikhda iyo saacadda kulankaas ayaa laguu sheegi. Waxaad arki 1 xubin ee Gole.

Waa in waxaasoo dhan la xalliyo si aad go'aan uga hesho Guddiga Sii-daynta sharafeed ka hor Taariikhdaada U qalmista Sii-daynta sharafeed.

Guddiga Sii-daynta sharafeed waxuu ka fikiri doonaa halista dadweynaha uga taalla ku bixiddaada sii-daynta sharafeed iyo faa'iidooyinka kaaga imanaya.

Maxay	**Goorma**
Codso sii-dayn sharafeed	**6 bilood ka hor Taariikhdaada U qalmista Sii-daynta sharafeed**
Taariikhda U qalmista Sii-daynta sharafeed (Parole Eligibility Date = PED)	**Taariikhda ugu horraysa eed sii-dayn sharafeed ku bixi karto**
Eeg Galkaaga Sii-dayn sharafeed oo qor sababtaad sii-dayn sharafeed u rabto	**4 bilood** ka hor PED-daada
Kulanka Gole Guddiga Sii-dayn sharafeed	**2 bilood** ka hor PED-daada
La kulmidda qof ka socda golaha	2daas bilood gudahood
Hel go'aanka Guddiga Sii-daynta sharafeed	Waqti fiican ka hor PED-daada si aad sii-daynta sharafeed isugu diyaarin karto

Ogaanshaha sii-dayntaada sharafeed

Guddiga Sii-daynta sharafeed ayaa adiga iyo xabsiga idiin sheegi doona islamarka ay go’aan ka gaaraan sii-dayntaada sharafeed.

Waxaa jira 2 shuruudood oo taas ka reeban

1. Haddaad ku jirto xukun 15 sano ah ama ka badan.
2. Haddii xukunka lagu saaray ka hor 1dii Oktoobar 1992kii.

Hadday sidaas noqoto, waa in Guddiga Sii-daynta sharafeed ay ra’yigooda u sheegaan Xoghayaha Dawladda. Xoghayaha Dawladda ayaa markaa ka go’aan gaaraya sii-dayntaada sharafeed.

Haddii laguu diido (siin waayo) sii-daynta sharafeed

Sababaha Guddiga Sii-daynta sharafeed kuugu diiday sii-daynta sharafeed waxaa lagu dhigi doonaa qoraal loo soo diri doono xabsiga. Nuqul ayaad ka arki kartaa.

Go’aankaas **kagama** rafcaan qaadan kartid uun maadaama aadan waafaqsanayn.

Waxaad ka soo caban **kartaa** sida wax looga qabtay codsigaaga haddaad u aragto in taas si qalad ah loo sameeyey.

War ku saabsan cabashooyinka waxaad ka heli kartaa **bogga 110aad.**

Matalan, waxaad soo caban kartaa haddaad dareensan tahay in

- Aanan Guddiga Sii-daynta sharafeed loo dirin gebi warbixinta taageeraysa codsigaaga sii-daynta sharafeed.
- Aanan si habboon loo raacin nidaamyada (sida habboon in wax loo qabto) u yaalla codsiyada sii-daynta sharafeed.

Waa inaad looyar la hadasho haddaad dareensan tahay in go’aanku qalad ahaa.

War dheeraad ah oo ku saabsan haddii laguu diido sii-daynta sharafeed

Haddii sii-dayntaada sharafeed la diiday sanadwalba ayaa dacwaddaada dib laguugu eegi karaa. Waxay taasi ku xirnaan doontaa matalan muddada kaaga hadhay xukunkaaga ka hor Taariikhdaada Sii-dayn sharafeed Ahayn (Non-Parole Date = NPD).

Waxaa weliba laguu oggolaan karaa dib u eegid hore ama gaar ah. Waxay taasi ka dhigan tahay in goor taas kaba soo sookaysa dib laguugu eegi doono codsigaaga sii-daynta sharafeed.

- Dib u eegidda hore ama gaarka ah marar aad u badan lama oggolaado.
- Waxaa inta ugu badan lagu eegaa sida ay kuugu socdaan koorsooyinka loogu talagalay shaqada, baxnaaniska khuseeya mukhaadaraadka iyo wixii la mid ah.
- Waxaa weliba dib u eegid gaar ah laguu oggolaan karaa haddaanan waqti ku filan loo haysan si codsigaaga sii-daynta sharafeed dib loogu eego ka hor dhammaadka xukunkaaga.

Sii-daynta sharafeed iyo maxaabiista ajnabiga ah

Waxaa jira 2 dhinac oo muhiim ah oo ay kaga duwan tahay sii-daynta sharafeed ee loogu talagalay maxaabiista ajnabiga ah

- Haddaad u qalanto sii-daynta sharafeed toos ayaa laguugu tixgelin doonaa. Ikhiyaar uma lihid.

- Go’aannada ku saabsan sii-dayntaada sharafeed waxaa gaaraya guddoomiyaha xabsiga haddaanan lagugu xukumin dembi galmo ama rabshad, markaasoo Wasaaradda Caddaaladdu ay go’aanka gaarayso.

Haddaad tahay maxbuus ajnabi ah, hore ayaa laguugu celin karaa dalkaaga iyadoo la isticmaalayo Qorshaha Masaafurinta Hore. **Eeg bogga 151aad.**

Kormeeridda xerada dembiileyaasha dhallinyarada ah – eeg bogga 159aad

Haddii xukunkaagu 12 bilood ka yar yahay marka lagu sii daayo waxaad kormeerid ku jiraysaa ugu yaraan 3 bilood, si kastoo xukunkaagu u gaaban yahay.

- Waxaad u baahanaysaa inaad si joogto ah u aragto maamulahaaga dembiilaha ee carbinta.
- Kormeeriddu waxay dhammaan doontaa markaad 3 bilood ku jirto ama maalinta aad 22 jir gaarto, midkii soo horreeya.
- Haddaad jebiso shuruudaha kormeeriddaada waxaa lagu saari karaa ganaax ama xukun ah 30 cisho oo dheeraad ah oo aad xabsi ku jirto.

Xukunnada dadka waaweyn ee ilaa 12 bilood ah

Sii-dayntaadaada shuruud laguma xiri doono (AUR).
Maamule dembiile **kuma** kormeeri doono.
Warbixin la yiraahdo ogaysiin ayaa lagu siin doonaa. Ogaysiintaas ayaa kuu macnayn doonta waxay taasi ka dhigan tahay waana in aad saxiixdo.

- **Haddaad dembigaaga geysatay ka hor 4tii Abriil 2005tii akhriso qaybta ka bilaabmaysa bogga 146aad.**
- **Haddaad dembigaaga geysatay 4tii Abriil 2005tii ama ka dib akhriso qaybta ka bilaabmaysa bogga 148aad.**

➢ Dembiyada ka hor 4tii Abriil 2005tii

Qodobbada ugu muhiimsan

Muddada xukunka	Nooca sii-daynta
12 bilood ilaa 4 sano	Sii-dayn Rasmi ah oo Shuruud leh (Automatic Conditional Release = ACR)
4 sano iyo ka badan	Dhammaadka xukunka ama sii-dayn sharafeed
Xukunka siyaadada ah	Dhammaadka xukunka ama sii-dayn sharafeed laakiin waqti dheeraad ah ayaa shati lagu jiraa.

Ka badan 12 bilood laakiin ka yar 4 sano (ka hor 4tii Abriil 2005tii)

- Shatiga iyo kormeeriddu waxay soconayaan ilaa aad ku dhawaanayso dhammaadka xukunkaaga – marka rubuc kaaga hadho.
- Qaar ka mid ah maxaabiista lagu xukumay dembiyo galmo waxaa la kormeeraa ilaa dhammaadka xukunkooda.
- Waxaa siyaado ku noqonaya maalmaha dheeraadka ah ee lagu daro (additional days added = ADAs) ee lagaa saaro garsoorid. **Eeg bogga 89aad.**
- Taariikhda shatigaagu dhammaanayo waxaa loo yaqaannaa Taariikhdaada Dhammaadka Shatiga.
- Waxaa lagugu celin karaa xabsiga haddaad ku eekaan weydo shatigaaga.
- Maxkamaddu xabsiga ayay kugu celin kartaa haddaad dembi kale geysato ka hor Taariikhdaada Dhammaadka Xukunka.

Xoogaa ka hor intaanan lagu sii dayn waxaa lagu siin doonaa shatigaaga Sii-daynta Rasmiga ah ee Shuruud leh.

Waxuu kani kuu macnaynayaa shuruudaha shatigaaga waxuuna kuu sheegayaa magaca iyo cinwaanka sarkaalkaaga kormeeridda.

Shuruuduhu waxay noqon doonaan

- Inaad si joogto ah u aragto maamulahaaga dembiilaha.
- Inaad degganaato cinwaan la oggol yahay.
- Inuu booqashooyin kuugu yimaaddo maamulahaaga dembiiluhu.
- Inaadan dhib gelin.

Haddaad jebiso shuruudaha shatigaaga xabsiga ayaa lagugu soo celin karaa.

Haddii dembiga xabsiga laguu dhigay aad geysatay **ka hor 1dii Jannaayo 1999kii** aanad shatigaaga jebiso, maxkamadaha ayaa taas xallin doona.

Haddii dembiga xabsiga laguu dhigay aad geysatay **ka dib 1dii Jannaayo 1999kii** aanad heshiiska shatigaaga jebiso, waa in adeegga carbintu ka codsado Wasaaradda Caddaaladda in xabsiga lagugu soo celiyo.

4 sano iyo ka badan (ka hor 4tii Abriil 2005tii)

- Marka lagu sii daayo, shati aad ku baxdid ama Taariikhdaada Sii-dayn sharafeed Ahayn, shatiga iyo kormeeriddu waxay soconayaan ilaa aad ku dhawaanayso dhammaadka xukunkaaga – marka rubuc kaaga hadho.

- Qaar ka mid ah dembiileyaasha galmo waxay shatiga iyo kormeeriddu idiin soconayaan ilaa dhammaadka xukunka.

- Waxaad halis ahaanaysaa ilaa Taariikhdaada Dhammaadka Xukunka.

Xukunka siyaadada ah (dembiyada ka hor 4tii Abriil 2005tii)

Xukunka siyaadada ah 2 qaybood ayuu u kala baxaa

- Waqtiga xabsi lagu jiro.
- Waqtiga shati lagu jiro.

Matalan

Haddii xukunkaagu yahay 4 sano, oo ka kooban 2 sano oo xabsi ah iyo 2 sanoo shati aad ku jirayso.

Waxaad xabsi ku jiraysaa 2da sano nuskood – taasi waa 1 sano. Ka dibna waa inaad 6 bilood shati gasho, taasoo caadi u ah muddadaas xabsiga lagu jiro, iyo weliba 2 sanoo kale ood shati ku jirayso. Waxuu xukunkaagu ku dhammaanayaa 4 sano.

Sii-daynta hore waxaa ka go'aan gaari doona Guddiga Sii-daynta sharafeed haddii xukunkaagu yahay 4 sano ama ka badan waxaanay ku beegnaan kartaa waqti kastoo ka dambeeya markaad xukunkaaga nuskii xabsiga ku jirto.

Haddaad jebiso shuruudaha shatigaaga maamulahaaga dembiilaha ayaa codsan kara in xabsiga laguugu soo celiyo.

➢ Dembiyada la geystay 4tii Abriil 2005tii ama ka dib

Xukunnada caadiga ah ee 12 bilood ah ama ka badan laakiin ka yar 4 sano (ee khuseeya dembiyada 4tii Abriil 2005tii ama ka dib)

Waxaa lagugu sii dayn doonaa Shatiga Ujeeddo Kaste. Waxaad shati iyo kormeerid ku jiraysaa ilaa dhammaadka xukunkaaga (SLED).

Xoogaa ka hor intaanan lagu sii dayn waxaa lagu siin doonaa Shatigaaga Ujeeddo Kaste. Waxuu kani kuu sheegayaa shuruudaha shatigaaga waxuuna ku siinayaa magaca iyo cinwaanka sarkaalkaaga kormeeridda.

Shuruudaha u yaalla xukunnada caadiga ah ee 12 bilood ah ama ka badan laakiin ka yar 4 sano waxay noqon doonaan

- Inaad si joogto ah u aragto maamulahaaga dembiilaha.
- Inaad degganaato cinwaan la oggol yahay.
- Inuu booqashooyin kuugu yimaaddo maamulahaaga dembiiluhu.
- Inaadan dhib gelin.

Haddaad jebiso shatigaaga waa lagu ganaaxi karaa ama xabsigaad ku noqon kari.

Xukunnada siyaadada ah (ee dembiyada 4tii Abriil 2005tii ama ka dib)

Xukunka siyaadada ah 2 qaybood ayuu u kala baxaa

- Waqtiga xabsi lagu jiro.
- Waqtiga shati lagu jiro.

Matalan, haddii xukunkaagu yahay 8 sano oo ka kooban 3 sano oo xabsi iyo 5 sano oo shati. Waqtigaad xabsiga ku jirayso markaad nuskii gaarto (1 sano iyo badh), Guddiga Sii-daynta sharafeed ayaa ka go'aan gaari doona haddii lagu sii dayn karo. Haddii lagu sii dayn waayo, waxaad xabsiga ku jiraysaa ilaa dhammaadka waqtiga maxkamaddu kugu amartay inaad xabsiga ku jirto.

Marka lagu sii daayo, shati ayaad ku jiraysaa gebi inta xukunka kaaga hadhay.

Soo celinta ama Tirtiridda Shatiga

Haddii xabsiga lagugu soo celiyo waxaa laguu soo diri baakad la yiraahdo **Baakadka Wakiillada**. Waxuu baakadkani kaa caawinayaa inaad ka rafcaan qaadato in xabsiga lagugu soo celiyey.

Guddiga Sii-dayn sharafeed ayaa eega ku soo celinta xabsi. Waxay dacwaddaada ku eegayaan 28 cisho gudahood ka dib marka lagugu soo celiyo xabsiga. Guddiga Sii-dayn sharafeed ayaa goyni hadday sax tahay in xabsiga lagugu soo celiyo iyo haddii kale.

Haddaad rabto inaad rafcaan qaadato, dhakhso u samee. Warqad ayaad Guddiga Sii-daynta sharafeed u diri kartaa waana laguu yeeri karaa si aad iyaga ula hadasho.
War dheeraad ah oo ku saabsan soo celinta

Haddii xabsiga lagaaga sii daayo shuruudo, ama shati muujinaya waxa habboon inaad samayso, xabsiga ayaa dib laguugu celin doonaa haddaad xeerasha raaci weydo. Waxay sababtu noqon karta dembi kalood gasho ama xeerar kalood jebiso. Waxaa taas weliba loo yaqaannaa jebiska shatiga.

Haddaad ku eekaan weydo shuruudahaaga ama shatigaaga, waxan ayaa dhici doona

- Shati kastood ku jirtay islamarkaa ayaa la tirtiri (burin) doonaa.
- Waxaa loo sheegi doonaa booliiska (xaafadda iyo dalka), iyo weliba adeegga carbinta iyo xabsigii ugu dambeeyey eed joogtay.
- Waa lagu soo qaban doonaa waxaana lagugu celin doonaa xabsiga ugu dhow.
- Xabsiga lagugu hayo, iyo weliba adeegga carbinta, ayaa dadka Xarunta dhexe u sheegi doona in xabsiga lagugu soo celiyey.
- Waxaa laguu soo diri doonaa Baakadka Wakiillada waxaana lagu weydiin doonaa haddaad rabto inaad ka rafcaan qaadato go’aanka ah in xabsiga lagugu soo celiyey.
- Waa in Guddiga Sii-daynta sharafeed dacwaddaada ku eego 28 cisho gudahood ka dib markaad soo noqoto hadday rafcaan kaa helaan iyo haddii kale. Go’aanka ah in lagu soo celiyo ayay diidi doonaan ama raaci doonaan, waxay dejin doonaan taariikh dib laguugu sii daayo ama waxay dejin doonaan taariikh mustaqbalka dib loogu eego soo celintaada.
- Looyar ayaad la hadli kartaa haddaad taas gargaar uga baahato.

Maxaabiista ajnabiga ah

Qorshaha Masaafurinta Hore ee maxaabiista ajnabiga ah - ERS (Early Removal Scheme = ERS)

Qorshahani maxaabiista ajnabiga ah ayuu u fasaxayaa inay Ingiriiska ka baxaan ka hor intaanay xukunkooda dhammaysan.
Warbixin kugu saabsan ayaa loo diri doonaa Hay'adda Xuduudda iyo Haajiraadda. Hay'adda Xuduudda iyo Haajiraadda ayaa kuu sheegaysa haddaad ka bixi doonto Ingiriiska waxayna kuu habayn doontaa safarka kugu celinaya dalkaaga hooyo.

Waa inaad muddo ugu yaraan ku jirto xabsiga Ingiriiska dhexdiisa ka hor intaadan dib u noqon. Waqtiga ugu badnaan loogu talagalay ERS waa ilaa 270 cisho. Maxaabiista qaar looma oggolaan doono ERS. Matalan

- Maxaabiista ay ku waajibto inay saxiixaan diiwaanka dembiilaha galmada.
- Dembiileyaasha rabshadda iyo galmada ee hadda ku jira xukun siyaado ah.
- Maxaabiista xukun ugu jira Ku sii-dayn Shati Ku meelgaaroo ay kasoo laaban.
- Maxaabiista xabsiga ku soo gala amar isbitaal, amarsiin isbitaal ama amarsiin wareejin ah.
- Maxaabiista ku jira xukun la saaray markay raaci waayeen amar bandow.
- Maxaabiista lagu soo celiyey xabsiga ka dib mar kastoo ay raaci waayeen shuruudaha bandowga ee HDC.
- Maxaabiista, muddada xukunkooda hadda, lagu sii daayey HDC ama loo oggolaaday sii-dayn hore ee naxariiseed laguna soo celiyey xabsiga.
- Maxaabiista, mar kaste, loogu soo celiyey xabsiga dembi ay geysteen ka hor intaanay dhammaan muddadii 'halis ahaanshaha' ee xukunkooda.
- Maxaabiista, marka xukun la saarayo, ay uga hadhay in ka yar 14 cisho bartamaha xukunkooda.
- Maxaabiista aanan ganaax bixin ama samaynin wax maxkamaddu iyaga ku amartay (xaqiraadda maxkamadda).

Haddii aanan lagugu masaafurin ERS, xukunkaaga ayaad sii wadan doontaa.

Masaafurinta

Hay'adda Xuduudda iyo Haajiraadda ayaa kuu sheegaysa haddii lagu masaafurinayo markaad xukunkaaga dhammaysato.

Waxay xabsiga siin (u soo diri) doontaa Amar Hayn ee Haajiraad.

Ama xabsigaad ku jiri doontaa ka dib dhammaadka xukunkaaga ama Xarun Hayn ee Haajiraad ayaa lagu geyn doonaa ilaa Ingiriiska lagaa masaafurinayo.

Haddaadan rabin in lagu masaafuriyo waxaad u baahanaysaa inaad looyar la hadasho si aad u ogaato haddaad rafcaan qaadan karto.

Waxaad war dheeraad ah ka heli kartaa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4630.**

Dib u celinta

Ingiriisku waxuu dalal la leeyahay heshiisyo dib u celin. Waxay taasi ka dhigan tahay in maxaabiista qaar loo diri karo xabsi ku yaalla dalkoodii.

Waxaa dib laguu celin karaa haddii

- Aad muwaadin ka tahay dalka aad rabto inaad tagto.
- Xukunkaagu kama dambays yahay oo uusan rafcaan kaaga maqnayn.
- Dembiga aad geysatay uu noqonayo dembi dalka kale xabsi u dhigo dadka.
- Markaad codsigaaga dirto, ay kaaga hadheen ugu yaraan 6 bilood xukunkaaga ka hor intaanan lagu sii dayn.

Shaqaalaha xabsiga ayaa eegi kara haddii Ingiriisku heshiis dib u celin la leeyahay dalkaaga.

Waxaad u baahaynaysaa inaad isticmaasho nidaamka codsiga/cabashooyinka ee xabsiga si aad u bilowdo hawsha aad ku eegayso haddii dib laguu celin karo.
Waa in Ingiriiska iyo dalkaagu ay codsi rasmi ah ka diraan dib u celinta.

Shaqaalaha rasmiga ah ee safaaradda dalkaaga ayaad weliba weydiisan kartaa inay codsi kuu sameeyaan.

Waxaad liiska safaaradaha ka heli kartaa **Amarka Adeegga Xabsiga ee 4630**.
Waqti badan ayaa looga go'aan gaari karaa codsiyada dib u celin, marar ilaa 2 sano.

Ingiriisku waxuu caadi ahaan codsiyada dib u celinta diidi doonaa uun haddii

- uu kaa naaqusmayo waqtigaad xabsiga ku jirto haddaad dal kale u wareegto
- ay kugu maqan tahay lacag ganaax ama amar kaloo maxkamadeed.

Haddii dib laguu celiyo, waa inaad xabsiga ku jirto muddada kaaga hadhay xukunkii lagaa saaray Ingiriiska.

Dalkaad tagto xeerashiisa dib u eegidda xukunka, sii-daynta iyo kormeeridda ayaad raaci doontaa.

Wixii isbeddelaya ka hor intaadan saxiixin heshiiska dib u celinta ayaa laguu sheegi.

War dheeraad ah ayaa ku jira **'Repatriation of Prisoners Act 1984 – Information for Foreign Prisoners' (Sharciga Dib u celinta Maxaabiista ee 1984kii soo baxay – Warbixin loogu talagalay Maxaabiista Ajnabi ah)**, maktabadda xabsi dhexdeed.

Waxay warbixintan ku qoran tahay af Danish, Holandiis, Ingiriisi, Finnish, Faransiis, Jarmal, Giriig, Taliyaani, Burtaqiis, Sbaanish, Swedish iyo Turki.

U wareegidda xabsiyada Skotland, Waqooyi Ireland, jasiiradaha Channel Islands ama jasiiradda Isle of Man

Mararka xabsiyada Ingland ama Wales looga wareego xabsiyo ku yaalla dalalkaas waxaa loo yaqaannaa **u wareegidda maamul kale**.

Waxaad codsan kartaa wareegid joogto ah si ay qaraabada iyo saaxiibbadu kuugu iman karaan. Waa inay adeegyada xabsi ee laba dal wareegidda oggolaadaan.

Wareegiddu waxay leedahay 2 nooc

- Aan xaddidnayn – xukunkaaga gebi waxaa maamulaysa xaafaddaad u guurto waxaanad raacaysaa xeerashooda sii-daynta iyo kormeeridda sii-dayn ka dib.
- Xaddidan – Ingland iyo Wales ayaa shuruudo ku xiri doona wareegiddaada. Waxay kuwaasi khusayn karaan sii-daynta, kormeeridda sii-dayn ka dib ama soo celin.

War dheeraad ah oo ku saabsan wareegidda

Si aad nasiib fiican ugu yeelato in codsiga wareegidda laguu oggolaado adigu

- Waxaad u baahanaysaa inaad haysato 6 bilood ugu yaraan oo xukunkaaga kaaga hadhay ka hor taariikhda lagu sii daynayo.
- Waxaad u baahanaysaa inaadan lahayn rafcaan kaaga maqan dembi lagugu xukumay ama xukun lagu saaray.
- Waa inaadan maxkamadda ku noqonayn.

Waxyaabaha la eegi doono ee ka mid ah codsigaaga wareegiddu waa

- Sababta aad u rabto inaad wareegto.
- Haddaad ugu badnaan ku noolayd dalkaad rabto inaad ku noqoto.
- Haddaad halkaas ku leedahay qaraabo iyo saaxiibbo kuu dhow.
- Haddaad caddaysay inaad ku talajirto inaad halkaas ku noolaato ka dib marka lagu sii daayo.

Waxaad weliba codsan kartaa in shatigaaga lagu kormeero Skotland, Waqooyi Ireland, jasiiradaha Channel Islands ama jasiiradda Isle of Man. Maamulahaaga dembiilaha weydii sidaad taas u samayn karto.

Dembiilaha dhallinyarada ah iyo xerooyinka dembiileyaasha dhallinyarada ah

Waxaa qaybtan loogu talagalay dembiileyaasha dhallinyarada ah ee da'doodu tahay 18 ilaa 21 jir. Waxay kuu sheegaysaa qaar ka mid ah siyaabaha xerooyinka dembiileyaasha dhallinyarada ah ay uga duwan yihiin xabsiyada kale.

- Waxaad weli u baahanaysaa inaad ogaato ugu badnaan waxyaabaha buuggan intiisa kale ku jira.
- Xerooyinka dembiileyaasha dhallinyaro waxaa caadi loogu soo koobaa **YOIs.**

Shaqaale la yiraahdo **sarkaal shakhsi ahaaneed** ayaa u diyaar ah inuu ku caawiyo intaad YOI ku jirto. La hadal isaga haddaad su'aalo qabto ama gargaar u baahato.

Halkaad muddada xukunkaaga ku jirayso

- Waxaad muddada xukunkaaga ku jiraysaa xarun dembiileyaal dhallinyaro ah **(young offender institution = YOI).** YOI-daadu keli ayay noqon kartaa ama waxay ka tirsanaan kartaa xabsi dad waaweyn.
- Haddii lagu hayo, waxaad joogi kartaa xarun hayn oo YOI ama xabsi dad waaweyn ee xaafadda ilaa maxkamaddaada natiijo laga helayo.

Cidda go'aamisa halkaad ku jirayso muddada xukunkaaga

Haddii lagu saaro nooc xukun oo xabsi daa'in ah

(xarig cimri dherer, hayn cimri dherer, Marti U ah Boqorodda)

- Shaqaalaha YOI-ga ugu horreeya ee laguu diro marka dembi lagugu xukumo ayaa dhowr warbixin kaa qori doona.
- Marka kuwaas la sameeyo waxaa laguu diri meel la yiraahdo 'Xarunta Cimri dherer' si aad u sugto go'aanka kama dambays ah ee ku saabsan halkaad tagayso. Shaqaalaha Xarunta Dhexe ayaa markaa ka go'aan gaaraya halkaad ku dambaynayso eed muddada xukunkaaga ku jirayso.

Wixii khuseeya xukunnada la yiraahdo xukun hayn

- Xabsiga xaafadda ama xarunta haynta eed ku jirto ayaa ka go’aan gaari doona YOI-ga aad tegi doonto.

Waxa dhici doona marka ugu horraysa ee aad tagto YOI-ga

Markaad tagto YOI-gaaga maalmaha ugu horreeya waxaa laguu samayn doonaa wax la yiraahdo tilmaansiin. Taasi waa markaad

- Shaqaalaha xabsi ka su’aali karto ama kala hadli karto wixii kaa welweliya.
- Shaqaalaha xabsi weliba kala hadli karto waxaad YOI ka dhex qaban karto.

Qorshahaaga xukunka (haddii xukunkaagu yahay 4 asbuuc ama ka badan)

- Shaqaalaha xabsi ayaa kula samayn doona qorshe la yiraahdo **qorshaha xukun.**
- Waxuu qorshahaasi ka hadlayaa waxyaabaha adiga iyo shaqaalaha xabsi aad ku heshiiseen inaad samayn doonto intaad YOI ku jirto. Matalan, waxuu ka hadlayaa tacliintaada iyo shaqada aad qaban doonto.
- Haddii in ka yar 3 bilood kaaga hadhay YOI-ga, qorshuhu waxuu ka hadlayaa waxa aad u baahanayso inaad samayso si aad isugu diyaariso nolosha dibadda.
- Qorshahaaga xukunku waxuu caadi ahaan sii soconayaa ugu yaraan 3 bilood ka dib markaad ka baxdo YOI-ga. Sababtu waa qof ka socda adeegga carbinta (caadi ahaan maamulahaaga dembiilaha) ayaa kula eegi doona sidaad wax u waddo ka dib markaad YOI-ga ka baxdo.
- Dad la yiraa **maamuleyaal dembiile** iyo **kormeereyaal dembiile** ayaa kaa caawin doona inaad samayso gebi waxa ku jira qorshahaaga xukunka. Maamulaha dembiile waa qof ka socda adeegga carbinta oo ka baxsan xabsiga. Kormeeraha dembiile waa qof xabsiga ka tirsan. Sarkaalkaaga shakhsi ahaaneed ayaa weliba taas kaa caawin doona.

Waxyaabaha aad qaban karto intaad YOI ku jirto

Tacliinta

- Waxaad fursad u heli doontaa inaad waxyaabo cusub barato intaad YOI ku jirto.
- Gebi YOI-yadu waxay leeyihiin casharro aad tegi karto si aad wax u barato. Waxaa matalan lagaa caawin karaa wax akhriska, qorista iyo isticmaalka tirada haddaad u baahato.
- Casharradu waxay u badan yihiin maalintii laakiin qaar ayaa habeenkii noqon kara.

Tababbarka

- Waxaa jira tababbaro badan ood qaadan karto. Tababbarku waxuu kaa caawin karaa inaad barato xirfado cusub ama shaqo hesho.
- Waxuu weliba tababbarku kaa caawin karaa inaad shahaadooyin qaadato. Shahaadooyinku waa waxyaabo lagu siiyo markaad ku guulaysato imtixaanno, sida NVQs.
- Waxaad weliba mutaddawac ahaan uga dhex shaqayn kartaa bulshada xaafadda, laakiin haddii uun shaqaalaha xabsigu u arkaan inay taasi nabad tahay.

Tababbarka jirka (matalan sboorti ama jimicsi)

- Waxaad samayn kartaa matalan jimicsi iyo sboorti ugu yaraan 2 saacadood asbuucii.
- Waxaad taas samayn kartaa maalintii, habeenkii ama maalmaha wiikeendiga.
- Waxaad taas ku samayn kartaa dhismaha xabsiga gudihiisa ama dibaddiisa. Waa inaad maalin kaste waqti dibadda ku soo hawo qaadan karto.
- Haddaad dhaawac qabto ama u baahan tahay nooc gaar ah ee jimicsi taas markaa waa lagaa caawin karaa.

Waqtiga firaaqada (marar loo yaqaanno wadajoogga)

- Ugu badnaan YOI-yada waxaad ku heli kartaa ugu yaraan 1 saacad ah maalintii matalan aad la joogto maxaabiista kale, ciyaaro ciyaarto ama telefishin daawato.

Caqiidada

- Waxaad asbuuc kaste YOI-gaaga kaga qayb qaadan kartaa adeeg diin.
- Waa in adeegyo diyaar u ahaadaan caqiidooyinka kaladuwan. **Eeg bogga 78aad.**

Cabbidda sigaarka

- Sigaar **kuma** cabbi kartid meelaha loogu talagalay dadka 18 jir ka yar.
- Waxaa laguu oggolaan karaa inaad sigaar ku cabto **meelo** ka tirsan YOI-yada oo loogu talagalay dadka 18 ilaa 20 jir ah, laga yaabo dibadda iyo marar qolkaaga.

Isku diyaarinta nolosha YOI-ga ka dib

- Shaqaalaha xabsi ayaa ku caawinaya si aad isu diyaariso nolosha YOI-ga ka dib.
- Waxay kaala hadli doonaan matalan aragga maamulahaaga dembiile, halkaad degayso, shaqooyinka, caafimaadka, mukhaadaraadka, lacagta iyo qoyskaaga.

Waxa dhici doona ka dib markaad baxdo

Waad ka bixi doontaa YOI-ga laakiin waxaad weli u baahanaysaa inaad xeerar raacdo ugu yaraan 3 bilood ka dib markaad baxdo ama ilaa maalintaad 22 jir noqoto, midkii soo horreeya. Waxay taasi kordhaysaa haddaad muddo sii dheer ku jirto YOI.

Waxaa taas loo yaqaannaa ku jiridda **kormeerid.** Qof ka socda adeegga carbinta, oo u badan maamulahaaga dembiilaha, ayaa kula eegi doona sidaad wax u waddo ka dib markaad YOI-ga ka baxdo

- Kormeerid ayaad ku jiri doontaa haddii
    - aanan xukun lagaa saarin ganaax aad bixin weydey ama wax maxkamaddu kugu amartay ood samayn weydey (waxaa taas loo yaqaannaa xaqiraadda maxkamadda)
    - aadan 22 jir ahayn markaad YOI-ga ka baxdo.

- Qof ka socda adeegga carbinta ayaa kula socon doona ugu yaraan 3 bilood ka dib markaad ka baxdo YOI-ga.

- Waxaa lagu siin doonaa dukumeenti la yiraahdo **shati** markaad YOI-ga ka baxayso. Waxuu shatigu kuu sheegayaa xeerashaad u baahanayso inaad raacdo ka dib markaad baxdo.

- Waxaa sharci ahaan kugu waajibta inaad samayso waxyaabaha shatigu sheegayo. Waa inaad sheegto haddaadan fahmayn waxa shatigu sheegayo.

- Haddaad jebiso xeerasha shatiga waxaa kugu waajibi karta inaad ganaax bixiso ama ku noqoto YOI-ga.

- Haddaad ku baxdo **sii-dayn sharafeed,** waa inaad raacdo xeerasha shatiga ilaa taariikhda caadi ahaan lagu sii dayn lahaa. Waxaa taas loo yaqaannaa Taariikhdaada Sii-dayn sharafeed Ahayn.

Tusmada alifbeeto

Mawduuca	Bogga
A	
adjudications (garsooridda)	**89**
- on report (wargelinta)	**90**
- pleading guilty (qirashada dembiga)	**92**
- pleading not guilty (diidista dembiga)	**93**
AIDS (cudurka AIDS)	**70-71**
alcohol problems (dhibaatooyinka khamriga)	**73, 77**
appealing (rafcaan qaadashada)	**22**
arrival (imaanshaha)	**5**
assessment (baarista)	**118**
B	
benefits (kaalmooyinka)	**30, 127**
bills (biilasha)	**33**
C	
cell (qolka)	**6, 57-58**
chaplain (wadaadka)	**79, 81-2**
children (carruurta)	**29**
civil partnership in prison (lammaan sharci ee xabsi)	**46**

civil prisoners (maxaabista rayidka ah)	**16**
- early release (sii-daynta hore)	**17**
- contempt of court (xaqiiraadda maxkamadda)	**17**
- visits from family and friends (booqashooyinka qaraabada iyo saaxiibbada)	**40**
clothes (dharka)	**62**
complaints (cabashooyinka)	**110**
D	
declaring convictions (sheegidda dembiyada lagugu xukumay)	**132**
deportation (masaafurinta)	**152**
disabled prisoners (maxaabiista naafaysan)	**109**
doctor (takhtarka)	**67**
drug problems (dhibaatooyinka mukhaadaraadka)	**73, 77**
drug testing (baarista mukhaadaraadka)	**73 - 76**
F	
faith (caqiidada)	**78-82**
family and friends (qoyska iyo saaxiibbada)	**39**
- letters (waraaqaha)	**43-44**
- telephone calls (dirista telefoonka)	**44-45**
- visits (booqashooyinka)	**39 – 42**
H	
health (caafimaadka)	**65-72**

help in prison (gargaarka xabsiga dhexdiisa)	**37-38**
hepatitis (cagaarshowga)	**72**
high security prisons (xabsiyada amniga sare)	**55**
HIV (fayruska HIV)	**70-71**
home (guriga)	
- bills (biilasha)	**33**
- council tax (canshuurta dawladda hoose)	**33**
- income tax (canshuurta dakhliga)	**36**
- mortgage (deynka guryaha lagu gato)	**32**
- national insurance (caymiska qaran)	**34**
- pension (lacagta hawlgabka)	**35**
- rent (kirada)	**30-31**
home detention curfew (bandowga guri ku hayn)	**138-140**
I	
immigration detainees (muhaajiriinta la hayo)	**18**
- bail (damiinashada)	**19**
- help and advice (gargaarka iyo talobixinta)	**20-21**
L	
learning (waxbarashada)	**121-122**
leaving prison (ka bixidda xabsiga)	**125**
- benefits (kaalmooyinka)	**127**
- gate arrest (ku qabashada albaabka weyn)	**130**

- grants and loans (deeqaha iyo deymaha) - housing (guryeynta) - money (lacagta) - release time (saacadda sii-daynta)	**128** **126-127** **127** **129**
local prisons (xabsiyada xaafadda)	**54**
M	
marriage in prison (isku guursashada xabsiga)	**46**
medicine (daawada)	**68**
money (lacagta)	**59-60**
P	
parole (sii-daynta sharafeed)	**141 - 144**
private prisons (xabsiyada khaaska ah)	**55**
privileges (fursadaha)	**64**
punishment (ciqaabta)	**87 - 89**
R	
race equality (sinnaanta jinsiyadeed)	**106-108**
recall (soo celinta) - **foreign national prisoners (maxaabiista ajnabiga ah)**	**149-150** **151**
records (diiwaannada) - prison (xabsiga) - health (caafimaadka)	 **49-50** **69**
rehabilitation (baxnaaniska)	**130- 131**

release on licence (ku sii-daynta shati)	**134**
- childcare (daryeelka carruurta)	**135**
- end of custody licence scheme (qorshaha shatiga dhammaadka haynta)	**136-137**
- ROTL (ku sii-daynta shati ku meelgaar ah)	**134**
- resettlement (dib u degidda)	**135**
- special purposes (ujeeddooyinka gaarka ah)	**135**
religion (diinta)	**78- 82**
repatriation (dib u celinta)	**152-153**
rules (xeerasha)	**83- 86**
S	
searches (baarista)	**103-104**
segregation (kalasaarka)	**99-100**
sentences (xukunnada)	**25**
- how long (muddada)	**26-28**
- sentence plan (qorshaha xukunka)	**118, 120**
adult prisoners (maxaabiista dad waaweyn ah)	**26, 145**
- on or after April 2005 (Abriil 2005 ama ka dib)	**27, 148-149**
- on or before April 2005 (Abriil 2005 ama ka hor)	**26-27, 146-148**
- before October 1992 (ka hor Oktoobar 1992)	**28**
- up to 12 months (ilaa 12 bilood)	**26,145**
young offenders (dembiileyaasha dhallinyarada ah)	**145**

smoking (cabidda sigaarka)	**60- 61**
solicitors (looyarrada) - letters (waraaqaha) - visits (booqashooyinka)	**47** **47** **48**
special accommodation (degaanka gaarka ah)	**100-101**
supervision (kormeeridda)	**138**
T	
training (tababbarka)	**122**
training prisons (xabsiyada tababbarka)	**54**
transfers (wareegidda)	**153-154**
U	
unconvicted prisoners (maxaabiista aanan dembi lagu xukumin) - bail (damiinashada) - court (maxkamadda) - sureties (hubeyaasha)	**7** **8** **9-11, 13** **11-12**
W	
work (shaqada)	**123-124**
Y	
young offender (dembiilaha dhallinyarada ah)	**155**
- **arrival (imaanshaha)** - **education (tacliinta)**	**156** **157**

- **leaving (bixidda)**	**158**
- **sentences (xukunnada)**	**53, 145, 155**
- **supervision (kormeeridda)**	**159**
- **training (tababbarka)**	**157**

Wixii ku saabsan Ururka Dib u habaynta Xabsiga

Ururka Dib u habaynta Xabsiga waxay shaqadiisu tahay dhisidda nidaam xabsi oo xaq ah welibana hagaagsan. Si aannu taas u samayno waxaannu eegnaa sida xabsiyadu u shaqeeyaan, waxaannu warbixin siinnaa maxaabiista, shaqaalaha iyo dadka ka baxsan waxaanan dawladda iyo masuuliyiinta weydiisannaa inay isbeddello sameeyaan.

Waxaa mahadnaq mudan

- Adeegga Xabsiga ee Boqoradda (Her Majesty’s Prison Service = HMPS). Ururka Dib u habaynta Xabsigu waxuu weliba maxaabiista iyo shaqaalaha xabsiga HMP Wandsworth uga mahadnaqayaa gargaarka ay buuggan ka bixiyeen.

- Ururka Dib u habaynta Xabsigu waxuu sanduuqa Big Lottery Fund iyo Sanduuqa Xasuusashada Diana, Amiiraddii Wales uga mahadnaqayaa taageerada ay siiyaan hay’addayada samafalka ah ee wanaajinaysa warbixinta la siiyo maxaabiista.

- Hay’adda caafimaadka maskaxda ee Mencap

Lambarka IBSN 0 046209 86 3

What is this book about?

- What you need to know about prison life.
- Prison rules and ways of doing things.
- Your rights.

"The handbook is like an A-Z of information for prisoners. We could never do without it."

Adeleke, prisoner HMP Wandsworth

"When a prisoner first comes into prison he often doesn't know the questions he needs to ask. This guide is an invaluable aid."

Prison Officer

Ministry of JUSTICE

Safer Custody and Offender Rights
NOMS
1st Floor, Fry,
2 Marsham Street
London, SW1P 4DF
www.hmprisonservice.gov.uk

PRISON REFORM TRUST

Prison Reform Trust
15 Northburgh Street,
London, EC1V 0JR
Tel: 020 7251 5070
e-mail: prt@prisonreformtrust.org.uk
www.prisonreformtrust.org.uk

Prison Service Vocab Number BZ032 (Rev 2008) Form Number 2311
ISBN 0 946209 86 3
Printed by HM Prison Service
Prison Reform Trust Registered Charity No. 1035525
Company Limited by Guarantee No. 2906362 Registered in England & Wales